# MEE MAGECEENNII?

**W.Q: QAASIM XIRSI FAARAX**
**(DUULLAAN-JECEL)**

***DAABACADDII KOOWAAD.***

***WAXAA LA DAABACAY DEC: 1995 KII.***

***XUQUUQDIISA OO DHAMI WAXA***
***AY U XAJISAN TAHAY QORAAGA:***
***QAASIM X. FARAX.***

# MEE
# MAGECEENNII?

***(Sil. Siy. Lam: 3)***

**W.Q: QAASIM XIRSI FAARAX**
(DUULLAAN JECEL)

**Waxaan U hibeeyey:**

***Hooyadey, Salaado Aden***

# GOGOL DHIG

Eebbe weynaa mahadsan, Adeegihiisayna nabad gelyo iyo naxariis korkiisa ahaatay, rumeeyeyaalkaana u ducayn mudan. Eebbe ha na waafajiyo samafalka iyo dan u adeegga hana nagu abaal mariyo shuquladeenna wan wanaagsan ee isaga u barax la', inta habawsanna Allaha hanuuniyo.

Qabiil qaran ma noqdaa? qaranse qolo qolo ma u qaybsamaa? qabiilse qaarad ma noqdaa?. Weydiimahani waxa ay u baahan yihiin jawaabo sugan, ka dib marka ay jawaabtooda helaanna waxa ay u baahan yihiin ku hawl gal iyo meel marin wixii ka soo baxa.

Tan kale ee in aannu is weydiinno mudani waxa ay tahay Mee magaceennii? qabiilka Soomaaliyeed ee ka midka ah afarta qabiil ee ugu taariikhda dheer geeska Afrika (Nuubi, Qibdhi, Amxaaro iyo Soomaali), hadduu nasiib u yeeshay in uu noqdo dawlad madax banaan iyada oo ay kuwii ku faca ahaa ku kala firirsan yihiin qabiillo iyo dawlado kale ma dawbaa in uu isa sii kala findhiciliyo mise waa in uu soo aruursadaa kuwii ka lumay?. Haddaba MEE MAGECEENNII?.

Warkii oo kooban oo Koombo ku alxaman ha loo noqdo qabiilkii iska laan gaabka ahaa ee Soomaaliyeed, kaas oo weligiis isku ahaa ul iyo diirkeed isku ahaa. Maxaa yeelay MIDNIMADEENII MUGDI GASHOO MAGECEEN BA'YEEY. Hana la soo helo magicii dhabta ahaa ee lagu midaysnaa berigii la isku wada qabiilka ahaa. Waxaas oo dhan waxa aad ka soo dhex helaysaa akhriska buuggan la magac baxay MEE MAGECEENNII?.

# ***ARAR.***

Tan iyo markii aan caqliyeystay waxa aan dareemayey hagardaamooyin iyo colaado qabiileed oo aan damin, waxaan dareemayey in aan dhibbane ahay, hase ahaatee waxa aan garan la'aa halka ay eedda la iga gudayaa iga raacday, weliba cuqdada iyo colaadda la ii qabay waxay ii suuraynaysay sidii in aan dhiig galay.

laakiin waxa aan mar walba ka fikirka dhacdadan khatarta ah ee aan la ila ogeyn aanana soo ban dhigi karin ku soo gaban gabaynayey kolley awoowayaashaadii horaa galay dambiga adiga imminka laguu haysto oo waa gartood in ay dadkani ku colaadiyaan.

Hase ahaate markii aan is weydiiyo miyaad adigu dambi cidna ka gashay maxaa laguu huruufayaa? waxa aan hadana isku qancinayey maya laakiin sharciga ayaa ah in dhaxal ahaan la isaga gudo dambiyadii ay galeen awoowayaashu, maxaa yeelay tani waa sida ay dadka oo dhami isku raacsiisan yihiin, marka laga eego sida ka muuqata macaamilka.

Biya dhaca sheekadu waxa ay tahay; kolkaan malcaamadda aado ayaan arki jiray caruurta iga yara weyn ee wax garadnimada iigaga horaysa oo i wada ximinaya, iyaga oo si dadban geeska ii gelinaya. Inkastoose aan dhawr jir ahaa haddana waan garanayey in la igu galayo ka dhalasho aan reer Hebel ka dhashay.

Waxaanse marnaba maskaxdayda ku heshiisiin waayey laba fikradood oo kala ah in reer Hebelka aan ka dhashay ay bahallo dadka cuna yihiin iyo in qoyskanagu aanu nahay kuwa ugu miskiinsan xaafadda oo dhan walba kaga taag daran dadka ay la deriska yihiin.

Akhristow mucjisadan aan bixin waayey ma ahayn mid iga hartay ilaa maanta ee waxa ay mar walba igula saan qaadaysay hadba marxaladda lagu jiro, waxaanan weli ugu sii dambeeyaa eedaysane kiis aanan garan goorta aan galay, iyada oo ay arintu sida gabbal dayihii hadba gees iila janjeersanayso.

Aan soo yareeyee tani ma ahan mid aniga keli ah igu kooban laakiin dhammaanteenba Soomaali waxaannu isu nahay eedaysanayaal aan is ogeyn, waayo waxaan ka kala dhalanay reer Hebel- tani waa sida ay ku caadiyowday dabeecadda Soomaalida ee xinka iyo xasadka nafjeclaysiga ah ku dhisan.

Inta badan ee Soomaalida aniguna aan ku jiro waxaa na haysta dhib sii dheeri ah oo waxa aan ka kala nimid laba qolo oo is qoonta islana quudata mararka qaarkood, taasina waxa ay na gelisaa ciriiri iyo caro dheeri ah oo aan inta kale dheernahay marka ay foodda is geliyaan labadii aan ka kala nimid oo aannu weyno meel aan u erkanno iyo si aannu u kala dhex galno.

Waxaa dhacda in hortanada lagu gawraco kii dad noogu sokeeyey ayana kidfayaan kuwii dad noogu sokeeyey, waxaa dhegeheena ku dhacaya dhagarta iyo hagardaamada ay reer tolkeen u dejinayaan reer tolkeen iyagase cadawgood ah, waxa ay qaraabadeen hortanada ku bililiqaystaan hantidii qaraabadeenii kale oo aanaan yac ka dhihi karin.

Haddii aan soo booqanno guriga Abtigeen waxa aannu arkaynaa reer Abtigeen oo dhibsanaya daqiiqadaha aan la joogno, maxaa yeelay waxa ay ka baqayaan in aan war ka qaadno iyaga oo nagu xisaabinaya cadawgoodii, sidaa si la mid ah markaa aan booqanno guriga Adeerkeen waxa ay joojinayaan sheekadii u socotay iyaga oo isugu baaqaya; Waa nala ku dhex jiraa.

Waxa ay labadeenii qaraababa noo arkaan in aannu barbar ka xaaraan nahay barbarna ka xalaal nahay, ayna haboon tahay in mar walba la iska keen ilaaliyo. Intaas waxaa inoo dheer dhegxumada, dhega ku hadalka, ku dheregdhacsiga, iyo dhiilada colaadeed ee ay labada qolo midba dhankooda nooga miisayaan.

Waxaas oo dhamiba ha inagu dheceene sidee baan u kala fujinaa kolka ay goradda iska leefaan labadii nala kala dhalatay ee aannu u dhexaynay? aan tusaale u soo qabsado mid ka mid ah kumanaanka qiso ee kala qaraar ee aniga iyo inta dhankan igala midka ah ka soo mara ku dhex walaahowga laba qolo oo is diidan, aanan ku kala jirno tirsi ahaan:

Mid ka mid ah qisooyinka i dhkafaariyey waxa ay ahayd markii aan arkay is faham la'aan guracan oo ka dhex socday qoys isla dhashay, isna dhalay. Taas oo ahayd:

laba walaalo laxmi ah la wada ah walaalkoodii uu midba dhinac kala xiriiray ayaa isku mar ugu soo wada martiyeen Muqdisho qolkii keliga (iskaabulo) ahaanta uu ku degenaa, kase midka ahaa gurigii ay reerkoodu wada deganaayeen ee Muqdisho, 1983 kii.

Labadaan walaallo inkastoo ay is bar garanayeen hadana in muddo ah ayey ku kala jireen laba ciidan oo is rifaysa, qola walbana ay u harjadayso sidii ay qolada kale hilibkooda haadda ugu wari lahayd.

Waxay labadaydii walaal Keeb la yuurur isku ahaadaanba, Allaha mahadda leh ayaa iyaga oo aan is ogeyn isku mar wada dareensiiyey foolxumada, kolkaa ayuu nin waliba iskiis u soo tuuray xabaddii oo soo magan galay Muqdisho iyo ciddiisii. Haddaba waa lagama maarmaan in mid walba la waraysto,

Maxaa wacay Hooyadu ma arkin inankeedaas tan iyo habeenkuu saanqaadka ahaa, kan kale oo ay Hooyo labaad u ahayd isna ma aysan arkin tan iyo toban jirkiisii, Aabbaha iyo cidda inteeda kale oo dhamina waa la mid oo waxa keli ah oo la maqli jiray magacyadooda, sidaa darteed marka ay damacdo Hooyadu waraysiga Curadkeeda ee ay weydiiso wax ku saabsan ciddii iyo xoolihii, waxa ay dantu keenaysaa in uu ku jawaabo:

Geelii reer Qansax (cidda ay hooyadii u dhaxday, walaalihiisna yihiin) baa dhacay, Adeer Hebelna wayba dileen, sidoo kale hebla iyo hebelba waxay u dileen si silic iyo saxariir leh, iyo kumanaan kale oo ka sii qaraar, laakiin inta uusan hadalka dhamays tiran ayuu walaalka kale ku soo boodayaa oo ku leeyahay;

War maxaad beenta u sheegaysaa? maxaadse war xumadaas ugu dhex sheegaysaa caruurta, ma in aad fidnadiinii nala soo gashaad doonaysaa? waxaana halkaas ka bilaabanaya kala qabad iyo kala maslaxayn, sidaa oo kale marka kii kale wax laga weydiiyo ciddii ayuu ku jawaabayaa;

Kuwii xumaaye aad qaraabada ahaydeen ayaa dhulkii ciddii ka kiciyey oo reerihii way kala qaxeen. Markaa ayuu hadana ninkii kale halkiisii ka soo miisanayaa isaga oo leh; War maad beenta iska daysid, reer Qurac, weligood dad ma gardaraysane, idinka ayey idinka baxsan waayeene.

Inankii ay labadiisii walaalood dab iyo gaaska isku ahaayeen waxa uu u hilosanyahay sheekada labadiisa walaal ee midna ay hooyadiis macaan u dhashay midna Aabihiis macaane, kuwaas oo uusan maanta ka hor la kulmin fursadna u yeelan in uu la sheekaysto ama warsado, sidaa awgeed ayuu ka codsanayaa in ay u sheekeeyaan.

Nasiib darrase marnaba ugaga ay sheekayn mahayaan Macallin ganaaxay, arday ay is dagaaleen, iyo laylis ku adkaaday toona illeen maba aysan soo marine ee waxa ay keliya oo uu mid walba ka sheekayn karaa isaga oo weliba aad u xamaasadaysan oo u khushuucsan waa keliya maalintii ay isaga iyo ciidankiisu kan kale iyo ciidankiisa ka guulaysteen oo sida ba'an u jebiyeen, laakiin walaalkii kale qudhiisu intaa in la mid ah uun buu ka sheekayn karaa.

Sidaa darteed waa in ay qalka iska laacaan iyaga oo is beeninaya uuna mid walba sheeganayo in uu gar leeyahay,

taasi waxa ay sababaysay in lagu mashquulo kala ilaalintooda iyo kala maslaxayntooda, iyada oo lagu kala oranayo: *ADNA GAR BAAD LEEDAHAY ADNA JID BAAD LEEDAHAY*, wax barashadii walaalka dhibanaha ah ee qaaliga ahayd iyo waxaa kale oo iyana halkaa inta badan ku seegsan Filimadii la jeclaa iyo weliba ballamadii saaxiibada lala lahaa.

Kolka waxa uu walaalka dhibani isku dayaa in uu markaste oo uu Magaalada hoose u dhaadhacayo midkood wato si uu wax u soo kala tuso, uguna kala badbaadiyo guriga, nasiib darase waxa ay mar walba gelinayaan tu ka daran tii laga cararayey oo waxay foodda is darayaan dadka la gula kulmo shaneemooyinka, Basaska, iyo Suuqa iyaga oo qofkii taabtaba sanka la raacaya oo daalac u raacanaya halka uusan qofka reer magaalka ihi ka dareemayn wax taabtay iyo wax riixay toona. siiba marka la dhex jibaaxayo meelaha ciriiriga ah.

Waxa ay dhacdadaasi aad usii cuslaatay ka dib markii uu labadii walaal midkood ka qaxay gurigii isaga oo ku adkaysanaya gurigu waa guri cadaw oo reer Habel baa fariistay, habeenkii dambana kii kale uu seexday Jardiino isaga oo ku andacoonaya; waxaan u baqayaa naftayda oo guriga waxaa igula nool nin reer Habel ah.

Taasi waxay kaga mid ahayd tusaale ahaan dhibaatooyin fara badan oo rasmi ahaan u haystay aniga iyo inta badan Soomaalida oo igala mid ah xagga u dhexaynta laba qolo oo iska soo hor jeedda,

Waxaana igu kallifay in aan taa xuso in aan ogahay in in fara badan oo dadweynaha ka dhashay reerka Soomaaliyeed ay sidayda oo kale yihiin qori labada dhinac ka gubanaya oo marka ay soo booqdaan Abtiyaalkood ganac cadaawe loo rogayo iyada oo la is aruurinayo lana qarsanayo wixii sir ugu muuqday, intaas keli ahna ma ahee lagu salaamayo colaad iyo jikaar au ku kasbadeen dhalashadii reer Aabbe awgeed.

Kolka ay ka soo caal waayaan reer Abti oo ay usoo leexdaan reer adeerna ay la kulmaan tu ka sii daran tuhunkii hore, ayna dhacdo in looga kaco goobaha fadhiyada iyada oo lagu eedaynayo in ay barbar ka xaaraan yihiin oo aan wax sir ahna lagu aaminan karin waxtar iyo dadnimana aan lagaga raja qabin oo uu nuqsaan yahay, ayna intaa usii dheer tahay digashada iyo dhega ku hadalku.

Dhibanayaasha noocaas ah ee Soomaaliyeed ee aan cidina jabkooda ogeyn waa kuwa ugu horeeya ee dhab ahaan u doona nabadaynta, mana ahana kuwa ku kala dhex galay shaagaga wareegaya xagga dhalashada oo keliya ee waxaaba

ka sii badan kuwa ku kala dhex galay xagga isu dhixidda iyo isu dhalidda, ama xagga saaxiibtinimada iyo is jacaylka, ama xagga dan wadaagnimada iyo iskaashiga ku dhisan wada shaqaysiga.

Dhan kaste oo laga eegaba waxaa cadad beelay dadka aan laba dhan u kala go'i karin oo ay xaajadu ku qalloocan tahay, kuwaas oo naxdin iyo uur ku taallo u gooni ah la beer barara marka ay qoladoodu hortooda ku silcinayaan hantidii, dadkii, iyo duunyadii ay qoladooda kale iska lahayd.

Haddaba ka dib markii aan hubsaday in dhibanayaashani ay yihiin kuwa ugu horeeya ee la asiibay, dhan walba oo loo jiidana ay iyaga uun mahadhadu haysaato, aysana soo marin dhacdo aan ku reebin murugo iyo utun culus oo ka boog weyn tan kuwa kale ayaan go'aansaday in aan ugu horaynta iyaga qoraalkaan ugu tacsiyeeyo.

Waxaanan dhibanayaashaas ku guubaabinayaa in ay iyagu u kacaan sidii ay walaalohooda waashay gacanta uga qaban lahaayeen oo ugu soo hagi lahaayeen waddada nabadda iyo badbaadada, iyaga oo ka duulaya Xadiithka uu suubanaha Maxamed NNKHA ku leeyahay:

(ÃäÕÑ áÃÎÇß ÙÇáãÇ Ãæ ãÙáæãÇ)

“U gargaar walaalkaa haddii gardaran yahay iyo haddii laga gardaran yahay intaba”

Taas oo macneheedu yahay hadduu walaalkaa gar daran yahayna gacan qabo oo ka jooji gardarrada uu dadka kale ku hayo, haddii laga gardaran yahayna u hiilli. Uhiillidaasina ma ahan sida tan maanta socota ee ah reer hebel baa nin naga dilay ee aan weerarno.

War iyo dhammaantiis dhibanayaashaan oo aan ka dhib yarayn dhibanayaasha caanka ah ee uu dhab ahaanta u asiibay dagaal qabiileedka Soomaaliyeed ee ah dumarka iyo caruurta (*Vulnerable group*), waxay mudan yihiin in ay raadshaan daawada iyo xalka Soomaaliyeed, sidaa darteed iyaga ayaan ku xusay qoraalkaan, jiilalka dambe ee Soomaaliyeed ka sokow.

## Cutubka koowaad.

# WAA MAXAY SOOMAALI?

**Mar hadduu xaqqu kula jiro ku dheg xaqqa cad, hadaad gar leedahayna xagso gartaada, laakiin hadduu xaqqu ku garab maray gadaal u laabo, haddaadan gar lahayna miiska madaxa ku garaac.**

***Waxaa yiri: Qaasim Xirsi***

# *SOOMAALIYA*

## WAA MAXAY SOOMAALI/YA?

Soomaaliya ama Jamhuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya - marka la tixraaco magac bixintii dawladdii ugu dambaysay, waxay juqraafi ahaan dhacdaa geeska bari ee Africa. Waxayna xuduud la leedahay; xagga waqooyi gacanka Cadmeed, bari iyo koofurna badweynta Hindiya, koonfur galbeedna Kenya, galbeedna Ethiopia. Masaafada dhul ee ay ku fadhido lagama hayo ilaa hadda cabbir sax ah oo la isku raacsan yahay, waxaase la xisaabshaa inta ay ku fadhiyaan labada gobol ee ka kala xorowday gumaysigii Ingiriiska iyo Talyaaniga, kuwaasoo ah; 637,657 KM oo isku wareeg ah (246, 201 sq mi), iyada oo ay markaa sii dhimanaanayso saddex gobol marka laga sii reebo Suqandara oo iyana la oran karo gobolkii lixaad.

Cimilo ahaan waa dhul kulayle ama kulayle xigeen ah, roobabkuna ku yaryihiin. Heerkulkeedu wuxuu celcelis ahaan gaaraa 27.8 c (82 f), kaas oo laga yaabo in uu mararka qaarkood gaaro oc (32 f) meelaha buuraleyda ah, halka uu dhul xeebeedkana ka gaaro ilaa 46.7 c (116 f). Sanadkii oo dhan roobka ay helaan waxaa lagu qiyaasaa 279 mm (11 in).

Muuqaal ahaan dad, duunyo iyo dalba way ka yara duwan yihiin dunida inteeda badan. Waxaa dadkooda lagu gartaa qaab ahaan; midab maarriin ah, dhirir, dhuubnaan, iyo ka soocnaan qaab dhismeed, oo ay kaga duwan yihiin guud ahaanba dunida inteeda kale. Xagga dabeecadana waxaa lagu gartaa xanaaq badan, hadal badan, gaajo iyo rafaad u adkaysi, lacag samayn iyo lacag lumin deg deg ah, iyo isbahaysi gaar ahaaneed. Da'dooda nololeed waxay noqdaa celcelis ahaan 53 jir. Waxaa dhulkooda lagu gartaa abaar qalalan, geedo gaagaaban, boor, dihnaan, iyo cidlo.

Dhaqan-dhaqaale ahaan, inkastoo ay ku nool yihiin dhulka ugu kheyraadka badan gobolkaas, hadana dhamaanba dhulku waa iska dihin yahay, aqoon li'i laga qabo awgeed, lamana oga inta kheyraad ku jirta oo ma maalaan lagamana maalo. Dhawaanahan kolkii ay dawlad la'aanta ku raageen ayey dhacday in qofaf qawlaysato ahi ay ku ololeeyaan sidii ay u xadi lahaayeen wixii kheyraad ku jira dalka bad iyo bariba.

Waxayna kula heshiiyeen dadyow ajnabi ah in ay uguraan, laakiin waxaa weli la is leeyahay taasi ma ahan mid wax saa usii weyn ka goyn karta. Waxaa khatar weyn ku haya kheyraadka badda in la sumeeyo badda, lana gurto xayawaanka dhedig.

Waxaa ku badan dalka xoolaha nool oo ay ka dhaqdaan Soomaalidu saddex nooc oo kala ah; Adhi, Lo' iyo Geel, laakiin intuba waxay u ban yaalliin khatar dabar go' dayac iyo dandarro awgeed. Markii ay dadkii u yaaceen magaalooyinka iyo dagaalada qabiileed waxaa la waayey wax xanaaneeya xoolihii. Waxayna u egtahay in la nacay. Dad yar oo isku daya in ay udhoofiyaan Gacanka Cadmeed uma aaba yeelaan nooca xoolo ee ay dhoofinayaan, kumana helaan wax bedel macquula ah ee waxaa looga qaadaa si handadaad awood dhaqaale ku dhisan ah. Calafsiin, caafimaad dhawrid, biyo dhig iyo xanaaneyn kale toona warkeed ha sheegin.

Sidaa darteed aad ayuu mudadii uu dagaalka sokeeye socday isu dhimay lambarka xoolaha nool ee dalku. Tusaale; tira koobtii ugu dambaysay ee la qaaday bilowgii sideetamaadkii waxay sheegaysay in Geelu uu ahaa 6.7 million halaad, laakiin maanta waxaa la qiyaasayaa in ay ka joogto 3.9 million oo keli ah. Adhiga wuxuu ahaa 39.6 million, laakiin maanta qiyaas ahaan waa 28.5 million.

Xoolaha kale ee loo yaqaan Ugaadha maba dhaqdaan. Soomaalidu Way ka baqaan ama ka xishoodaan, in aysan waxba ka ogeyn waxtarkoodana waa midda ugu weyn cillada. Waxaana ugu badan xoolahaas duurjoogta ah Ugaadha joogta; Yaxaaska, Libaaxa, Dhurwaaga, Maroodiga, Biciidka, Gorayada, Cawsha, Deerada, Aalada, Geriga, Sagaarada, Lo' gisiga, Jeerta, Jibisada iyo ciidaanyo Masas iyo Abeesooyin ah. iyo weliba guud ahaanba intii habardugaag ah. Dad aad u yar oo isku dayey in ay ka manaafacaadsadaan xoolahaas waa lagu ceebeeyey - arimo siyaasadeed awgood, markaa ayey iska daayeen.

Khudaarta, miraha lagu qadeeyo, miraha lagu faakihaysto, iyo cuntooyin dhireedka siyaabaha kale loo isticmaalo waxa ay daadsan yihiin dhulka intooda badan, laakiin loogama faa'iidaysto si munaasab ah ama rasmi ah. Waxaa intaa ka sii daran manfaca kale oo ku baaray sida; xabagta, beyada, mayraxda, alwaaxa, baalmada, qolofta iyo qalabyo kale oo badan.

Wax Wershad ah oo ilaa hadda dalka ka shaqeeyaa ma jiraan. Xoogaa Wershado ah oo ay tayadoodu hoosays o ayaa jiray markii ay ka jirtay dawladdii ugu dambaysay ee ka carartay

dalka 26 Jan, 1991 kii, waxaana ka mid ahaa; Wershadihii Sonkorta, Caanaha, Hilibka, Khudaarta, Shamiitada, Suufka, Kalluunka, Saliidda la cuno, Haraga, Sifaynta badroolka, Dawada, sigaarka &taraqa, birta, iyo kuwa kale oo yar yar. Waxa ugu weyn ee ay weligood sameeyeene waxa ay ahayd isku kabka qalabka baabuurka yar ee Landrover iyo socodsiintiisa.

Haddaba is dhinkaas dhaqaale oo dhan awgeed, waxa ay maanta ummadda Soomaaliyeed ku nooshahahay xaalad faqri tii ugu xumayd. Iyada oo awalba ku jirtay shanta wadan ee dunida ugu faqiirsan ayaa hadana la waayey nidaam dhisan iyo shaqo loo kalaho, nooc ay ahaan lahaydba. Wax kaalmo dibadeed ah oo loo siiyo si rasmi ah ma jirto, oo waxaa la waayey hab loola dhaqmo oo lagu quudiyo.

Dadka qaarkood waxa ay wax ka sugaan wiilashoodii oo qaxooti ku ah dalal shisheeye, kuna nool nolosha ugu liidata halka ay joogaan. Sidaa darteed waxaa inta badan loo xabisaa ama loo dilaa caruurta ku maqan dibada wax la xiriira dhac iyo khayaano lacageed oo ay miciin bideen si ay dadkoodii gaajo uga badbaadiyaan, iyada oo uu qaaraankii qabiilka ee hub gadistuna u sii dheeryahay. Marka ay lacagtaa yari soo gaarto qoyskana waxaa inta badan loo kala qaybshaa ilaa saddex qaybood oo kala ah; shaxaad, khayilaad, iyo biil aan qorshaysnayn.

Qoysaska qaarkood waxaa biil yar oo aan joogto ahayn u soo xasiliya gabdhohooda ama xaasaskooda oo suuqa la fariista miisas khudaareed iwm, laakiin iyaga gediskooduna ma waaro oo waxaa iska caadi ah in maalin uun laga dhaco, waxaana weliba xil ka sii saaran yahay bixinta magta, dhiigga, iyo deynta uu soo galo wiilka la dhashay ee ama ka weyn ama ka yar, iyo ninkeeda.

Waxbarasho ahaan, waxaa lagu tiriyaa dhawrka wadan ee dunida ugu jaahilsan. Wixii ka horeeyey 1969 kii waxaa wax qori karay waxna akhrin karay in ka yar 4%, taas oo ahayd qiyaastii dhawr boqol oo qof keli ah. Laakiin kacaankii 1969 kii ayaa markuu qoray afkii Soomaaliga khasab kaga dhigay in qof walba oo muwaadin ihi uu ka baxo ugu yaraan uminimada, wuxuuna astaan ka dhigtay "Bar ama Baro", taas oo mar kalena uu isticmaalay markii uu faafinayey barashada Afka carabiga.

Sidaa darteed 65% ayaa ka baxday uminimadii ilaa 1980 kii. Ardayda dugsiyada oo wixii ka dambeeyey 1980 kii hoos udhacay tiro ahaan waxay 1990 kii ahaayeen; 274,600 hoose dhexe ah, 65,200 sare ah, iyo 10,200 machadyo sare ah (eeg; "Somalia", Microsoft(R) Encarta(R) 96 Encyclopedia).

Xagga Jaamacadda Umadda Soomaaliyeed oo ahayd tan keli ah ee jirtay waxaa sanadkii ugu dambeeyey ee 1990 kii ku gashay; 6,000 oo arday. Tiro badan oo aan xadidnayna waxaa loo diri jiray sanad walba jaamacado dibadda ah.

Waqtigaan la joogo ee 1995 ma jiraan wax dugsi ah oo ka jira dalka noocii uu doonaba ha ahaadee, dad yar ayaa isku dhiba in ay musiibooyinka dhexdooda ka aasaastaan malcaamado Qura'n si aan joogto ahayn iyagana intii laba sano ahayd tiradoodu hoos bay udhacaysay ka dib markii ay inbadan madaafiic la isku ridayaa ku soo dhacday dugsiyo ay caruuri ku baranaysay Qur'anka oo ay hooyo badani weydey cunugeedii u aaday dugsiga. Laakiin hadana waxaa jira dhawr hay'adood oo kheyri ah ee ka yimid shakhsiyaad Carbeed oo isku dayaya sidii ay waxuun dugsiyo ah uga hirgelin lahaayeen dalka inkastoo ay ku adagtahay.

Shanta sano ee dagaalku socday waxaa iskood waxbarasho jaamacadeed uga helay dhawr dal oo muslimiin ah arday ay tiradoodu isku gaarayso ilaa saddex boqol. Wadamadaas oo ay ka mid yihiin; Sudan, Sacuusdi, Pakistan, Malaysia iyo Suriya xagga dunida muslimka ah. Xagga dunida reer Galbeedkana tiro aad uga yar tirada kuwa Muslimiinta ah ayaa si aan rasmi ahayn oo guur guuritaan wadata uga looxjiita macaahid heerar dhexe ah.

Waxaan intaa ku soo gaban gabayn karnaa isbarid guud ama faham kooban oo laga qaato Soomaaliya, si ay inoogu sahlanaato fahamka qoraalada dambe ee aan ku socono akhriskooda. Haddaba waxaan si tartiib tartiib ah ugu dhaadhici karnaa waxa ay tahay Soomaali, qof ahaan iyo dal ahaan intaba inaga oo ka eegayna xag taariikh ahaan, dhaqan ahaan, dhaqaale ahaan, siyaasad ahaan, caqli ahaan, caqiido ahaan, iyo nidaam nololeed ahaanba.

# MEESHUU KA YIMID MAGACA SOOMAALI

Tan iyo intay soo baxday xornimada Soomaaliyeedba waxay aqoonyahannada iyo indheer garadkuba ka doodayeen halka uu salka ku leeyahay magac bixinta erayga Soomaali ee loo baxshay dadkeena. Waxayna tahay midda tan muranka gelisay iyadoo aan weli la xaqiijin cidda ka dambeysay bixinta magacan iyo ujeeddada dhabta ah ee uu salka ku hayo, ka sokow ku raalli ahaanshaha magaca haddana waxaan la wada garanaynin macnaha uu qeexayo magacu.

Inta aanana taa u sii dhaadhicin waxaa habboon bal in aan ka soo saarno halka aan kaga jirno kala magacsiinta Aadanaha, ka dib markii loo kala baxshay magacyo ku kala salaysan sinji ka soo jeed la qiyaasay, iyadoo lagu kala soocayo dadka xagga; cunsurka askun ahaaneed oo lagu dhisayo qaab dhismeedka jirka sida; Indhaha, Sanka, Daamanka ama Goomanka, Garbaha, Timaha, Feeraha iyo lafahaba, kala qaybintaas oo ah tan la isku raacsan yahay ee maanta jirta waxaa ka dambeeyey culimadii Luuqadaha, waxayna tahay sidatan;

Waxaa loo kala saaraa ummadda maanta ku nool ifkan guud ahaanba saddex qaybood oo kala ah; Kasdoodis, Mangaloodis, iyo Negroos.

1. Mangaloodis waa dadka loo yaqaan Shiinaha iyo wixii la halmaalaba (abkey indha yar).

2. Negroos waa dadka deegaankooda asalka ihi yahay Qaaradda Afrika, gumaysi ahaana lagu dejiyey Qaaradda Ameerika ee ku caanka ah midabka madaw, sanka ballaaran, goomanka soo baxsan, iyo timaha adag. Dadkan waxanu lanahay deris ama ood wadaag, qaaraddana waan iskula jirnaa, waxaana iyaga qudhooda loo sii kala saaraa Baantu iyo Zuluu. 3. Kasdoodis ama Kookaashi iyaguna waa dadka kale ee midabkoodu isugu jiro caddaan iyo maarriinba, ee deegaankoodu ku baahsan yahay kulliba qaaradaha. waxaana ka mid ah dadyowga sumadaas la siiyo; Yurub oo dhan, Carab oo dhan, Hindi oo dhan, Ethiopia, iyo Soomaaliya oo iyagu isu sii abtirsi raaca Naylot.

Aragtida kala qaybintani waa mid asal ahaan ka soo fushay Mustashriqiin (Reer Bari iska yeel)caanka ahaa ee la oran jiray; Ernas Raynaan oo Faransiis ah iyo asxaabtiisii ay isku bahaysteen lafa gurka luuqadaha aadanaha.

Haddaan intaa kaga harno fac iyo fir tirsigaan ku lahayn ummad raaca guud ahaaneed ee dunida, aan u soo noqono magaceena Soomaali ee ay doodu noogu socotay. Sida la wada arkayaba waxaa beryahakan dambe soo caddaatay sheegasho iyo ku abtirsasho gooni ah oo ay qolaba gaar ahaanteeda isu xijinayso in ay tahay ilma Soomaali (ilma Samaale),

Taas oo markaa lagaga saarayo ama lagu reebayo qola kale si loogaga helo xujjo ah in ay ka baxaan dalka kana tanaasulaan sheegashada iyo haweysiga ka qayb galka maamulka iyo talada dalka.

Si aan weli wax u sii falanqayno aan ogaanno waxay horay taariikhaha ama sheekooyinka ku tiri ku teenta ihi uga dheheen magaca “Soomaaliya”. Ka sokow sheegashada ay qolo gaar ahaan u sheeganayso in uu magacu yahay oday ay iyagu firkiisa ka soo jeedaan haddana waxyaalo kale oo badan bay ku fasiraan in laga keenay magacan sida;

Waxaa yimid dalka wafdi Talyaani ah oo aan haysan turjumaan markaa ayey soo dhaweyn ka heleen qoysas reer baadiye ah, waxayna keliya oo ka garteen hadaladoodii kelmadda ah (war hasha u soo maala), ka dibna nimankii wafdiga ahaa waxay war bixintoodii ku geeyeen in ay soo arkeen dad iyo dal la yiraaho Soomaal. aragtidaanina waa mid malo abuur u dhaw, waayo kelmadda (soomaal) qudheeduba ma ahan af Soomaali sax ah oo waxaa la isticmaalaa (soo lis).

Waxaa jira qisooyin iyo aragtiyo kale oo ay sheegaan ku tiri ku teenno kale oo fara badan, hase ahaatee dhammaantood ma ahan wax meel mar leh oo xujjo cad salka ku haya ee waxay ku dhisan yihiin ii dheh aan kuu dhehee.

Waxayse runta lagama raystaanka ihi tahay: ummadda Soomaaliyeed waa cunsur jira oo sidiisa u taagan una meel mari kara mana ahan dabagelis balse isagaaba lagu fal gashan yahay, oo cunsurkani waa asal ee ma ahan farac balse isagaaba laga farcamay, oo waxaa jira quruumo kale oo asalkooda abtirsiimo ku gala Soomaali ha is ogaadeen ama yeynan is ogaane.

Sinjiga caynkaas ihina ma ahan mid u gaar ah uun Soomaalida ee waxaa la wadaaga Quruumo kale oo fara badan kulligoodna loo arko in ay isku wada asal ahaayeen iyaga oo aan weli kala dheeraanin, waaana kuwa asalkoodu weli ku teedsan yahay dhammaanba Waqooyiga, Galbeedka iyo Bariga Afrika, ee kala degan;

Soomaaliya, Itoobiya, Suudaan, Jaad, Marooko, Aljeeriya, Tuuniisiya, Masar, iyo meelo kaleba. waxaana kuwooda ugu caansan loo yaqaan Barbariyiin, oo aan loola jeedin

Soomaalida inkastoo uu magacu ka kacay Barbar, Dekadda Soomaaliyeed, halkaas oo loo malaynayo in ay asalkii hore ka siqeen. Inkastoo ay jiraan qaar ku doodaya in macnaha Barbar uu yahay waxshi ama yeey, oo uu qoladaas ugu baxay ka dib markii lagu kari waayey gumaysigii oo ay ciddii soo hawaysataba gawrac dhegta dhiigga u daraan, hadana weli labada doodood waa kuwa is curjinaya oo aan dhana cufku ubadanaynin.

Haddaba, waa ay dhici kartaa in Cunsurkani uu kolkii hore ka askumay isla falgal Afrikaan iyo Carab, laakiin waqtigoodu waa mid aad u fog oo aan cidina garan karin, wuxuuna la mid yahay Cunsurkani isla Cunsurka Mangooliyaanka, dadka ku nool Bariga fog ee Aasiya, oo asal ka ahaaday isla falgal China iyo India, imminkana waxay u egyihiin barax dhexe oo aan dhanna raacsanayn.

Hase ahaatee waxaan weli is weydiinaynaa halka uu ka soo jeedo magaca Soomaali, ka dib markaan daba gal dheer iyo dhiraan dhirin xoog leh sameeyey waxaan soo saaray in uu yahay xididka Soomaali sidatan soo socota:

## GOORMAA LA MAQLAY SOOMAALI?.



Waagii hore cidna laguma magacaabi jirin soomaali, qarnigii dhawaaye sideed iyo tobnaad dhammaadkiisii ayey ahayd markii ugu horeysay ee la maqlay magacan Soomaali, waxaana loo baxshay dadkii la isku oran jiray Dharaazkii Islaamka ama Salaadinadii Islaamka, ee ka soo qaxay aagaga Harar ka dib markii lagu soo jebiyey dagaalladii Axmed gurey iyo Ethiopia qarnigii 15 aad.

Taasina waxa ay ka sii ahayd oo ku timid ka dib markii ay dhacday Saldanadii Axmed gureey oo ay ummadihii muslimiinta ahaa ee halkaas degenaa is khilaafeen ayna dhacday in ay is kala koox kooxaystaan, iyadoo la dhaliyey nidaamyo iyo magacyo qabiileed oo lagu kala duwanaado kuwaas oo lagu dhisay hab isku jeel ahaan, iyo hab isku danwadaag ahaan, isla markaasna ay ka soo carareen dadka intiisii badnayd Harar soona galeen xeebta geeska Afrika.

Dr; Xasan Maki oo ka mid ah dadka wax ka qoray taariikhda Soomaaliyeed wuxuu na barayaa in Somaalidu ay ka kooban tahay Dir iyo Darood oo asalkoodu yahay; (Soomaalidu waa Carab afrikaanowday ee ma ahan Afrikaan caraboobay, waxayna ka soo farcameen Dir iyo Daarood uun, wuxuuna ka baxshay hadalkaas sharraxaad dheer oo ay ka mid tahay in qarnigii sagaalaad uu Daarood Ismaaciil oo ku magac

dheeraa Sheekh Jaberti ama Cabdiraxmaan oo ka yimid Yeman soo galay dhulka Soomaalida, waxaana halkaas ku soo dhaweeyey oo u guuriyey gabadhiisii Daahira ama doombira Dir Ibjil oo ahaa ina adeerkii Samaale).

Wuxuu kale oo taariikh yahanku hadalkiisa sii raacshay in ay ahayd qarnigii 16 aad markii ugu horeysay ee la helo isku duubnida qabiil qabiil iyo is qaraabaysiga ummadihii la oran jirey Saldanadihii Islaamka ee hadda loo yaqaan Soomaalida.

Wuxuu kale oo yiri taariikhyahanku isaga oo sii bal ballaarinaya faalladii uu ka bixinayey unkamitaankii soomaaliyeed (lama arag lamana maqal magaca Soomaaliya intii ka horaysay markuu Suldaan Maxmed Rashaa oo sheeganayey in uu yahay Amiirkii Soomaalida uu guursaday inantii Sayid Maxamed Cabdillaahi Nuur ee ahaa amiirkii Soomaalida degenayd Waqoyiga iyo Galbeedka dalka).

Wuxuu taariikhyahanku raadshay fasirka kelmadda "Soomaali", wuxuuna macneheeda kaga soo dab qaatay Daraasadii Rashaarid Beyratuun ee (First Footsteps) oo sheegay in laga soo qaatay kelmadda carabiga ah ee (Samla'a), macneheeduna yahay Fasahaad ama weershe, waxaa kale oo loo malaynayaa in asalka kelmaddu ay tahay magaca webiga "*Soomaal"* ÕæãÇá ee ku yaalla waqooyiga Sanca-Yeman, halkaas oo uu ka soo qaatay magaca muhaajirkii kaga yimid Soomaaliya halkaas, ee ka dib ku tarmay gudaha Soomaaliya ka dib markuu ka guursaday oo dhex galay.

Waxaa kale oo la yiri; wuxuu magucu ka yimid kelmadda af carabiga ah ee"*Duu-maal*" ÐæãÇá oo macneheedu yahay (maal leh ama xoola-ley), taas oo loola jeedo dadka ku nool dhaqashada xoolaha, Ariga, Geela iyo Lo'da) eeg; kitaabkiisa,

ÇáÓíÇÓÇÊ ÇáËÞÇÝíÉ Ýí ÇáÕæãÇá ÇáßÈíÑ (ÞÑä ÇÝÑíÞíÇ), 1887-1987

bogaga; 37 aad, 27 aad, 42 aad, 33 aad, 19 aad , iyo halkuu ka soo xigtay sida; Somalia, antologiastoric- culturale No;3 isla boga 33 aad . kaas oo isna ku cadaynayaa in uu magaca Soomaali soo baxay 1897 kii markii ay gumaystayaashu kala qaybsadeen dhulkii ay degenaayeen dadka isku raaci kara sifaha Soomaalinimada.

Laakiin Dr; Rajab ayaa isna akhbaar taas ka duwan inoo sheegaya oo leh, (waxay ahayd 1414 - 1429 kii, M. markii ugu horaysay ee la maqlo magaca Soomaali, markaas oo ay ahaayeen quwadda ugu saraysa ee lagaga cabsado geeska Afrika, sidaa awgeed ayuu Axmed Gurey awoodooda ugu tiirsanaa) eeg bogga; 83, ee kitaabka;

ÇáÚáÇÞÇÊ ÇáÓíÇÓíÉ Èíä ãÓáãí ÇáÒíáÚ æäÕÇÑí ÇáÍÈÔÉ Ýí ÇáÚÕæÑ ÇáæÓØí - Ï: ÑÌÈ ãÍãÏ ÚÈÏ ÇáÍáíã .

Waxaa kale oo la sheegaa in uu magacani ka yimid kelmadda Amxaariga ah ee (Soomaax) oo macneheedu yahay Jaahil ama qof aan ilbax ahayn, taas oo la leeyahay waxay baxday kadib markii ay dadka Soomaalida oo markaas lagu tirinayo in ay asal Itoobiyaan yihiin ay muslimeen kana go'een dadkoodii kale, ee markaas laga soo cayrshay dhulka Itoobiya, iyada oo lagu eedaynayo in ay yihiin Soomaax, oo loola jeeday waa jaahiliintii gaalowday. sidaas waxaa qoray Dr; maxamed C/qani (eeg Maqaaladdiisa cilmi baariseed ee;

ÇáÕæãÇá ÚÖæ ÌÏíÏ ÈÇáÌÇãÚÉ ÇáÚÑÈíÉ .

Wuxuu kale oo Dr, ku hadalkiisa sii raaciyey in la sheego laba fikradood oo iska soo horjeedda ee lagu wada qotominayo asalka Soomaalida, kuwaas oo kala ah; In ay ahaayeen Carab muhaajiriin ah oo ku faaftay geyigaas, lana fal galay dad Afrikaan ahaa oo halkaas ku noolaa. iyo fikradda kale oo sheegaysa in ay asal ahaayeen dadka loo yaqaan imminka Sab (Raxan weyn) oo beeraley ahaa ka dibna ay u yimaadeen muhaajiriintii Carabtu, waa dambana la helay magaca Hawiye oo ay qoraayaalka intooda badani ku tilmaamaan dadka ay Soomaalidu u taqaan Garam- garam (Garre iwm) oo asal ahaan ka yimid Itoobiya, laakiin maanta ay magacan isticmaaalaan kuwa kale oo iyagu ku dhaqan ah kuwa kala sheegta Carabnimada. (eeg bogga 23-24 ee buuggiisaan).

Waxaana la isku wada raacsan yahay in waayadii ay bilaabantay is qabiilaysiga Soomaalidu uu ahaa xilliyadaas dhaw, wuxuuna ku bilowday hab soo booddo ah oo aan laga fiirsan, sidoo kale dhawaantan ayaa la helay magaca Soomaaliya ee ka hor waxaa u magac ahaa Salaadinnadii Islaamka, waxaadna arkaysaa in Sayid Maxamed kii dhawaan u dirirayey xornimada uusan weli adeegsan magac Soomaali ee uu adeegsanayey; Daraawiish, oo macneheedu uu u noqonayo (kuwii raacsanaa dariiqaddii saalixiyada).

Sidaa darteed ayaa loo leexinayaa in magaca Soomaali uu yahay mid ay baxsheen gumaystayaalkii si ay ugu helaan magac Juqraafiyaddii ay sameeyeen ee ay ku kala qaybiyeen ummaddii is lahayd ee lagula dagaalamayey Muslinimada awgeed, sida ayba u sameeyeen gumaysteyaashu magacyada kale ee qabiilada intooda badan. Si kastase arintu ha ahaatee waxaa la wada xaqiijinayaa in Salaadinadii Islaamku ama sida hadda loo yaqaan dadka Soomaaliyeed ay isla deganaayeen oo ay isku ahaayeen cudud iyo cad isku yaal oo aan kala go'in,

In kastoo ay waqtiyada qaarkood u dhaqmi jireen sidii dawlad midaysanna hadana mararka qaarkood wey ka kala daadan jireen, waxayna kala daadashadaasi ku qotontay danayn la'aanta dawladeed ee berigaas iska jirtay, waayo nina ma qiimayn jirin wax dawlad la yiraaho oo ma aysan taagnayn baahideedu, maadaama ay dadku ahaayeen xoolo daaqsato danaysato ah oo cid waliba ay goonideeda u soofsato arigeeda, danta dawladeedna aan nina u heli jirin kasho, sidaa awgeed weligood kuma aysan raaxaysan dawladnimo iyo dadnimo midaysan toona. eeg, bogga; 120, ee, kitaabka Rajab.

# XAQIIQADA MAGACA SOOMAALI.

Waxay xaaladdu sidaa iska ahaataba waxaa yimid gumaystihii reer Yurub, isla amintaas wax yar ka horna waxaa jiray ilbaxnimooyin yar yar oo ka soo kacayey meelo dalka ka mid ah kuwaas oo ku baaqayey dawladnimo ay koox waliba goonideeda uga aasaasaysay deegaankeeda, taasina waxay ku salaysnayd is beddelkii ilbaxnimo ee waayadaas ka socday caalamka.

Waxaa kale oo weligeedba ka jiray gudaha Soomaaliya magacyo la isku caayo iyo kuwa la isku ammaano oo ku kala qotomay dhaqan dhaqaaleedka beelaha Soomaaliyeed iyo sida ay cid walba u raadsan jirtay qaraabkeeda maalin laha ah, tusaale:

1- dadka beeraleyda ah waxaa lagu naynaasi jiray (Baaji maal).

2- dadka kalluumaysatada ah waxaa lagu naynaasi jiray (Biyo maal).

3- dadka xoolo dhaqatada ah waxaa lagu faanin jiray (So'maal), waxa kaloo la oran jiray (Bar maal)

4- dadka farsama yaqaanka ah waxaa lagu caayi jiray (Tum maal).

5-dadka ku shaqaysta gabayada, samayada (yibraha), baad tiiste yaasha, iyo guud ahaanba ciddi ku hesha qadadooda si turifa ah ayaa lagu naynaasi jiray waa (Af maal). Markii Islaamku xawliga ku faafayey oo ay culimo badani dalka marba dhan isaga gooshayeena waxaa dadka noocana ku qaraabta ku sii biiray kuwa kale oo loo bixiyey (Diin Maal). Ilaa iminkadan waxaa Muqdisho dega qabiil tiro yar oo la yiraahdo reer Diin maal, waxayna isku gaashaanbuur yihiin oo isla degaan jifooyinka ay ka midka yihiin: Yacquub Shangaani, reer Sheekh, iyo qoysas ka mid ah reer Faqhi.

Shantaas qaybood ee ay bulsho kastaba ugu kala qaybsan tahay dhexdeeda si ay ugu kala duwanaadaan nolol kasbashada waxaad arkaysaa in mid walba uu ku dhisan yahay maalid oo macneheedu yahay lisid ahaan ka sokow ku tiirsanaan ama nolol ku xirid.

Waxaa kale oo markaa jirtay in ay Soomaalidu weligeed dhexdeeda is yasi jirtay, oo dadka qaarkood ayaa markaa lagu yasi jiray ama lagu ceebayn jiray habka cunta raadsigooda awgiis sida ay ilaa maantaba qofkii hunguriyeeya xoolaha ugaarta ah ugu ceebeeyaan oo u dhahaan waa midgaan.

Sidaa darteed waxaa laga xishoon jiray in laga shaqaysto beer, bad, farsamo iwm, keliya waxaa lagu faani jiray in la dhaqdo xoolaha oo markaa qofku uu yiraahdo (anigu waxaan ahay nin So'maal ah), taas oo macneheedu yahay (nafci xoolo ku dhaqan), waayo erayga So' macnihiisu waa; (harag, maqaar, saan, jir, jaldi, ama So') af Soomaali ahaan.

Bilowgii qarnigan labaatanaad waxaa weli sii bidhaamayey adeegsiga magacyadan oo ku kala duwan sidatan ay asal ahaan ugu kala duwnaayeen, oo markaa ayey dadkii isku magacaabi jiray So'maalku si firfircooni leh uga soo caan bexeen intii kale. Sidaa awgeed marka aad u sii dhaba gasho taariikhda waxa aad helaysaa in shantaas magac ee Maalka wada ihi ay ahaayeen kuwa siman oo aan isu qorya gurin, tusaale sida uu qoray Roberto L. Hess ( waxa ay Biyamaal iyo Soomaali qirteen in aysan lahayn tabar ay kaga hortagaan Talyaani) eeg bogga; 76 ee kitaabkiisa; (Italian Colonialism in Somalia).

Taas oo jirta ayaa markuu gumaystuhu yimid isla markiiba ka dhigay siyaasaddiisii mid ku dhisan qaybi oo xukun. Haddaba wuxuu bilaabay in uu dadkii dhexdiisii isku diro oo wuxuu u abuuray xaalado ay qaadan karaan, sidaa darteed wuxuu ka dhaadhiciyey in qofkaan geel lahayni yahay qof yasan oo aan marnaba sheegan karin wax dadnimo iyo sharaf ah, dhab ahaanna looma ogolaan jirin shirarka ninkaan tiro geel ah lahayn, meeshaana waxaa ku bixi jiray; arile, lo'le, beeraleey, kalluumayste, ganacsade, farsama yaqaan iwm.

Siyaasaddaas gumaystuhuna waxay ahayd in aan laga helin ummaddaas wax ilbaxi kara oo marnaba u soo dhawaan kara ilaha ilbaxnimada, waayo waxa ugu horeeya ee qoon dib u dhigaa waa geel dhaqashada, tusaale maanta Soomaalidu waxa ay ka barteen Geela kibir iyo baqlayn caaqnimo iyo axmaqnimo miiqan ku salaysan, inkastoo ay haboonaan lahayd in haday kolley wax ka baranayaan Geel ay ka bartaan sabirka iyo ad adkaysiga, kaas uun baa wada anfici lahaaye.

Waxaana la arkaa in ninka Soomaaliyeed ee Geel raaca ihi uusan wax xuduud ah lahayn ee uu iska uun daba socda Geelaas oo uu halkuu u dhaqaaqaba ula dhaqaaqo, kolka uu nin goofkiis galo ee uu ninkii ku yiraaho war iga ceshana wuu la dagaalamayaa ninkaas isaga oo u arkaya gardaraale ku xad gudbay isaga iyo geeliisiiba, xataa waxaa laga yaabaa in haddii ay nirigta ama qurbacda yari caga gubyoodaan uu u siibo kabihiisa.

Si kastaba xaalku ha ahaadee waxay maskax gumaysigaasi socotaba waa hir gashay oo waxay ahayd wax laga xanaaqo in qof loogu yeero wax aan ahayn so'maal, waxayna gaartay in qola walba ay ka dheeraato hawleheedii u ahaa ilaha

dhaqaale iyo wax soo saar. Waxaa caado noqotay in marka wax lala cajabo si dhakafaar ah loo yiraaho; (waa yaab, mashaqo waa midgo lo'leh), (waa nin koor leh iyo rati kaba lah),IWM, waxayna oran jireen markuu ninka midgaanka ihi lo'yeesho, waxay sababaysaa is cirbin oo waxaa dhacaysa in kii lo'da lahaana geel yeesho ka dibna la is wada riixo.
Iyadoo ay qola walba ka xishoonayso in lagu ogaado waxa ay ka shaqaysanayaan ayey u hayaamayeen hab dhaqameed kale waxaadna taas ka garan kartaa iyada oo raadadkii ka dambeeyey biya maalka ay isu badeleen baaji maal, baaji maalkiina biya maal, iyaga oo weliba ka sii dheeraaday deegaanka (Baajuun).

Ugu dambaystiina waxaa intii oo dhan ka soo haray So'maal oo noqotay in nin walba uu sheegto iskana yeel yeelo dhaqankooda, waana sidaas sida lagu helay magaca Soomaali oo macneheedu yahay waxaan ahay qof gob ah oo xoola dhaqato ah.

# DABCIGA IYO TIRADA SOOMAALIYEED

Dadka Soomaalidu waa dad isku wada dabci ah meel kaste oo ay joogaanba isku wax ayey ka xanaaqaan isku waxna waa ku farxaan, waxayna si cad uga dabci duwan yihiin cid kaste oo lagu maslo ee qoon kale ah, weliba waxaa lala yaaban yahay sida aysan dhibicna dabci ahaan uga waafaqsanayn dhammaanba wadamada la deriska ah ee dhan kaste uga meegaaran.

Waxaanan dabcigooda marka aan ka eegno dhanka xumaha ku soo koobi karnaa dhawr qodob oo soo socda, waxaana ka mid ah:

Soomaalidu waa jirjiroole, danaysteyaal, munaafaqiin, dhuuni raacyo, hawtul-hamag, xaasidiin, xinlowyaal, ma sugtayaal, ma fiirsadayaal, ma kaydsadeyaal, ma tacbadayaal, ma waana qaatayaal, gar ma qaatayaal, libin ma aqbalayaal, ma abaal naqayaal, jasaarayaal, iyo fool xumooyin kale oo ka soo wada horjeeda Bani aadaminimada.



Laakiin waxa aan shaki ku jirin in ay yihiin dad lala dhaqmo dadka ugu wanaagsan marka samaha la joogo oo uu qofkoodu wanaag damco, nasiib daradaduse waxa ay tahay in ay inta badan ku jiraan xaalad dagaal iyo murugo oo ay iska adag tahay in la helo iyaga oo raaxaysanaya.

Xagga dabeecadahaas fool xumooyinka ah ma ahan kuwa u gaar ah Soomaalida ee waa kuwa ku shaac ah aadanaha intiisa badan, laakiin Soomaalidu waxay ugu dhaqmaan hab xaq darro iyo xaaraanimo ku salaysan, tusaale;

Qoon walbaa waa dhuuni raac, laakiin qoon waliba waa shaqaystaa oo waxa ay naftooda ku lumiyaan harjad lacag doon ah, mana haweystaan wax aysan gacantoodu shaqayn. Isla markaasna Caanteyn kama baxshaan wixii ay ku soo dhidideen, oo waxa ay wax u kasbadaan si ay hanti u dhaqaalaystaan. Halka ay Soomaalidu ku fataalayso xoolo aysan shaqaysan ee ay ku keeneen dhac iyo turufo. Si walbana ha ku soo xasiliyeene waxa ay wax u kasbadaan si ay ugu loofaraan.

Hoogga ugu weyn ee Somaalida wiiqay waxaa kale oo loo arki karaa isla qumanaanta iyo isla weynaanta shakhsiyadeed ee mid kaste oo ka mid ah ku jirta, taas oo keenta in jaahil kaste uu isku dayo in uu u taliyo aqoon yahayka, in uu wax ka kororsado warkeedba daaye.

Tan kale maadaama aysan shacabku aqoon rasmi ah lahayn, kii ay wax u bilaaban yihiin qudhiisuna uusan lahayn aqoon la taaban karo ee ku saabsan waxa u sheeganayo, taas oo ah in ay dhif tahay in la helo aqoon yahan Soomaaliyeed oo ku xeel dheer cilmi uu hayst. Sidaa darteed ku kaste oo maalmo wax bartay waxa uu dhab ahaan isugu haystaa in uu yahay weelkii aqoonta oo aysan waxba u dhimanayn.

Sidaa awgeed wuxuu qudhiisu ka sii masayraa ku kaste oo isku daya in uu cilmigiisa wax ka sheego, balse ninna uma uu daynayo takhasuskiisa iyo xirfaddiisa ee waxa uu haweysanayaaa in uu inta aqoonta leh dusha ka sii maamulo.

Hase ahaatee waxa keli ah oo cudurkaas looga ladan yahay waa hab masayreed wanaagsan oo ay dadku u adeegsadaan hinaansaha ay ka qabaan kan wanaagga samaynaya, taas macneheedu axa uu yahay in ay si qarsoodi ah ugu daydaan waxa uu qof wax ku dhaamaama sameeyo ee wanaag ah, tusaale;

Dawladdii Barre waxaa aad u yaraa in laga helo qof aqoon leh, hadana waxa ay muddo u socotay sidii dawlad ay aqoonyahanno iyo khubaro waa weyni hogaaminayaan, taasina waxa ay inta badan ku imaanaysay ficillo dhif dhif ah oo lagaga dayday mid aqoon leh iyada oo loo fulinayey hab ka masayrid iyo caqli ama cilmi xatooyo ah ee aan marnaba isagii laga bartay abaal looga haynin. Tusaale kale aan u soo qabsanno:

Ka dib markii ay dalka aafeeyeen dagaalladii qabiileed ee ay qab qablayaashu ku xasuuqayeen maatada dalka, waxaa dadaalkooda muujiyey hal iyo labo ay aqoon yari u bilawnayd oo waxa ay abuureen Hay'ado samafal si ay bulshada ugu adeegaan.

laakiin muddo yar ka dib waxaa arinkii isku dayey kuwo aan weligood isku dayin in ay wax qoraan, waxaana lagu mashquulay sidii wax akhriska loo baran lahaa, maxaa yeelay waxa uu qof walbaa is tusayey in uu midka Hay'adda wataa ku dhacay magaca Hay'addaas malaayiin iyo malaayiin.

Sidaa awgeed waxaa dariiq walba galal waa weyn la haadayey kuwo aan garanayn waxa ugu qornaa xaashiyaha ku jira galalkaas ay xambaarsan yihiin ee ay u soo xar xariiqeen kuwo kale oo aan caddaalad u ahayn, ee u qabay cuqdado laga yaabo in ay la xiriiraan khayaanooyin iyo ballan ka baxyo hore oo isaga laga helay.

Haddaba waxa aan hadalkaas uga haraynaa in aan qirno in aysan dadka Soomaaliyeed wax iska baranin , laakiin ay wax iska qishaan, ka dibna ay ku weeraraan wixii ay bawsi ahaanta iyo qishka ku heleen isla qofkii ay ka heleen ee macallinka ugu ahaa.

Haddaan qoraalkaan ku soo afjaro tirakoobta guud ee inta loo yaqaan Soomaali meel kastaba ha joogaane waxaa lagu qiyaasaa in ay dhan yihiin dhawr iyo toban malyan. nasiib darrase maanta waxaa ku nool dhulka loo aqoonsan yahay Soomaali in lagu qiyaasay; laba malyan oo keliya, inata kalena waxay ku firdhisan yihiin caalamka intiisa kale, waxayna tahay kala dhig dhigiidda tiradani;

1- 600,000. oo ku hoos jirta xukunka Kenya.

2- 750,000. oo ku hoos jirta xukunka Itoobiya.

3- 650,000. oo Djabuuti ah.

4- 100,000. oo la nool Yeman, jasiiradda Suqandara oo u dhexaysa magaalada Mokalla ee Yeman iyo magaalada Boosaaso ee Soomaaliya.

5- labadii gobol ee xorowday iyagana tiradii ugu roonayd ee lagu sheegay waxay ahayd; Sideed malyan, eeg; (tira koobtii, 1988 kii, ee UN ka.), tira koobtani waa tan loogu kalsoon yahay dhammaanba kuwa laga qaaday dalka mudaduu jiray,

Maxaa yeelay kuwa kale oo dhan waxaa ka muuqata in lagu dhisay hab qiyaaseed (*sample statistics)*, maadaama ay adkayd in dadka reer guuraaga ah laga qaado tira koob sugan, sidaa darteed waxaad arkaysaa in uu faraq weyni u dhexeeyo war bixinadda ay soo gudbiyeen tira koobahaas kale oo dhami, tusaale; Collier's Encyclopedia wuxuu qoray 5,300,000, 1983 kii, New standard Encyclopedia isna; 3,260,000, The Macmillan concise Encyclopedia, isna wuxuu qoray sannadkii 1987 kii, 6,170,000.

laakiin waqtigan xaadirka waxay u kala yaaceen afarta bayna jiho, lamana hubo wax ka soo noqon doona iyo wax kale, 4.5 malyan keliya oo dhibane ah baa ku hartay dalka markii ay qarxeen dagaalladii 1991 kii, eeg; (Conflict and Peace in the Horn of Africa) by; Peter woodward& Forsyth, waxaana hubaal ah in ay intaas barkeed ama ka badani ay ka bexeen ka dib. waxaa la sheegayaa in ay qurbaha ugu kala nool yihiin iyaga oo qaxooti ah sidatan;

1- Kenya waxay haysaa; in ka badan Nus malyan.

2-Itoobiya = Nus malyan.

3- Yeman, = 300,000.

4- Djabuti = 200,000.

5-Kanada; = 150,000.

6- Yurub; = 60,000.

7- U.S.A; = 40,000.

Intaas iyo in kale oo badan oo laga heli karo waddan kaste ee dunida maanta jira waa inta loo aqoonsan yahay qaxootinimada oo meesha lagu ogyahay,

Waxaa kale oo aad u naafeeyey oo laf gaab dhab ah ka dhigay Soomaalida xasuuqa lama filaanka ah ee huf iyo

qaraban ka dhigay rayidka Soomaaliyeed, waxaana la sheegay in ay shan jeer ka badan korodhay heerkii qiyaasta dhimashada ee la qioyaasayey (*mortality rate*) tusaale, Waxay ahayd heerka dhimashadu markii ay ugu badnayd dalka in ay kunkiiba 21.7 ka dhinteen, sannadkaas oo ahaa sannadkii ay ugu badnayd dhimashadu sababta abaarihii daba dheer iyo colaado iyo cuduro kulul oo jiray awgeed wuxuu ahaa sannadkii 1975 kii.

Maantana waxaa la qiyaasayaa in ay gaaraysay ama ku dul heehaabaysay kunkiiba 180.7, heerka dhimashadu mudadii u dhexaysay 1990-1995 kii. Tiradaas oo tobaneeyo jeer ka badan tii lagu qiyaasayey in ay noqoto shantaas sano. eeg: tira koobtii ay qaadeen hay'adaha tirinta dadka u qaabilsan dalka Ingiriiska sida ay ku qoreen: (Africa South of the Sahara), 1978, London. bogga: 854.

Waxaa kale oo wiiqay tirada shacabka Soomaaliyeed baaqashadii ay baaqdeen tira caruur ah oo fara badan oo lagu qiyaasayey in ay ku dhashaan mudadaas shanta sano ah, ka dib markii ay gabaabsi noqdeen ama uu hoos u dhacay heerkii dhalashadu (fertality rate) iyo weliba heerkii guurku.

laakiin waxaa ka sii badan inta iskooda uga shaqaysata waddamo kale iyo kuwaan xusnayba ee aan cidna u tirsanayn sida; halka malyan ee meeraysta Bariga dhexe iyo Bariga fog ee Aasiya, iyo kuwa ku dammaadsan guud ahaanba Afrika.

## Cutubka Sagaalaad

# MURAN KA TAAGAN ABTIRSIGA SOOMAALIYEED

## SIDEE ISU KALA XIGNAA?

Waxay ahayd qodob lagu murmo oo dooddiisu ay socoto tan iyo markii la isku soo baraarugay ee la helay aqoon yahanno wax daba gala waxna kala shaandheeya, maadaama ay maanta dunidu marayso heer i tus oo i taabsii waxay noqotay in wax la arkaaba ku salaysnaadaan daliil iyo xujjo cad, haddaan taas la helina ay ku haraan shaki iyo sheeko sheeko la iska yiraaho waabaa waxaa jiri jiray iyo sheeko odayeed aan meel loo raaco lahayn.

Waana taas tan maanta furtay muran iyo dood kulul oo ku saabsan saxnimada abtirsiga qabiilka Soomaaliyeed, waxaa jira dad badan oo sheekada abtirsiga u haysta madadaalo shacab, dad badan oo u haysta ku tiri ku teen la iska yiraaho ujeeddo la'aan, iyo dad badan oo isaga raalli geliya ehelkooda iyaga oo og wax kama jiraanimadooda iyo in ay tahay cantarabaqash aan waxba ka dharbanayn.

Haddaba inaga oo qodobkaan sii falanqaynayna ayaan ka bilaambaynaa dulmar guud oo aan ku samaynayno hab dhismeedka qolooyinka Soomaaliyeed iyo sidoo kale hab kala daadadkoodii, hadaba si aan taas ugu sii guda galno aan ugu horaynta fasirno macnaha loola jeedo; Qolo, Tol, Xigto, Xidid, Reer, iyo Qabiil intaba si ay noogu caddaato ujeeddadu:

Qolo, asalka eraygani wuxuu ka yimid qool oo macnihiisu yahay xarig lagu xiro waxaraha, kaas oo mararka qaarkood halkii qool la iskula xiro in ka badan toban waxarood. waxa kale oo macnaha qolo lagu sheegaa koox, jibsin ama jilib, taas oo macneheedu yahay koox dad ah oo isku raacday dano gaar ah oo ka dhexeeya, sidaa awgeed kala qola qolayn waa kala qoqobid kala kooxa kooxayn ah oo ku dhisan is bahaysiyo dana daneed.

Tol; isaga laftiisu kama foga macnaha qolo oo waa uun isku tolid iyo is raacsiin wax aan horay isu haysan aanana is lahayn.

Xigto iyo Xidid, waa isku macne marka laga eego ujeedadan oo waxay wada yihiin wax la isu soo dhaweeyey oo la isa soo xijiyey, ama uu xiriir sinji ahaaneed ka dhexeeyo, taas oo ku timaadda kala guursiga iyo is dhex galka qoysaska ama beelaha uu deegaanku ka dhexeeyo ee isku tawaanta ah.

Reer iyo Qabiil oo ah kuwa ugu soo dhaw sheegashada maanta lagu sheego, waxay asal ahaan ka yimaadeen qoys meel degan oo magac leh lana yaqaan, sida reerka halkaas degan waa qabiil hebel.

si kastaba arintu ha ahaatee bal kaalay akhristow aan wada hufnee sheegashadeena si aan dib dambe naloo kugu qabsan oo aanan mar dambe ugu ceeboobin.

Waxaa in badan la arkaa in dhexdeena qabiilba qabiilka kale ku duro dhalad xumo, fir la'aan, wacalnimo, sheegad, la haystenimo IWM, taasina weliba ma ahan mid xasilloon oo ku degta qolo si gooni ahaanteeda loogu aqoonsado ee waa mid ku dhex wareegata qabiillada oo marba qola ayey ku fuushaa sababo la xiriira xiriirka bulsho awgeed.

Inkastoo la hubo in ay dad badani ka xanaaqayaan caddaynta mawduucan iyo bayaaninta garta, danaano iyo hiillo habawsan awgeed, haddana waxaa lagama maarmaan noqonaysa in la taabto runta, waayo waxay Soomaali ku maahmaahdaa (haddaan lo' dabadeeda la feydin shillin lagama guro).

Waxaan kaloo doonaynaa in berrito marka ay yimaadaan jiilalkeena dambe ee run ku dhaqadka ah, kana nadiifka ah khiyaali ku dhaqanka ay kala xaqiiqsadaan waxa jira arlada iyo waxa awoowayaashood ka reebay asaagood ee magacayo beeneed tiriska ah, ka dibna ay ka gaashaantaan oo ay asaagood wax la qaybsadaan.

Intaysan nala dheeraan tani aan u soo noqono tusaaleheeniiye waxaad maqashaan; Shiikhaal waa Hawiye iyo ma ahan, Xawaadle waa Hawiye iyo ma ahan, Sacad waa Hawiye iyo ma ahan, Saruur waa Hawiye iyo ma ahan iyo kun iyo kow kale oo kuwaas la mid ah ee marba meel u dhacaya, aadna arkayso in ay maalina duran yihiin maalina darman yihiin.

Waxaad kale oo maqashaa reer hebel waa midgihii reer hebel, reer hebel waa sheegad reer hebel. reer hebel way toloobeen ka dib markii la xumeeyey oo waxay u toloobeen reer hebel (tani waa dabeecaddii xilfiga ee caanka ku ahayd Carabtii hore macneheeduna waa is bahaysi), iyo sidaa oo kale reer hebel weligood wax ma tareen kol haddaynan reer hebel wadan IWM), waxaa lagu maahmaahaa “Oadi ab ka dhaw, Jir walaal ma ehee jidiin baa walaal ah”.

Waxaad kale oo maqashaa reer hebel waxaa loogu baxshay magaca ka dib markay sidaa yeeleen, nin sidaa yiri, waxaasay cuni jireen, waxaasay dhaqan jireen, halkaasay degi jireen, IWM, reer hebel waxaa mar hore loo aqoon jiray magacaas, reer hebel waxay beri hore ka mid ahaayeen reer hebel IWM.

## MIYAANU CARAB NAHAY?

Musiibada inagu habsatay waxa ay ina bartay cidda aannu nahay. Markii aanu u qaxnay waddamada Afrikaanka ah ee ina la deriska ah waxaa dadkanaga loo dilayey oo loo silcinayey eedda ah maxaad sinjiganaga uga yara duwanaateen oo maxaad Carab u sheegateen?. Sidaa si la mid ah markii aannu u qaxnay dhanka Carabta waxa aannu dareemaynay midab takoor ku dhisan midab iyo qawmiyad duwanaan. Intaa in la mid ah waxa kale oo aan kala kulanay dalalka ku yaalla Yurub, Ameerika iyo weliba Aasiya.

Markii uu maalmo yar ka hor dagaalkeenni, ka qarxay dagaalka sokeeye dalka Layberiya ee Afrikaanka ah, waxaa aad uga xumaaday dhammaanba dalalkii Afrikaanka ahaa gaar ahaan kuwa ku dhaca Afrikada galbeed. Waxa ay haddaba dareemeen xilka iyo waajibaadka ka saaraan sidii loo xallin lahaa dhibaatadaan soo deristay. Waxa ay albaabada u fureen dhammaanba dadkii ka soo qaxayey dagaalka sokeeye ee ka socday Layberiya.

Waxa ay waxbarasho lacag la'aan ah iyo masruuf ku filan siinayeen dhammaanba ardaydii dalkaas wax ku barayanaysay. Waxyar ka bacdi markii ay meeleeyeen guud ahaanba ardaydii, ayaa waxaa soo haray dhallinyaro aan weligood Iskuullo aadin oo dagaallada ku soo caajistay. Dawladaha Afrika, haba yaraatee ma aysan weydiinaynin kuwaas wax shahaado waxbarasho ah. Waxa ay siinayeen koorasyo deg deg ah. Markaa ayey imtixaan ka dib ku sii daba darayeen halka ugu dhaw ee uu/ay kala qabsan karo fasalada wax barasho ee horay u socday.

Waxa ay dawladahaasi ol ole xoog leh u galeen sidii ay ku soo celin lahaayeen jiritaankii dawladdii Layberiya. Waxa ay u abaabuleen ciidan gaar ah oo ay iska soo aruuriyeen. Ciidamadaas oo ilaa hadda u taagan in in ay hagaajiyaan meel kaste oo ka mid ah waddamada Afrikada galbeed waxaa kharash culus ku baxsha koox walba dawladdii ay ka yimaadeen.

Si loo daboolo baahida Layberiya dawlad walba oo Afrikaan ihi waxa ay isku qortay qaaraan lagu dhameeyo dhibka dhacay. Ugu dambaystiina waxa ay ku guulaysteen in ay shacabkii ka dhigaan hubkii dawladda ee faraha ka baxay, isla markaasna soo dhisaan dawlad ku dhisan Dimoqraadi oo lagu soo doortay si madaxbanaani ah iyo caddaalad ku salaysan. Laakiin Soomaaliya marnaba.

mid taas la mid ah, Markii ay Yahuuddu qabsatay dhulkii Falastiin, waxaa la gurmaday dhammaanba dawladihii

Carabta. Waxa ay kala qaybsadeen dadweynihii reer Falastiin, oo dawlad walba oo Carab ihi waxa ay qaaday intii ay xamili kartay ee dad ahayd si ay ugu noolaadaan dalkeeda. Waxa ay cid waliba intii ay qaaday u maal gelisay mashruuc dhaqaale. Markaa ayey hadana u guntadeen sidii ay dhulkooda ugu xorayn lahaayeen af iyo addinba. Laakiin Soomaaliya marnaba.

Sida ay taariikhyahanadu tilmaamayaan waxay qawmiyadda Soomaalidu isugu jirtaa noocyo dad fara badan oo kala duwan, kuwaas oo ay adag tahay in la kala garto oo loo kala saaro hab dhalasho, sidaa awgeed waxaa la oran karaa in ay isku sinji yihiin marka laga eego sida ay isu dhex galeen ee aan loo kala saari karin.

Waxaa kale oo la isku raacsan yahay in tan iyo waa dhaw ay muhaajiriin fara badani isaga soo daba shubmayeen deegaanada Soomaalida, waxay sheegaysaa tira koobtii ugu dambaysay ee lagu baarayey dadka kala sinjiga ah ee ku nool gudaha Soomaaliya in aan la garan karin dadkii waayadii hore soo galay dalka.

Hase ahaatee haddii la daraaseeyo kiwii ugu dambeeyey, tusaale ahaan waxay noqonaysaa tirada Hindida iyo Bakistaanku in ka badan 2200, tirada Ingiriiska iyo Talyaaniguna 4000, tirada Boortaqiiska, Carabta, Afrikaanka iyo ummadaha kale ee isku qaska ihina ma ahan wax la qiyaasi karo ama laga heli karo xog dhab ah. eeg (tira koobtii 1966 kii).

Waxaana kuwaas ka sii rukuma weyn quruumaha kale ee ay isku dhex milmayeen tan iyo beryo hore oo aan la iskala saari jirin, tusaale inta badan qolooyinka Itoobiya waxay si cad iyo jiir ah ugu qasan yihiin qolooyinka Soomaalida, sida ay kuwa Carbeedba ugu qasan yihiin, waxaana ka mid ah kuwa ay maanta taariikhyahannadu ku doodsan yihiin in ay Soomaali ku jiraan iyo in kale; Wallo, Shawa, Eretareya, Cafar, Beeja, Gaala, iyo kuwa keleba.

Haddii ay tahay in taas loo helo wax ayidaya waxaa la xujaysan karaa sida maanta looga helayo qofka Soomaaliga ah dhiig shisheeye oo kala nooc ah, oo waxaa la arkaa in labada isku aabbe iyo isku hooyo ay dhaleen uu midba quruun gaar ah u ekaado, isla markaasna waxaa la arkay in uu dhaqso u sinji guuro midabka iyo qaab dhismeedka Soomaaligu uuna ku milmo marba cidda uu la fal galo. Sidaa darteed waxaa la helaa qof lagu naynaaso; Shiine, Carab, Hindi, Afrikaan iwm.

Guud ahaan marka arinka xagga taariikhda dheer ee fir raaca laga eego waxaa la helayaa in ay dadka Soomaalidu u eg yihiin sidii in ay ka soo askumeen isu tag Afrikaan iyo

Aasiyaan isugu dhafan Carab iyo Hindi, kaas oo u sii badan xaga Carab. Sidaa awgeed waxaa maanta lagu magacaabaa Afro-Asiatic. Eeg: (*The Somalis: Their origins, migrations, and settlement*).

Intaas waxaa sii dheer gumaystayaashii kala duwanaa ee dalka isaga kala dambeeyey si dadban iyo si toos ahba waxay kulligood bareen ummadda Soomaaliyeed is Qabiilaysi ku dhisan kala bax iyo iska soo hor jeed, taas oo aan ahayn dabeecad ay horay u aqoon jireen, waxayna u sii allifeen abtirsiinyo been abuur ah oo ay ku kala duwan yihiin, si ay uga fushadaan danahooda gaar ahaaneed.

Dadkii ka soo galay Khaliijka carabta waxay doonaanba ha wadeene waxay soo masaafuriyeen dabeecadoodii qabiilaysiga oo ku suuq beeshay geyigoodaas ama kaba sii jirtay weli, boqortooyooyinkii beershiya iyo waayadii Xedseb-shut waxay ahaayeen markii lagu il bixiyey dadkeena reer hebel sheegashada.

Waayadaas oo dalkeenu uu ahaa xarunta ganacsiga ee isku xirta Afrika iyo Aasiya uuna ahaa xarunta ud udgoonka iyo qalabka is qurxiska (*cosmetics*), waxa ugu weyn ee ay dadkeenu ku mashquulsanaayeen waxay ahaayeen yaad sheegataa.



Waxayna markaas u bateen in ay sheegtaan Carabnimo, maadaama ay arkayeen in dadka Carabtu ay iyaga ka dhaqaale fiicnaayeen kana ilbaxnimo sareeyeen, kana qur qurxoonaayeen, markii ay Carabi Islaamka la timidna wayba ka sii fogaatay xaaladdu intii hore oo waaba la kala xinsaday Carab ku abtirsashadii.

Dr. Rajab oo arintaas ka hadlay waxa uu yiri; “Sidaa ayuun bay qoysaska iyo qabiillada Soomaaliyeed iyo kuwa kaleba ay isugu xirayeen abtirsiyo Carbeed iyo Islaam, xataa haddii aysan ahayn waxa ay sheeganayaan, aysana fir ku lahayn Carab oo ay qabaan nasab saxiix ah. waxaase keli ah oo taasi ay u qiraysaa Islaam ku horayn iyo muslinimo xidido dheer”.

Wuxuu qoraagani xusay tusaale cad oo ku tusinaya habka ay soomaalida iyo derisyadoodiiba u abuuri jireen qabiil ku abtirsada Carab ama cid kale, iyaga oo doonayey in ay sumcad isugu yeelaan farcan awgiis, kaas oo hadana aad ka garan karto sida ay qabiillada Soomaalidu ugu salaysan yihiin dhacdo iyo erayo uu sheegooda iyo ka hadalkoodu batay, tusaalihiina waa kan;

Muslimiinta Gaalla ee Soomaaliyeed waxay ku fasiraan magacooda in uu ka yimid kelmadda af carabiga ah ee ah; ÞÇá áÇ taas oo baxday ka dib markii uu Nebigu NNKHA ku amray awoowgoodii ay ka soo farcameen in uu diinta

gaarsiiyo dadkiisa, ka dibna uu diiday isaga oo yiri; áÇ , ka dibna waxaa la isla dhex maray waxa uu yiri; maya, oo af Carabi ahaan noqonaysa ( qaala laa/ gaala laa), ÞÇá áÇ , ugu dambaystiina labadii Laan ayaa la isku shiday oo waxa ay soo baxeen Gaallaa. eeg bogga; 76, ee
ÇáÚáÇÞÇÊ ÇáÓíÇÓíÉ Èíä ãÓáãí ÇáÒíáÚ æäÕÇÑí ÇáÍÈÔÉ Ýí ÇáÚÕæÑ ÇáæÓØí.Ï:ÑÌÈ ÚÈÏ ÇáÍáíã . - ÏÇÑ ÇáäåÖÉ ÇáÚÑÈíÉ . ÇáÞÇåÑÉ . 1985ã - 1405åÜ.

Waxay arinteenii ku socoto Carab sheegasho oo aan wanaag iyo qurux oo dhanba Carab u tiirinaba, sida in aan isku tilmaano waa qof qurxoon oo carab ah, gabdheheenana u baxsano qureysho, Carabo, Aasiya, iyo Carab wiilashaba, waxaa noo timid qolo Carab ciribta ku dhufatay oo gumaysigii Yurub ayaa na soo galay.

Haddaba dadkeenii hiyi raaca ahaa iyaga oo aan weli fahmin ujeedada iyo danta ka dambaysa imaanshaha quruumahakan cusub, waxay mar kale iyagana u qireen qurux iyo sharaf oo waxay magacyadii gabdhihii u baddeleen Yurub, Baarliin, Istarliin, Istanbuul, Milaano IWm. Sidoo kale Hindi ama Hindiya.

Sidaa darteed, Soomaalida maanta jirtaa ma ahan Carab, ma ahan Afrikaan, ma ahan Hindi, mana ahan Xabashi ee waa Soomaali. Soomaaliyana Soomaali baa leh.

# MIDDUU GUMEYSTIHII NA BADAY

Intaasi waa iska yeel yeelka aanu inagu iska yeel yeelaynay oo isku dhedhejinaynay ee waxaa ka sii daran tay iyagu nala maageen naguna fuliyeen ee ahayd in ay na kala qoqobeen oo na kala qola qoleeyeen iyaga oo noo kala saaray intaas oo reer hebel oo midba meel kale ku abtirsado iyada oo weliba dadyowgaas beryahaas na maamulayey ay ciddi si wacan ugu adeegtaba ugu bishaaraynayeen in ay iyaga ka mid yihiinba. tusaale raadadkii kala qaybinta ee Talyaaniga iyo Ingiriiskii ugu dambeyey dhigeen waxaa ka mid ah;

Togga Gacan libaax ee kala bara Awal iyo Gar xajis ee hargeysa, xadka Beledweyne ee u kala seeraysan Marrexaan, H/gidir iyo Xawaadle, xadka Dhuusamareeb ee u kala yaal H/gidir iyo Mareexaan, kan Gaal kacyo ee kala bara Majeerteen iyo Sacad iyo kan Balcad iyo guud ahaanba kuwa kale ee ku kala baahsan gobolada dalka oo dhan. weliba ka tusaale qaado kan weyn ee lagu kala gooyey shanta gobol ee waa weyn ee dalka loo qaybiyey.

Waxaa iyada oo la aqoonsan yahay maanta la isticmaalaa magacyadii uu Ingiriiska ama Talyanigu baxshay oo weliba ah erayo af Ingiriisi ah sida; *Corner-tribe, Others*, iyo kuwa kale oo badan, waxaa kale oo qolo walba u go'an magaaladii iyo daaqsintii ay iyagu siiyeen iyaga oo ula jeeday kala goyn iyo iska horkeenid, waxaa ka mid ah hababkii loo kala saaray luuqadaha, dhaqamada, caadooyinka iyo wax walba oo ay bulshooyin ku kala duwanaadaan, waxaana ka mid ah kutubtii, cilmi baarisyadii, maqaalladii, iyo war bixinadii laga qoray;

1- Accentual Patterns in verbal forms in the Isaaq Dialect. by; B.W. Andrzejewski.

2- The GADA BUURSI Somali Script. by; I. M. Lewis.

3- Lineage continuity and modern commerce in Northern Somaliland. by; I. M. Lewis. (wuxuu shidayaa dabkii isku dirka, isaga oo sheegaya is gumaysi iyo xaquuq is ka qaadis been abuur ah oo uusan wax xujjo ah u haysan).

4- Rivista Degli Stidi Orientali . Vol; 7, part 1. 1916-1918. waa kii lagu dhisay qabiillo badan oo hor leh, oo carcartoodii qaba, si loo joogteeyo dullinimada iyo dib udhaca bulshadaan.

5- Nel Dialetto Degli Habar Awal,= kala qaybintii reer Waqooyiga.

6- History in the Horn of Africa 1000 BC - 1500 AD. by; Ali Mohamed Nuh, PHD,1985. University Microfilms Inetrnational. Ali inkastoo uu yahay nin Soomaaliyeed oo u bisnbisyooday qoritaanka taariikhda dalkiisa, haddana wuxuu dhex dabaashay fikrado ku salaysan Duullaan maskaxeed lagu kala findhicilinayo bulshada yar ee aan lahayn tun la kala qaado, tusaale ahaan waxaa ka mid ah qoraalladiisa;

Faraqa u dhexeeya lahjaddaha; Hargeysa, Ceerigaabo, Burco, Laascaanood iyo tuulooyinka u dhexeeya, iyo faraqa u dhexeeya lahjadda; Gaal-kacyo, Hobyo, Djabuti, iyo Dirir-dhabo, iyo tan ay ku kala duwan yihiin; Buurheybe, Jilib, Cadale, Baali, Reer Maanyo, Buula bardo, Qallafe iyo Harar. Hadalladaas iyo kuwa kale ee la hal maalana waxay xujjo u noqonayaan kala saaritaanka asalka Soomaaliyeed oo waa fikrad ay dhiseen reer galbeedku si ay u hor istaagaan dhan walba isaga mid noqoshada ummadda Soomaaliyeed.

7- The Somali Language. London, C. R. V. Bell.

8- Somali Grammar , Yibro and Migaan Dialect. Holland, 1905.

9- Italian Colonialism in Somalia.

10-

ÏÇÆÑÉ ÇáãÚÇÑÝ ÇáÇÓáÇãíÉ.

oo ay qoreen koox reer Bari iska yeel ah (Mustashriqiin), kaas oo muujinaya kala saar iyo kala qaybin ka dib in ay qabiilada Soomaaliyeed cadawyo asali ah isu wada ahaan jireen, tusaale; In Daaroodka iyo Isaaqu ay cadaw dhaxal ah (waraathi) isu yihiin. eeg. boggisa; 442.

Waxayse is weydiintu tahay kaba soo qaad inaanu nahay quruumo kala sinji iyo farac ah oo isaga kala yimid jihooyin kala duduwan waa sida ay dadka qaldani sheeganayaane, taas macneheedu ma in aanaan isku dal noqon karin baa? waan ka xumahay fikir gaabnidaas ay wax ma garatadeenu qabto oo ay u geysay dawladnimo aqoon li'idu,

Waxaanse dhihi lahaa bal aan ka tusaale qaadano waddan kaste oo ka mid ah wadamada maanta dunida ku jira ee aan ugu dambayno xagga dawladnimada iyo wax garadnimada ee bal car aan soo helno hal waddan oo isku wada sinji ah, bal eeg U,S,A  U,A,E , iyo waddan kaste oo qalbigaaga ku soo dhaca, wey adag tahay in aad hesho waddan isku wada diin ah, isku wada, mad-hab ah, isku wada, dhaqan ah, isku wada caado ah, isku wada luuqad ah, isku wada midab ah, isku wada cimilo ah, isku goof degan iyo weliba isku wada abtirsiiyo ah (sida loo badan yahay). sida Soomaaliya oo kale

.

Haddaba waxaa mid lala fajeco ah in dadyowga ku nool isku waddanka ee aan wax isu galay la arag abtirsiiyana isaga soo dhachaya Nebi Aadam, diin, af, iyo dhaqanna warkoodba ha sheegin ayaa is walaalsanaya oo is wata isna jecel oo isaga danaaneeya inta kale ee ka deegaanka fog iyada oo loo kala tarjumayo iyaga dhexdooda,

Bal walaalayaalow yaabka la arkay qawmiyaddaan yarta ah ee aan ka ahayn adduunka kale wax la sheego aanana buuxin karin degmo ka mid ah tan ugu yar degmooyinka ku yaalla xataa waddamada la deriska ah, ee hadana wax walba isaga midka ihina iyadii ayaaba dhexdeedii isa sii kala findhicilinaysa oo is kala ximinaysa iyada oo ay qoysaskeedii wada laan gaabka ahaa isugu wada naqsanayaan; idinka waxaa la idin yiraaho reer hebel oo waxaad ku timaadeen doon, idinkana waxaa la idin yiraahaa reer hebel oo waxaad ka soo qaxdeen afrikada hoose, idinkuna waxaad ka soo jabteen Itoobiya, dhulkanina wuxuu ahaa cidla' IWM).

Waxaase taas ka sii fajac iyo amkaag badan markay iyaga dadkoodu inta u qaxaan waddamadii iyaga kaga horeeyey ilbaxnimada iyo qaanuun dejinta waddamaynta iyo dawladaynta, aysana jirin wax fir iyo farac toona ah ee kala dhexeeya ay sannad ka yar kaga soo qaataan sinjiyad dhalasho ayna markaas ku doodaan waxaan u dhashay Maraykan IWM, oo aysan markaa intaas keliya ku garanaynin in dawladnimada iyo qaranimadu aysan ahayn habka ay iyagu u arkaan ee ah in qolo lagu eedeeyo kun sano ka hor bay ka soo haajirtay meel kale oo hadda waddankaan xaq kuma ay lahan.

Miyeysanse garan karin in waqtiga ay sheegayaan ka dib ay abuurmeen waddamada maanta dunida ka jira oo idile iyaga oo ah qoysas iyo ashkhaas isaga kala yimid afarta bayna jiho ee ifka, oo aynan waagaas jirin waxa maanta loo yaqaan dawlad oo u dhisan hab dhaqameedka maanta jira.

Waxaa intaa sii dheer, Soomaaliya waa hal qoys, waayo waxa ay dunidu maanta u taqaanno qolo ama qawm waa dad ku kala duwan midab, dhaqan, luuqad, diin, dabci iwm. Sidaa darteed, Soomaalidu waa isku wada hooyo maadaama ay intaas oo dhan isaga mid yihiin. Waana dalka keliya ee dunida ay shacabkiisu isku wada mid yihiin. Haddaba markii aan dhibaatada Soomaalida baaritaan ku sameeyey ayaan soo helay in ay cilladu tahay in aannu isku mid nahay. Malaha waxaa la qaatay in aan kala noocyo iyo kala qabiilyo ahaanno. Oo bal eeg haddii ay waddanka nagula noolaan lahaayeen qawmiyado naga nooc duwan sida Shiine iyo Yurubiyaan oo ay na tusi lahaayeen tartamo noleed, waxaan

dareemi lahayn ficilo oo waxa aannu ku mashquuli lahayn sidii aan iyagu uun ula tartami lahayn, dhexdeenana xoogba isuma helneen. Tusaale, walaalaha faraha badani way is colaadiyaan, isumana kaalmaystaan sida ay kuwa tirada yari isu kaalmaystaan. Walaal in uu macaan yahay ninkii madiga ah unbaa garanaya.

## SIDA AY KU SAMAYSMEEN QABIILLADA SOOMAALIDU

Ilaa hadda cidna si rasmi ah uguma istaagin oo sugin caddaynta asalka soomaaliyeed, waxaana taas loo aanaynayaa sababo fara badan oo ay ka mid yihiin; iyada oo aan cidna ka hayn wax qoraal ah ama wax raadad la taaban karo ah, tiiyoo aanay culimada taariikhda qudhoodu u helin kasho ku filan oo ay ku dersaan dhulka iyo dadka toona.

Inkastoo ayse qaarkood isku dayeen haddana marna ma aysan keenin wax la wada raaci karo balse iyaga qudhooda ayaaba is khilaafayey maadaama ay daraasaadku ugub ahaayeen iyo iyada oo taariikh baare kastaaba uu qoraalkiisa waafajinayey siyaasaddiisa uu waqtigaas fulsanayo.

Marka la damco in la daba raaco qabiillada iyo taariikhahoodana waxaa la gaarayaa Eber, waxaana soo noqonaya baaritaan hungoobay, markaa ayaa la arkaa in daba galahaasi uu dan bido inkiritaanka iyo beeninta dhammaanba jiritaanka qabiileed ee Soomaalida.

Haddaanse wax ka xusno sida ay ka dheheen qoraayadu waxaa ka mid ah; (Abtirsiga asallada soomaaliyeed waa laga shakisan yahay marka horeba, sababtoo ah waqtiga fog ee ka soo wareegay iyo sheegashadooda Carbeed oo loo malynayo in ay yihiin qaxooti carbeed) sidaas waxaa yiri; H.S.Lewis, eeg; (Somali conquest of the Horn of Africa) , jallaadka koowaad ee soo baxay 1960 kii, bogiisa; 220-30.

E. R. Turton, wxuu ka yiri; intii ka dhex lahayd qarnigii 10 aad ilaa iyo 15 aad ayey soomaalidu ka kacsadeen dhulka ay degan yihiin Galla iyo Bantu, wuxuu kale oo shegayaa in ay carradooda mar kale sii ballaarsadeen dhawaan qarnigii 18 aad, markaas oo ay ka kacsadeen dhulka webi Jubba iyo webi Tana qabiilada kala ah; miji kenda, difo, Durumo, Chonyi, Giriamo, Jibana, Kauma, Orama iyo Wardai. eeg; ( Bantu Galla and som- migrations in the horn of africa) bogga; 519.

H.S Lewis wuxuu kale oo leeyahay in ay Soomaalida iyo Gaaluhuba ka wada yimaadeen Itoobiya. (Gaaluhu way kaga dambeeyeen soomaalida Aagga Nukliyeerka ee Itoobiya, oo waxay ka soo qaxeen qarnigii 16 aad, inkastoo ay isla dagaallamayeen waxay asal ahaan ka wada yimaadeen Itoobiya) eeg; (H. G. Fleming " biaso & rendille, iyo Rassegna di studi Etiopici xx 1964).

“Ilaa iyo waqtigan marnaba lama xadidi karin abtirsiga iyo tafiirta Soomaalida, Gaalaha, iyo Cafarta, waxay joogeen koonfurta itoobiya ilaa iyo rift Valley, halkaas oo ay ku noolaayeen Beero, Xoola dhaqad iyo Ganacsi, laakiin hadda waxaa laga yaabaa in qaarkood ay duufsadeen qabiilka Beejaha ee Suudaanta ah ama Carabi kaga soo fatahantay xagga KHaliijka, ayna u rogeen reer baadiye xoola dhaqato ah oo iskood u madaxbanaan, isla markaasna ay u naqraaceen dhulka siman ee ah dooxooyinka aan lahayn buuraha iyo togaga”. eeg; (East African Pastoralism. bogga; 319.)

Laakiin ninka qoray; Somalis and Somali Language, Maxamed Farax Xatii, wuxuu leeyahay; (Soomaalidu waa Carab aan shaki ku jirin oo ka guursatay afrikaankii halkaas degenaa, uuna galey dheeh yar, luuqadooduna waa Lahjad Af Carabi ah oo fogaatay) eeg

ÇáÕæãÇá æÇááÛÉ ÇáÕæãÇáíÉ ) bogga; 52-53.

Harold D. Nelson isna waxa uu sheegayaa in ay Soomaalidu soo degtay geyiga ay degan tahay oo loo aqoon jiray Gubanland, 1000 sano ka hor, ayna ururayntoodu ku salaysan yihiin Qabiillo, Jilibyo, iyo ilma adeersi, laakiin uu habka ay isugu xisaabshaan yahay mid isku qasan oo aan la rumaysan karin, tusaale; Majeerteen waa qayb ka mid ah midawga Koombe Harti, ka dibna waa qayb ka mid ah Kablalax, oo ah qaybta labaad ee Daaroodka.

Hase ahaatee go'aanada lagu sameeyey kooxaysigani waa mid iska taariikhi ah ee aan marnaba ahayn abtirsiinyo laga farcamo, waxaana lagu keenay ujeeddooyin heshiisiin iyo kontarakti kala saxiixasho oo ay dejiyeen Carabtii hore) si ay u nabadeeyaan beelaha. eeg bogga; 76- 80 ee (Somalia a cauntry of study).

Waxa kale oo ay qoreen kuwa badan oo reer Bari iska yeel yeel (Mustashriqiin) ihi; (Soomaali waxay u dhisan tahay hab Qabiil, Qabiil hoosaad, Jilib, Laf, Ilma adeer iwm, kuwaas oo si xun isugu qasan aanna marnaba la fahmi karin oo lagu maskax wareerayo, waxaad arkaysaa saddex nin oo walaalo ah oo mid waliba uu ku abtirsado qabiil gooni ah.

Inkastoo ay dhexdooda iskala saraysiiyaan oo isla kala qab weyn yihiin, iyaga oo isu kala saaraya hab isir wanaag iyo sharaf ku dhalad, tusaale; Daarood iyo Isxaaq waa kuwa ugu nasabka sareeya (Noble Tribs), Hawiya, Tumaal, Midgaan, Yibir iwm iyaguna waa kuwa la liido, (*out cast)*. Saas oo ay tahayna lama soo dhex gali karo oo heshiis ayey ku yihiin wada dhaqankoodaas. eeg, bogga; 139, ee ( Somali Grammar. prose and verse and an account of the Yibir and Midgaan Dialects), Cambridge University press, 1905 kii,. hadana sii

eeg; (The Somali Language).by; C. R. V. Bell, O. B. E. Longmans, Green Co, London, New york, Toronto, 1953 kii.

Haddaan u soo degno habka loo allifo qabiilka soomaaliyeed waa isla sida ay dad badan oo kaleba u samaystaan, taas oo ah in magac ku baxo; nin caan ah ( sheekh ama boqor), dhacdo amakaag leh, dhul magiciis, geed caan ah, kacaan, lahjad ama oraah raad reebta, iwm. tusaale; magacyada waddamada jira badankooda oo aan la kala saari karin magaca dadka iyo magaca dadka.

Inkastoo ay yar yihiin waddamada laga isticmaalo qabiilka, haddana waxaad ka arkaysaa in kuwa afrika ay badankoodu isku hab u dhisan yihiin, laakiin waa ay yaryihiin wax abtirsi magac tirsi ah oo la xaqiijinayo (run & beenba) isticmaalaya sida soomaalida, tusaale; Shungwaya, waa qabiilo Kenyan ah waxayna magacaan ka dhaxleen boqorkoodii Shangai, isla taas oo kale waa tan Sacuudi, xattaa waddanka aadka u ballaaran ee dunida rubuceeda dhan ee la yiraaho China waxaa loogu magac daray boqorkoodii caanka ahaa ee Chian.

Waxaa kale oo mar walba dhaqan ahaan dunida uga jirta in magacba ayaamo gooni ah soo baxo ayaamo dabadeedna idlaado oo iska dabar go'o, taas oo aan macneheedu ahayn in reerkii magacaa la oran jiray ay dhamaadeen ee ay la baxayaan magac kale, ama ay ku kala darsamayaan kuwa kale, sidaa oo kale ayey u dhacdaa in qolo qaadato magac ay qola kale waagii hore sidan jirtay sida magacyada waddamo waa weyn oo aannu maanta naqaano ayna ka mid yihiin; Rooma, Faransa, iyo kuwa kale.

Laakiin arinta soomaalida oo isla taas oo kale ahi iyadu waa noocyo badan tahay oo waxay ku timaaddaa wejiyo kala duwan, waxaa la arkaa in aad hesho laba nin oo walaalo isku aabbaa ah oo mid ba qabiil ka tirsan yahay, waxaadna arkaysaa jilibyo qabiillo ah oo iyagoo isla magicii wada wata haddana ku kala jira laba qabiil oo kala duwan sida;

Sacad- Ogaadeen iyo Habar gidir, leel kase waa Xawaadle, Xawaadle waa Ogaadeen, sidoo kale Cabud-waaq, gumar waaq, jid waaq iyo Tagaal waaq - Ogaadeen iyo Degoodi, reer xasan - Mareexaan iyo Hadamo. waxaa kale oo lagu arkaa soomaalida tiiyoo inta qabiil laga baxo lagu biiro qabiil kale duruufo jira awgood, sidaa awgeed waxaad arkaysaa laba ay isku aabbe iyo isku hooyo dhaleen oo uu midba qabiil gooni ah ku jiro.

Waxaa ka mid ah waxyaalaha dawrka lixaadka leh ka qaatay qabiil samaynta Soomaalida, kala qaxii iyo kala hayaankii ay dadkeenu ku kala durkeen isagana soo dhawaadeen dhinacyo iyo darafyo kale, iyo ummadihii kale ee ku soo biiray geyiga

iyaga oo ka soo kala bara kacay waddamada deriska ahaa een weli dhiig iyo dhaqan wadaagga leenahay.

Sidoo kale colaadihii iyo isu duulkii is daba joogga ahaa ee caadoobay waayadii dhexe ee qabiilku yimid, sidoo kale calaf doonkii iyo naqraacii ku dhisnaa is tawaansiga iyo weheshiga, kuwaas iyo wax yaalo kale oo fara badan waxay sababeen baahi qabiil oo ka imaanaysay duruufihii taagnaa ee aan lahayn dhan loo dhaafo, kaasoo markaa ku dhisan is bahaysi, is garabsi, is xilfisasho, is xigaalaysi, wada shaqaysi, iyo is weheshi isku danaysi.

Haddaba dadkii Soomaaliyeed oo aan horay u sii diyaarsan is urursigaas ayaa si kedis ah u bilaabay in ay is kala qola qoleeyaan oo isku kala suntadaan magacyo ay markaa ka dib diyaariyaan, sidaa darteed waxay noloshii adkeyd ee waayadaas soo saartay qabiillo badan oo maanta xoog leh isuna aaminsan in ay yihiin wiilal ka soo wada farcamay hal aabbe oo la yiraaho magaca ay wataan ee ah kii waagaas sida duruufta ah ugu baxay.

Waxaa kale oo ka mid ahaa duruufaha maalinkaa sababayey is qabiilaysiga cinwaan la'aan dadka haysay, maadaama ay yihiin dad reer guuraa ah oon meelna ku salaysnayn ayey dantu ahayd in la isku baadi goobo reer hebel, tusaale dadyowgii waagaas dhul qodatada (Beeraleyda) ama kalluumaysatada ahaa waxay tan iyo waagaas ilaa iyo maanta isticmaalaan deegaanno, gobollo, tuulooyin iyo xaafado. halka ay Soomaalidu ka isticmaalaysay reer hebel.

Maanta oo la helay boosto iyo is gaarsiin fududna waxay dadku isticmaalaan cinwaano (*address*) isla sidaa oo kale, keliya in uu deegaanka maanta waafaqsan yahay mooyee. Taasina waxay kuu caddaynaysaa in cinwaankii hore ee is qabiilaysigu uu ahaa cinwaankii reer guuraaga, cinwaanka maantana uu yahay kan reer magaalka iyo dadka ku neggan meel lagu yaqaan. Sidaa darteed waxaan rajaynayaa in dadkeenu markay xasilaan ay iska baddeli doonaan cinwaankan ku meel gaarka ah (temporary) oo ay samaystaan mid joogto ah (*permanenty address*) sida;

C/raxmaan X.Maxamed.

L/H Guri lambar: 231, wadada: Makka-al mukarama, soone: B, Deg/Hodan, Muqdisho- Soomaaliya. halkii beri hore iyo ilaa maantaba laga isticmaalo noocii haraadiga ah ee u dhigma sidatan soo socota: Ina X.Maxmed, reer Qurac, reer qansax, iyo bah habel.

F.G: Qabiilka iyo qaraabada Islaamku sheegayo waa kan leh asal iyo farac la hubi karo, sidoo kale ma ahan kumanaan fac ee wuxuu leeyahay xad iyo heer uu gaaro.

Wuxuu yiri Nebi Maxamed NNKHA, markay damceen in ay qaar asxaabta ka mid ihi u abtiriyaan ee ay gaarsiiyeen fac tiriskiisii ilaa Cadnaan; War ka joogsada, waxaas lama hubee, markaa ayuu sii yiri; Lacnadda Eebbe ha ku dhacdo kuwa nasabka tiriya. Sidaa ayuu haddaba Nebigii Maxamed NNKHA u ahaa mid weligiisba diida in loogu abtiriyo wax ka sii dheer awoowgiisii Cadnaan, isaga oo lacnadi jiray kuwa dadka u abtiriya. eeg; (Siirada Ibnu Hishaam, Horudhaceeda, bogga 1 aad, marka la sharaxana bogga 2 aad).

Tan ugu la yaabka badan waxay tahay maxaa waxakan baray dad aad u tiro yar marka dunida lala barbardhigo, oo ay umaddaha kale u garan waayeen?. Waxaa keliya oo abtirsiimo laga yaqaanaa Soomaaliya, meelo kale oo ka mid ah dhulalka Carbeed iyo Yahuudda. Adduunka intiisa kale hadaad qof weydiiso magaca awoowgiisii labaad waa uu kugu qoslayaa oo oranayaa: “ waar, malaha waad waalan tahay ee dib isugu noqo”. Haddaba cid kaa rumaysanaysa waxaan abtirsanayaa ilaa afartameeyo fac ma ay jirto, suurto galan ma ahan oo dadkii ay wax ukala xisaabnaayeen baaba garan la’. Markaan arinta ka eegno xagga carabta iyo Yahuudda, iyagu waxa ay ku dhaamaan Soomaalida in ay wax uun qoraal ah leeyihiin oo laga yaabo in qofku uu diiwaan gashado magacyada awoowayaalkiis, ka dibna ilmihiisa sii baro. Laakiin Soomaaliyey xagee baad wax ku soo diiwaan gashateen, oo aad ilaa iyo waagii – qiyaastii Ciise ka hore - ku xifdinayseen magacyadatan?

Xagga diinta markaannu usoo noqono, mar haddii uu Nebigii NNKHA ka dayriyey abtirsigii Carbeed ee qoraalada iyo cadaymaha lahaa, xagee buu joogaa midka ay isu soo guur guuriyeen odayaal Soomaaliyeed oo habeenba meel ku soo hoyanayey, subaxa damabana raadkooda iyo raqdoodaba la waayayey?. Yuhuuddu waxay u egtahay meesha ugu horaysa ee aan ka soo qaadanay fikradda abtirsiimaha, oo waxa ay qiyaasta cilmi baaris isu tageysaa in beryo hore inta Soomaalida loo akhriyey kitaabo “Tawraat ama Injiil’ ah, looga sheegay wax ku saabsan caruurtii Nebi Yacquub ee ay Yuhuuddu ka soo farcantay. Markaasna intay sheekada u bogeen ay iyaguna isu kala qoqobeen oo isukala qaybiyeen sidii ay maqleen oo kale.

# CARRADUU GAARAY
# KALA FANIINKA SOOMAALIYEED

Meelaha fog fog ee Soomaalidu ku gaareen kala faniinka iyo kala qaxa, hayaanka iyo naq raaca, carro gediska iyo arima ganacsi intaba waxaa ka mid ah dalalka Afrikada dhexe sida; Tanzania, Brund, Ruand, Ugand, Kenya iyo kuwa kale ee la xiriiraba. Haddaanse sii faah faahinno sida ay ugu kala jiraan dalalkaas waxaan tusaale ugu soo qaadan karnaa mid mid inta aan kor ku soo xusnay, masalan;

Tanzaia, Gobolka Carusha, Degmada Bobati, Tuulooyinka Endesak, Mangeti, Afyomi iyo buurta Hanang (asalka magucu ahaa; Xanan) intaba waxaa dega qabiilada Mburu iyo afyoomi, oo marka laga eego xagga; dhaqan dhaqaale, midab, sinji, caado iyo dabiici intaba boqolkiiba boql ka waafaqsan Soomaalida.



Luuqad ahaanna waxay ku hadlaan lahjad u gooni ah oo u eg Af somaali silloon, diin ahaanna waa cawaan waxaana loo maleeyaa in ay ka soo haajijreen dalka soo gelitaankii Islaamka ka hor, iyaga qudhooda haddii la waraysto waxay kuu sheegayaan in ay kooyto fog ku yihiin dadka dalka oo weli ma ay jecla in ay is dhex galaan iyaga iyo deegaanku, waxaana ka mid ah erayadooda uu weli ku dambeeyo raadka Soomaaligu;

see yahay = oo la mid ah see tahay (salaan ahaan).

Aniga =Aniga, Aayo = hooyo, Akow = abkow, Yacda = Lugaha, Boqol = Boqol, Kun = Kun, iyo erayo kale oo badan.

Ugand; Degmada Mbarra ee xagga koonfur galbeed waxaa degan qabiillada; Ankofe iyo Hiima (asalkii ahaa Xiimaay), kuwaas oo dhab ahaan uga waafaqsan marka laga eego xagga dhaqamadii aan soo xusnay oo dhan, waxaad u qiraysaa Soomaalinimo marka aad eegto sida ay u gala mid yihiin soo dhaweynta, geesinimada, gar goynta iyo xaajo dhigashada, guurka iyo gabdho kala doonka.

Brund iyo Ruand waxaa ku nool qabiilka weyn ee Tutsiga oo aan Soomaalinimadooda daah saarnayn dad badanina qirsan yihiin.

Kenya iyo Itoobiya iyaga waaba gar in laga helo Soomaali oo waxayba hayaan Soomaalida barkeed, laakiin haddana waxaa ku sii dhex jira dadyow iyo qabaa'il aan la ogeyn oo ka baxay tira koobta waxaana ka mid ah; Rendiile.

Rendiile waxay degmadoodu u badan tahay Degmada Samburu, magacani wuxuu ugu baxay qoladaas ka dib markii ay soo baxday fikradda qabiilaysiga ee Soomaaliya ayey mucaaradeen ashkhaas fara badan oo ka kala mid ahaa dadyowgii soomaaliyeed.

Haddaba maadaama ay ku caasiyoobeen talooyinkii kaabba qabiiladii iyo odayaashii ayaa la go'aamiyey in laga masaafuriyo arliga iyada oo loo dhib geliyey qixitaan iyo naf la carar. Hadaba dadyowgii laga soo kala cayriyey gobollada dalka ee kala duwan oo dhan waxay intoodii badnayd u soo bara kaceen Deg/Sumburu, waxaana lagu wada dhaleeceeyey in ay diideen reerohoodii.

Sidaa darteed markii qofkooda la arko ama qof ku caasiyoobo awaamirta suldaanka iwm, waxaa la oran jiray waa Reer-diid (kacaan diid), eraygaasina wuxuu is dhalan gediyaba wuxuu maanta sii socdaa in la yiraaho Reendiinle oo ka ratibmay qalad ugu dhawaaqii dadyowga ay la dageen oo aan karin sax ugu dhawaaqidda erayga af Soomaaliga ah maadaama uu san afkoodii ahayn.

Luuqadda ama lahjadda ay dadkaasi ilaa maanta ku hadlaan waxaa la oran karaa in boqolkiiba labaatan ay tahay Af Soomaali, diin ahaanna inkastoo aynan sheegi karin diin ay caawa Alle haystaan haddana waxay sameeyaan camalo badan oo ka mid ah Tiirarka iyo shareecada Islaamka waxayna u haystaan in ay dhaqankoodii uun tahay.

Waxayna ogsoonyihiin Soomaalinimadooda oo badankooda iminkaba waxay sheegtaan qabaa'il soomaaliyeed, dilkii iyo cadaadiskii kululaa ee laga soo mariyey in ay ka tanaasulaan diinta Islaamka iyo dhaqan ama sheegashada Soomaaliga ayaa sababtay in in badan oo iyaga ihi aysan garan karin halkay ka soo jeedaan.

Waxyaalaha ka haray mukushii Islaamka ee weli ka sii bidhaamaya ficilladooda ay caado ahaanta u sameeyaanna waxaa ka mid ah; Salaadda, saddex jeer ayey maalintiiba isugu yimaadaan meel ay ku magacaabaan Mashiid, waxayna akhriyaan akhrisyo lahjadooda ah oo ay ka mid tahay; Makka, Madina Iyo kuwa kale oo ku taxaluqa Carab iyo Islaam.

Marka arimahaas wax laga weydiiyana waxay kuu sheegayaan in Makka iyo Madiina ay yihiin meelaha ay asalkii hore ka yimaadeen oo ay awoowayaashood ku aasan yihiin. sidoo kale waxay muujiyaan wax ka mid ah Soonka,

oo waxay cuntada qaarkeed ka soomaan shan iyo tobanka cisho ee ugu horaysa bil ay iyagu isla yaqaaniin, maalinta ugu horaysa ee bishaasna way ciidaan oo isugu tagaan meeshii Salaadda.

Si kastaba arintu ha ahaatee akhristow dhulka soomaaliyeed maadaama uu ahaa xarun ganacsi iyo ilbaxnimo wuxuu ahaa meel ay mar walba isaga daba imaanayeen diimo, fikrado iyo mabaadi' kala duwan, kuwaas oo sababayey dagaallo iyo iska hor imaadyo, isla markaasna laga dhaxlayey kala carar iyo kala hantaa wilif, sidaa darteed waddanku wuxuu ahaa meel loo soo qaxo lagana sii qaxo.

Waxaa kale oo iyana beryaahaas aloosantay in qola walbaba qolada ay ka xoog badan tahay ku qasabto in ay iyaga sheegato, oo buuxiso garabkooda. Xataa ciddii aan la qasbin laakin ku dhex nool cudud ka awood saraysa waxaa ku qasbi jiray danta iyo duruufta nololeed ee markaa taagnayd, markaa ayey iyadu soo weydiisan jirtay in la sharciyeyo oo la siiyo dhalashada qoyska. Taasina ma ahayn wax ka beddelan tan maantaba caalamka oo idil laga isticmaalo.

Waxa uu dalku ahaa ahaa meel ay ku xoog badan tahay caadada reer guuraanimada ee aan lahayn degenaanta iyo taariikh sugidda, kuna xisaabtanmin deegaanka iyo dhul yeelashada ku qotonta hantileynimada, waxaana ilbaxnimada iyo dhaqaalaha dalka ka faa'iidaysan jiray dadyow socoto ahaa oo marba dhan u dhaafi jiray, kana tagi jiray raadad yar yar.

Hadaba gudaha iyo agagaarada dalka oo dhan waxaa is daba meeraysanayey dadka Soomaaliyeed oo uu mid walba isaga jihaysanayey hadba meeshii ka soo hor baxda uuna halkuu tagaba ka sii bilaabayey tolow iyo qolaysi cusub, sidoo kale waxaa iska caadi ahayd in markii la soo saaray qabiilaysiga iyo isku duubnida is garabsiga caynkaas ah iyo is kaalmaysiga ku dhisan, taas oo la mid ahayd tabinka maanta ay mar labaad Soomaalidu u soo cusboonaysiiyeen is xilfaysigii iyo is axsaabaysigii.

Tusaale qabiillada la isku leexshay ee la wada siiyey magacyada xarfaha la soo gaabiyey ah ee loo akhrinayo in ay isku fir yihiin, waxaana hubaal ah in qofkeennii Alle gaarsiiyo uu arki doono iyadoo la leeyahay (horta odaygii es el ee /SLA ahaa ama yuu es sii/usc ahaa meequu dhalay)? IWM, waayo magacyada reer hebel ee maanta la gaarsiiyey heerka cibaadada waxay ku bilaabmeen intooda badani isla tabtan oo kale.

Marag cad oo taas ku dareensiinaysa ayaa waxa ay tahay, marka aad dhab ahaan ugu fiirsato nidaamka qabiilada Soomaaliyeed, waxa aad soo saaraysaa in uu gebigiisuba

yahay ku meel gaar, si loogu moodo duruuf markaa uun taagnayd. Bal eeg beri hore waxaa Soomaalida ugu magac iyo jiritaan weynaa qabiilka loo yaqaan Dir, laakiin iminka waxa aad dareemaysaa in lakala diray shirkaddii Dir ahayd. Taas waxaa keenay; dadkii Dirta ahaa ayaa ilbaxay, oo qof walba waxa uu gartay dantiisa gaar ahaaneed, markaa ayuu ka durkay qoolkii qabiilka ee uu ku xabisnaa.

Wadadaas ayaa hadda waxaa sii haya qabiilka loo yaqaan Daaroodka. Ka dib markii uu kala haaday jiritaankii dalku, waxa uu qof walba oo Daarood ihi dareemay dantiisa. Waxa ay kala galeen waddamo iyo qaarado kala durugsan, markaa ayey u dhaqmeen sidii ay u dhaqmayeen dadyowgii ay u tageen. Sidaa si ka soo horjeedda waxaa u dhaqma qabiilka Hawiyaha oo iyagu isu haysta si gaarsiisan heer caqiido, ayna ka dhexayso midnimo loo arko muqaddas. Sidaa darteed waxaa ka muuqata inta badan dadka ku jira shirkadda Hawiyaha ah xiiso kulul oo ay weli u hayaan magaca qabiilkooda oo meel kaste oo ay joogaanba waxa ay xiriir toos ah la leeyihiin xaafiiska laga xukumo qabiilka si ay ugu biiriyaan tabartooda.

Waxaa kale oo ka mid ahaa waxyaalihii ka qayb qaatay samaysanka qabiilada Soomaaliyeed nidaamkii ay diinta ku faafinayeen culimadii ay kala hogaaminayeen Sheekh Yuusuf Al-kawneyn iyo Sheekh Xuseen Baali ee goblka Baali ka hawlgali jiray. Taas oo ay ugu kala tilmaamayeen ama ku kal salaynayeen hadba kooxdii soo Muslinta (*afwaajan afwaajan*).

# WAA MAXAY DAAROOD?

Daaroodka oo lagu qiyaaso tirada ugu badan ee Qabiillada soomaalida marka laga tix raaco tira koobihii ilaa hadda laga sameeyey dalka, sida tii 1973 kii iyo tii 1984 kii, waxaana la sheegaa in ay tiradoodu in badan kor u sii dhaafayso Milyoon, tira koobaha iyo qiyaasaha qaarkoodna aad bay uga sii badiyaan tirada intaa la eg oo waxaa la gaarsiiyaa in ay ka badan yihiin Milyoon iyo Bar (eeg ÇáÓíÇÓÇÊ ÇáËÞÇÝíÉ Ýí ÇáÕæãÇá ÇáßÈÑí . 1887- 1986 ã. ÏßÊæÑ ÍÓä ãßí ãÍãÏ ÃÍãÏ. Õ:20.Waxaad kale oo sii eegtaa; bogga 25 aad ee kitaabka uu qoray Dr; Maxamed c/qani sacuudi, ee la yiraaho;

ÇáÕæãÇá ÚÖæ ÌÏíÏ ÈÇáÌÇãÚÉ ÇáÚÑÈíÉ.

Wuxuu Dr; Maxamed c/qani Sacuudi; sheegayaa in ay Daaroodku yihiin Carab dhalad ah oo dhex gashay reer Samaale ayna dhashay gabadhoodii Doonbira, wuxuuna u kala saarayaa saddex qaybood oo kala ah; Absame, Mareexaan iyo Harti. eeg isla buugiisaas, bogga; 20.

Waxayna deegaan ahaan kor kaga xaydaaban yihiin guud ahaanba khariidada dalka dibadda iyo gudahaba.

Sida ay ku adkaysanayaan dadka iskula jira waaxda ama xerada Daaroodnimada waxay tahay in ay kulli wada yihiin ilmo uu wada dhalay nin la oran jiray Daarood, kaas oo asal ahaan ka yimid dhulka barakadaysan ee Makka iyo Madiina, waqti aan weli la kala caddayn in uu ka horeeyey Islaamka iyo in uu ka dambeeyey.

Maadaama aan la isku raacin ujeedadii imaatinkiisa oo ay dadka qaarkoodna leeyihiin wuxuu u yimid arimo ganacsi, qaar kalena ay leeyihiin wuxuu u yimid arimo diin faafis, qaar kalena ayba leeyihiin wuxuu ahaa nin dhiblow ah oo la iska soo masaafuriyey laguna soo tuuray xeebta Soomaaliyeed, ka dibna ay heleen Dir iyo Hawiye ayna soo dhaweeyeen oo dejiyeen. John Buchholzer, oo soo ururinaya murankaas ayaa qoray;

(Daaroodka oo ah qabiilka ugu magaca iyo meeqaanka sareeya Soomaalida ayey dadkiisa iyo kuwa kale qabaan in uu markii hore u yimid dalka diin faafis oo uu soo diray Nebi Maxammed NNKHA oo ina adeerkiis ahaa, uuna ahaa weli ku socday maqaadiir Rabbaani ah.

Waxyaalo fara badan oo aragtiyadaas ayidaya ayaa waxaa ka mid ah; fikradda ay dad badan oo isla Daaroodka iyo

Yemaniyiin ihi ay qabaan ee ah in odaygii Daarood uu ahaa Sheekh ku mucaarad noqday xertiisii kale ee uu kula noolaa ardiga Yeman, ka dibna laga soo eryey xaruntii xerta oo idilba iyada oo lagu eedaynayo in uu bidcoobay. Ka dibna magiicii ahaa (waa la cayriyey) oo af Carabi ahaan noqonaya (Dhurida). Eraygaas oo is bedelka waayaha iyo degaanada kala duwan awgood ugu dambaystii u bedelmay Daarood.

laakiin kuwa ka soo hor jeeda raadkaas ayaa sheegaya in uu ahaa Tuug ku noolaa guriga Nebiga, oo caadaystay in uu Nebiga ka xado kabaha, ka dibna inta Huuri lagu riday ayaa badda la isaga soo raaciyey dhanka xeebta Soomaaliyeed). eeg, bogga; 43 - 46 ee (The Horn of Africa). ee uu af Danish ka ka soo tarjumay Maurice Michael. waxayna dadka Daaroodka intooda badani ku faanaan in uu asalkoodu ahaa Ducaad u timid diin faafin awgeed.

Sidaasna waxaa u qiraya qaar ka mid ah taariikhyahanada Islaamka ee caanka ah sida; Carab Faqiih, Rajab iyo kuwa kale, kuwaas oo sheegaya in ay reer Jabarti ahaayeen ducaad ku hawlanayd diin faafin boqortooyadooda ka sokow, taas oo ay ka mid ahayd in ay dhallin yarada iyo caruurta wax ku baraan masaajidda iyo dugsiyadooda, ka dibna ay tacliin sare sida; fiqhiga,iwm ugu diraan Dimishiq, Qaahira, Sanca iyo meelo kale ee ka mid ah dhulalka Carbeed.

Waxayna dhallintaasi dhawr sano wax barasho ah ka dib ku soo noqon jireen dhulkoodii Jabarti, Zaylac, Cadaal iyo inta la xiriirta. eeg bogga 95 aad ee kitaabka Rajab. iyo kitaabka Dr; Abdur Ra'uf ee (Illustrated History of Islam), boggiisa 152 aad oo isna qoraya in ay Soomaaliya keeneen Islaamka kooxo ahaa Qureysh, Caaqil Bin Abi Daalib oo hadda ku dhex qasmay Soomaalidii kale.

waxayna tusaale ahaan u soo qaataan qaar ka mid ah Ducaaddii ugu waa weyneyd ee dalka diinta soo gaarsiisay sida;

Sheekh Yuusuf Alkawneyn iyo Axmed Gureey oo ay sheegaan in ay ahaayeen niman Daarood ah oo ka mid ah odayaashii ay ka soo farcameen, sidaasna waxaa ku raacsan qaar ka mid ah taariikh yahannada caanka ah ee wax ka qoray arimaha Soomaaliya sida;

Dr; Xasan Maki Maxamed Axmed oo qoray (in uu Yuusuf Alkawneyn ka mid ahaa ilmo Cumar walshamac, oo ahaa jilib Carbeed oo reer banuu Haashim ah nasabkooduna yahay reer abii Daalib, oo xukumi jiray Sanca, mudadii u dhexaysay 1127- 1185 kii M. (eeg sharaxa bogga; 25 aad, ee kitaabkiisa; ÇáÓíÇÓÇÊ ÇáËÞÇÝíÉ Ýí ÇáÕæãÇá ÇáßÈíÑ.

ama kitaabka Sheekh Axmed C/llaahi Debraash

ßÔÝ ÇáÓÏæá Úä ÊÇÑíÎ ÇáÕæãÇáí Õ: 13.

Laakiin tani waxaa hortaagan dhawr su'aalood oo kala ah; Al-kawnayn oo ku magac dheer Aw barkhadle waxaa wada sheegta qolooyin badan oo kala duwan sida; Gadabuursi, Shiikhaal, iyo Darood ee waa kuwee kuwa ka run sheegayaa?, kuweenaan kaliyase maahee waxaa sheegta quruumo kale sida; Yeman, Maldive iyo kuwa kale, waxayna taariikhdu ogtahay in mar loo malynayo ku faafintiisii Soomaaliya ka hor diinta ka faafin jiray jasiiradda Maldive oo uu sida Soomaalida oo kale higaad afkooda ah ugu sameeyey. eeg; (Historical Relations between the Horn of Africa and Bersian Gulf and the Indian Ocean Islands through Islam) by; Musa H. I. Galal.

Axmed Gurey isna waxa ay taariikhdu ogtahay in uusan xilligii uu jihaadkiisii bilaabanayey wax garab iyo taageero toona ah ka haysan qolada lagu leexinayo ee Mareexaan, balse ayba ahaayeen cududii ugu weyneyd ee laf dhun gashay ku noqotay kacaankiisii diin faafineed, inkastoo ay kolkii dambe gacan sare siiyeen oo ay u sababeen guul lama illoobaan ah.

Ka dib markii ay u soo qumiyeen guud ahaanba qabaa'ilkii Soomaaliyeed ee markaas jiray, maadaama ay iyagu ka madax ahaayeen oo ay hogaanka u hayeen intii qabiil Soomaaliyeed markaas jirtay, eeg; bogga; 171-172, ee kitaabka;

العلا قا ت السياسية بين مسلمي الزيلع والنصاري الحبشة في العصور الوسطي

. د: رجب عبد الحليم. دار النهضة العربية: القاهرة. 1985 م

kaas oo qoraya sidatan;

“Waxaa ugu caansanaa qabiiladii Soomaaliyeed ee ku soo biiray safafkii jihaadka ee Imaamka Axmed Gurey; qabiilada Habar maqdi ee uu sayidka u ahaa garaad Dhuweyd (waxaa lagu sheegaa koox Mareexaanka Gedo ka mid ah), Garre, oo uu hormuud u yahay garaad Mataan, Zarba oo sayidkoodu yahay Suldaan Maxamed, Marreexaan oo uu sayidkoodu yahay Axmed Bin Xaraabo, iyo kuwa kale”. bog; 171.

Isaga oo qoraagu hadalkiisa sii wata ayuu tilmaamay isaga oo warkiisana ka soo xiganaya, taariikhyahanka ugu caansan intii soo martay bariga dhexe iyo Afrika ee haddana isagu goob joogaba ka ahaa dhacdadan oo ka mid ahaa mujaahidiintii ka qayb gashay dagaalkaas, ee layiraahdo; Carab Faqiih, sidii uu u dhacay iyo sidii uu ku dhamaaday gedoodkii ay qabiilladii Soomaaliyeed ka gedoodeen daacadii Imaamkii, ka dib markii la amray in ay Zakadii baxshaan iyo iyaga oo ka madax go'naa dilkii Suldaan Abuubakar, oo ay ku shinsanayeen fududaynta dhaca iyo dulmiga ay ku hayeen tabarlaawayaasha.

Taasina waxay kuu caddaynaysaa in Mareexaanku hor boodayeen ku caasiyoobiddaas Axmed Gurey, iyaga oo ahaa furaha iyo madaxa keli ah oo laga galo guud ahaanba qabiilladii soomaaliyeed ee berigaas jiray. waxaana ka mid ah sida ay qoreen;(ka dib markii ay qabiilladaasi diideen in ay Zakadii baxshaan, ayuu Imaamku gurmad weerar ah ku qaaday oo jebiyey magaalooyinkoodiina dumiyey, kolkaa ayey ku soo noqdeen u hogaansankiisii.

Waxayna u soo direen wafdi culus oo nabad doon ah Harar, dhammaanba Soomaalidiina waxay heshiis taam ah oo bariida san la galeen Imaamkii, iyaga oo ku soo biiray ciidankii, waxaana hogaaminayey amiirkoodii sare ee garaad Axmed Xaraabo, ayna horjooge guud u yihiin qabiilada Mareexaan ee Soomaalida ah), bogga; 172.

Haddaba su'aashu waxay tahay sidee ayuu hawlahaas meel marka ah ku fulinayey haddii uusan tolkiisa gacan ka haysan waayo taasi waa sida uu ku dhisan yahay dhaqanka Soomaaliduye (haddii la raaco sheegashada qabiil)? maxayse Mareexaan u mucaaradeen kolkii hore iyo kolkii dambaba weliba iyaga oo markaa ahaa madaxdii iyo awooddii ugu saraysay ee ay lahaayeen qabaa'ilkii Soomaalidu oo aan cidna uga cabsanayn?



Tan kale Soomaalidu waxay ahaayeen quwad sare oo sanka haysatay geeska Afrika oo idil, waxayna ahaayeen halyeeyo looga dambeeyo dagaalka oo halkay cagta mariyaan diirta, waxaana ugu sii halyeysanaa qabiilada Harti ee Mareexaanka la mataansan, tusaalena waxaa arintaas ugu filan sidii ay u dagaallameen barqa weerarkii goobtii la magac baxday Shimbir Kooreey ee caanka ahayd laguna jabiyey Xabashida, 1537 kii.

Sidaa darteed miyey suurta gal tahay in inanka ka dhashay qabiilkaas tol la'aan lagu ciilo oo uu ehel bido Cafar, Ciise, Gaala, Masaari, Yeman, iyo dadyow kale, isla markaasna ay weeraro dhex maraan isaga iyo tolkiisii? eeg; bogga; 179. ee isla buuggaas.

Waxaana sheekadaas laga fahmayaa in ay qabiillada Soomaalidu berigaas ahaayeen koox yar oo midaysan, kana bar bar ahayd Ciisaha, Cafarta, iyo gaallaha oo ay iskula jireen jihaadka, iyaga oo marka la jabo isku eedayn jiray; Cafar baa noo lahayd in aanu jabno, Soomaali (Salaadinadii Islaamka) baa inoo lahayd in aan jabno, iwm. eeg; bogga; 177, ee isla buuggaas.

Su'aalahaas iyo kuwa kale oo badanba waxay diidan yihiin meel marinta sheegashada ay Daroodku sheegtaan

halyeyadaas, taas oo loo arko in ay taariikhdooda uun ku meelmarsanayaan si ay u helaan raad la cuskan karo.

Qoraagan taariikheed oo wax xoogaa dhex gal ah ku sameeyey taariikhda boqorradaas reer Bunuu Haashim ee horay u xukumi jiray Sanca ka dibna u soo qaxay Harar, Awfaat ama Jabarti, iyaga oo ka sii watay saldanadoodii halkaa oo ay isku xukumi jireen markii hore; Djabuti, Koonfurta eratareya, Deexaooyinka Danaakileed, Webi Hawaash, iyo ilaa carra Soomaaliyeed ee Harar iyo Ogaadeeniya leh, eeg bogga; 17 ee kitaabka Rajab.

Ka dibna uu xukunkoodii ku xasilay inta ka dhex leh; Shawaa, Zeylac, Berbara, Ogaadeeniya, Webi Jubba iyo Webi Shabeelle, iyaga oo hogaanka u qabtay ilaa lix qabiil oo kale oo muslimiin ahaa kuna noolaa agagaaradaas, oo kala ahaa; Dawaarow, Araabiini, Hadiya, Sharkhaa, Baali iyo Daara, kuwaas oo ugu dambaystii ku midoobay magaca; (Dharaazkii Islaamka, ama Salaadinnadii Islaamka). eeg; bogga; 60, ee kitaabka Rajab.

Wuxuuna hadalkiisaas si qayaxan ugu sii faahfaahiyey bogga; 61 aad oo uu ku qoray sidatan; (Waxay inoo sheegayaan ilaha warbixineed ee Carbeed in ay Qola Qureysheed oo reer Bani Cabdi daar ama reer Bani Haashim ihi wafdi ahaan u aadeen Xijaaz, ayna degeen carra Jabarti, Halkaas oo ay aad ugu farcameen, oo ku bateen ayna ku kala yeesheen midabyo kala duwan, kooxdoodna ay ku caan baxday hub iyo kheyr fal, waxayna qoladaasi halkaas ku yeesheen martabad sare, tiiyoo ay dadkii deegaanku hormuud ka dhigteen, ilaa uu ka soo if baxay Bawaali Alsamac, magacaas oo uu u dhalan gadoomay Walshamac, ninkaas oo ay afartiisii wiil isaga sii kala dambeeyeen xukunkii, sida uu sii sheegayo; Al Maqraziyi, ka dibna jifadiisii. eeg; bogga; 62.

Haddaba boqortooyadaas oo la qirayo in ay ku bilaabatay kuna shaqaynaysay hab diin faafis, waxay ka dhigayaan taariikhyahannadu kuwii ugu dambeeyey boqortooyadaas Imaam Axmed Ibraahim - Gureey, oo jiray intii u dhexaysay 1501 - 1542 kii M, kaas oo ay tirsadaan daaroodku, siiba Mareexaanku, uuna socday maamulkiisa iyo jihaadkiisu intii u dhexaysay 1527 - 1542 kii M, kaas oo ku ku bilaabay halgankiisa 26 jir. eeg bogga; 26 aad buugga; Galaal, iyo 250, qoraalka; Rajab.

Inkastoo uu kaga dambeeyey walaalkiis ama ina adeerkiis oo la oran jiray; Suldaan Nuur, kaas oo ahaa ninkii ku guulaystay in uu Seeftiisa kaga soo gooyo qoorta boqorkii ama Imbaraa doorkii Xabashida, ka dib markii ay taas xujjo uga dhigtay xaaskii uu ka geeriyooday Axmed Gurey oo uu

rabay in uu dumaalo. eeg bogga; 21, ee ( The Horn of Africa).

Waxaa kale oo ka mid ah caddaymaha ay xujjo ahaanta u haystaan sheegtayaalkaas iyo u qirayaashaasiba in marka la tixraaco inta yar ee ay lahjad ahaan ku kala duwan yihiin iyaga iyo kuwa loo yaqaan Hawiye la helayo in lahjadooduna ay salka ku hayso isku dhaf ka ahaaday af Carbeed iyo af Kushitik, tan Hawiyuhuna ay u muuqato asalkii af Soomaaliga oo ka soo dhambalmay luuqadda Afrika ee Kushitiga, waxayna tusaale dheeraad ah ugu soo qabsadaan sida ay magacyada Hawiyuhu ugu qul qulaan magacyo ku baxsan Af Soomaali, sida;

Fiidow, Maalin, Carraale iwm. halka ay magacyada Daaroodku ugu aroorayaan magac Islaam ama Carbeed, iyo sida ay gaar ahaan Sabta (Raxanweyn) ugu adag tahay ku dhawaaqidda xarfaha u gaarka ah Carabta sida; X,C iyo kuwa kale.

Si kastaba arintu ha ahaatee muran weyn baa ka taagan ama laga furi karaa sugitaanka abtirsiimaha Daarood, oo marka la tixraaco sheegashadooda la soo qaban karo shakiyo iyo hakadyo dhaw oo ili qabatay ah aanana lahayn gar loo sii dhaqaajiyo iyo sannad lagu sii xiro toona, waxaase laga yaabaa in ay wax ka jiraan lafaha hoose ee lagu kala duwan yahay, taas oo ah sida uu suurta galka ugu dhaw yahay abtirsiga Soomaaliyeed oo kali ah.

Haddii aan wax ka sheegno sida ay u abtirsadaan daaroodku waxay tahay sidatan; Cabdiraxmaan (Daarood) Bin Ismaaciil Bin Ibraahim Bin Cabdiraxmaan Bin Maxmed Bin Cabdi samad Bin Xambal Bin Mahdi Bin Axmed Bin Cabdalle Bin Maxmed Caaqil Bin mudallib oo ahaa xaakimkii boqortooyadii Zaylac, ka horna Harar, ka sii horna Sanca. (eeg kitaabka Al-ansaab).

Haddii loo sii fiirsado sida ay taariikhyahannadu u qoreen taariikhda iyo abtirsiga guud ahaanba qabiillada Soomaaliyeed, gaar ahaanna kan Daaroodka waxa ay waafaqsan tahay isla sida ay dadku sheegtaan ama ay isla dhex maraan, run iyo been tii ay ahaataba. Hase ahaatee waxay haddana war bixintoodu u wada muuqanaysaa mid ay ka soo xigteen qof qof isla qabiillada ay wax ka qorayaan ah,

Taasoo caddaan karta marka la isu eego waxa laga qoray iyo waxa ay sheegtaan, amase ugu yaraan waxay tahay in ay raad raacayaasha taariikhdu iska daba galeen sheekooyinka ku dhex meeraysta bulshada Soomaaliyeed, maadaama aysan heli karin ila kale oo war bixineed. Inkastoo ay jiraan taariikhyanno lagu qabo kalsooni aad u saraysa haddana

waxaa dhici karta ama iska cadba in wax uun la is daba mariyey.

Tusaale aan u soo qaaadanno; sida ay qoreen Carab Faqiih, oo ahaa mujaahid dhacdooyinkiisa u goob joog ahaa, iyo Rajab, waxaan arkaynaa in ay wax ka jiraan asalka taariikhda, laakiin aan cidina caddayn karin si kalsooni leh oo loogu dabakho waxa jira maanta, oo bal eeg marka uu ka sheekaynayo magaalada Jabarti ee ay Daaroodku ku abtirsanayaan waxa ay sheekadu waafaqaysaa isla tabta ay dadku sheegtaan, hase ahaatee waxaa burinaya silsiladdaas taariikheed kuwii kale ee ka dambeeyey.

Waxaaba tusaale cad inoo noqon kara taariikhda iyo abtirsiga taariikhyahankii iyo qoraagii ugu weynaa ee soo maray Bariga dhexe iyo Afrika, lana oran jiray; Cabdiraxmaan Al-Jabartiyi, oo ah nin reer Jabarti ah, kuna dhashay magaalada Zaylac, ugu dambaystiina ay isagii iyo reerkiisiiba u guureen Masar, tusaale sida uu ka qoray; Dactor; Xuseen Caasi, oo ah Ustaath ka dhiga Jaamacadda Lubnaan, ahna reer Lubnaan, oo ka qoray kitaab dhan taariikhda Cabdiraxmaan Jabarti oo keli ah, wuxuuna yiri;

(C/raxmaan Jabarti oo ka yimid asal ahaan magaalada Jabarti ama Zaylac ee geeska Afrika, wuxuu ka dhashay qola muslimiin ah, oo haysta mad-habka xanafiyada iyo Shaaficiyada, kuwaas oo u nasab sheegta Sayidinaa Aslam Bin Cuqeyl, Bin Abi Daalib, waxay yihiin qoon ku caan ah hub, gaashaan, hu', hooy, qalab adeeg, nadaafad, qalbi jileec, qalbi furnaan, qalbi saafinimo, xishood, dhawrsanaan, iyo midab barxan oo ka gedisan dadka kale ee ay la nool yihiin.

C/raxmaan Jabarti waxaa dhashay mid ka mid ah addoomadii Aabihiis, hase ahaatee ma garan karno wax ku saabsan xaalkeeda iyo sidii ay ku soo gashay, mana garan karno in ay cadayd iyo in ay madoobayd toona, mana garan karno qoladii iyo dalkii ay u dhalatay toona, waxaanse u malayn karnaa in ay ka soo gashay dadkii deegaanka ee ahaa Xabashida) eeg bogga; 32&43 ee kitaabka;

عبد الحمن الجبرتي

iyo weliba kan aan horayna u soo xusnay ee ah:

العلا قا ت السياسية بين مسلمي الزيلع والنصاري الحبشة في العصور الوسطي.

د: رجب عبد الحليم. دار النهضة العربية: القاهرة. 1985 م

Haddaba su'aalaha badan ee halkaan ka soo bixi kara ayaa waxaa ka amid ah; ninkani ma C/raxmaanka ay Daaroodku ku abtirsanayeen baa mise waa mid ka mid ah kuwii ka soo farcamay Jabartiga? haddiise Jabarti ay tahay magaalo magaceed oo ay ahayd magaalo soo dhawaysa wufuudii Carbeed ee nooc kaste leh (Awfaat),

Sidee ayey u noqotay hadana nin dad dhalay oo lagu abtirsado? mise suurta galbaa in ay isku aabbe noqdaan kumanaankii ruuxe halkaa ka soo kala galay afarta qiblo? hadaanse muran kale ka nabad galno miyey suurtoobi kartaa in farcankii hal oday uu ku gaaro malaayiin muddo aan ka badnayn qiyaastii toban qarni?

Haddiise ay Isaaqa iyo Daaroodkuba sheeganaayaan Carab, lana caddaynayo in berigii hore ay dhulka Isxaaq ee maanta ay degenaayeen cido Carbeed ee la oran jiray reer Jabarti miyeynan suurta gal ahayn in qaar ka mid ah isxaaqa iyo qaar ka mid ah Daaroodku ay asal Carbeed yihiin, ayse kala anbadeen oo is illaaween?, oo marka loo fiirsado taariikhdu inta badan way isku tirisaa mana kala qaaddo, tusaale;

Harold D. Nelson oo tira koobaya qabiillada Soomaalida wuxuu sheegay in ay u kala baxaan afar nooc oo kala ah; Sab, Samaale, iyo Qureysh oo uu ka wado Isxaaq iyo Daarood. eeg, bogga; 6-9, ee (Somali a country of study). isaga oo qoraagani hadalkiisa sii wata ayuu isku mid ka dhigay Sab iyo Samaale, oo uu sheegayo in ay isku fir yihiin kana duwan yihiin kooxda kale ee iyagu isku firka ah inkastoo ay kala yar duwan yihiin . eeg, bogga; 76-80 ee isla buuggaas.

Haddiise ay Daaroodku yihiin qolada caynaan loo sifaynayo goorma ayey isu rogeen reer baadiyaha iyo adhileyda? ma nin reer magaal noqday baa hadana reer baadiye isu roga? midda kale waxaa hadalka qoraagan laga dhadhamin karaa in ay lunsan tahay taariikhda reer Jabarti oo aan la hubin sugnaanteeda.

Inkastoo ay taariikhyahanno badani ku adkaysanayaan in ay Daaroodku intii muddo ahba ka soocnaayeen afrikaanka intiisa kale hadana waxaa muuqata in markaa ay ka soocnaayeen qudheeda ay ahaayeen dad uu midabkoodu barxan yahay oo u dhexeeya madaw iyo caddaan, taasina ma sugi karto ka duwanaansho dhab ah oo ay ka duwan yihiin bulshooyinka kale ee la deriska ah.

Sidoo kale waxay taasi wiiqaysaa jinsi miiqnaanta ay sheegtaan, wuxuu leeyahay Rajab (Reer Zaylac ama reer Jabarti waxay ka dhasheen jinsi Carab iyo jinsi Xaami oo isla fal galay, wayna kaga duuwan yihiin dadka kale ee la degan, ha ahaadeen Itoobiya ama Kenya ee xagga; Diinka, luuqada, caadada, dhaqanka iyo hiddaha, waxayna midnimadooda Islaamku gaarsiisay heer ay ka midoobaan asalka iyo taariikhda, ayna rumaystaan in ay isku wada aabbe yihiin. Saldanadooda ugu muhiimsanina waa tan reer Jabarti

(awfaat), Jabartiyiintuna waxay ku hadlaan Af Carabi iyo Af Maqdashi isku walaaqan) eeg bogga; 78 ee kitaabka Rajab.

Si kastaba arintu ha ahaatee waxaa lagama maarmaan ah in aan wax kaga soo guurino qoraalkeenan waxa ay ka leeyihiin kuwii horay wax uga qoray Soomaaliya guud ahaan iyo gaar ahaan Daarood, maadaama uu Daaroodku yahay qabiilka ugu badan xagga taariikh ka qoridaa guud ahaanba qabiillada geeska Afrika, marka laga reebo qabiilka Amxaarada oo isagu guun ah. waxaana ka mid ah waxay yiraaheen;

Lewis, 1955, wuxuu leeyahay;

(Todoba qabiil bay ka kooban tahay Soomaalidu guud ahaan oo kala ah; Dir, Pre-Hawiye (horgal Hawiye), Hawiye, Daarood iyo Isaaq iyo Digil iyo Raxan-weyn oo iyagu Sab ah. Maanta waxaa jira in yar oo ka mid ah qabiilada Dirta, ee ma ahan laandheere.

Inkastoo ay gabdhohoodii u guuriyeen isdhexgal sarena la yeesheen muhaajiriintii (qaxootigii) Carbeed ee qoysaska Isaaq weyne iyo Daarood, qabiilladan Isaaq iyo Daarood waxay soo gaareen xeebta geeska Afrika waqti aan ilaa hadda taariikh ahaan lagu caddaynin laakiin marka la tixraaco dhaqan iyo caado ahaan lagu qiyaasi karo intii u dhexaysay Hijradii iyo qarnigii shan iyo tobnaad”.

Wuxuu kale oo qoraagan taariikhda Soomaaliyeed hadalkiisa sii raacshay ( Isaaq iyo Daarood wuxuu firkoodu si cad uga soo jeedaa fir Carab, laakiin Hawiyaha iyo Sabtu marna ma galaan Carab)., wuxuu kale oo bogga 587 ku sii adkeeyey in muhaajiriintii Daarood iyo Isaaq ay ka guursadeen Dir iyo Hawiye oo ay is dhex galeen. eeg; Lewis, 1955, PP, 15- 9, 23-4.

H.S. Lewis oo isaguna ka hadalaya sugnaanta abtirsiimaha Soomaaliyeed wuxuu yiri; (laakiin dadka sheegta in ay ka soo farcameen Nebiga adeerkiis iyagu kama imaan Itoobiya) H.S.Lewis.

Haddii aan u guda galno qoraayaalka Carbeed oo iyagu ayidsan sheegashada ay Daaroodka iyo Isaaquba sheeganayaan Carab u dhalashada ayaa waxaa ka mid ah ragga wax ka qoray;

Dr. Maxmed Muxumed Aamiin, wuxuu ku yiri kitaabkiisa;

محنة الصو ما ل

(Waxaa tagey halkaa (Soomaaliya) sannadkii 346 ama qarnigii sadexaad ee waafaqsan 957, qarnigii sagaalaad, kun iyo laba boqol oo nin oo uu hogaaminayey Xasan Bin Cali iyaga oo wata todoba Doomood, waxaa iyana gaaray xeebta (Somaliya) raxan firkoodu yahay Cuqeyl Bin abii Daalib, waxayna degeen magaalada (Jaberti) iyo (Zeylac) waxayna

ku negaayeen ilaa qarnigii sideedaad ee Hijrada oo waafaqsan qarnigii saddex iyo tobnaad ee Miilaadiga, waxaana loo aqoon jiray magaca Dharaazkii Islaamka, qarnigii sagaalaadna waxaa ku biiray raxan kale oo ka timid Xatarmuut (yeman), eeg; boga; 208 ee kitaabkiisa.

Intaas keliya ma ehee wuxuu Dr; Maxmed sheegayaa in ay jirtay hijarada Carabta ee xagga Soomaaliya tan iyo waqtigii khaliifadii Umawi; Cabdil- malik Bin Murwaan ee 65 - 86 H oo waafaqsan 705 - 785,M. wuxuuna u diray halkaas Muhaajiriin Suuriyiin ah sanadkii 77,H= 696. eeg boga; 205 - 207., waxaa kale oo iyana jiray; Hijradii todobadii walaalaha ahayd ee Carabtii reer Xaariz iyo Faarisiyiintii reer Shiiraaz ee la diray qarnigii Afraad ee Hijrada, waafaqsanna qarnigii tobnaad ee Miladiga.

Taariikhyahanku wuxuu gaar ahaan uga waramay Jabartiyiintii iyo dawladoodii ay ka asaasteen carra Itoobiya iyo Eretareya ka dib markay soo gaareen geeska Afrika, wuxuuna yiri;

“Markii ugu horaysay waxaa asaasay dawladii Jaberti (Awfaat) oo ka asaasay Bariga Shawaa ilaa iyo koonfurta Addis-ababa, ilaa waadiga Hawaash iyo ilaa Cadan, nin (jaberti) asal ahaan ka soo jeeda Qureysh oo ka sii ahaa ilma Banii Haashim ama ilma Banii Cabdi -daar, oo waxuuna gaar ahaan uga soo farcamay wiilkii ina Cuqeyl Ibnu Abii Daalib ahaa ee reer Xijaaz ahaa, waxayna (reer Jaberti) ku caan bexeen Hub iyo kheyr,

Waxaana markii dambe dhaxlay Imaaradii (xukunkii) afartiisii wiil oo mid mid isaga kala dambeeyey, koodii ugu horeeyey ee ka baxa adeecidda boqorkii Xabashidana wuxuu ahaa Cali inankii uu awoowga u ahaa Cumar walshamac, laakiin kii ugu horeeyey ee dagaal bareer ah kaga soo horjeestay boqorka wuxuu ahaa Xaqu-diin oo si hufan uga guulaystay kana qafaashay dad badan oo ka mid ah askartiisii, gacantana uga dhigay maal fara badan, sanadkii 1372 kii M. eeg boga;219. ee Risaalada.

Waxa kale oo uu sheegayaa in ay Soomaalidu ka qayb qaadatay faafinta diinta tan iyo bilowgii, oo ay ka mid ahaayeen Asxaabtii iyaga oo wata magaca Barbara oo lagu naynaaso guud ahaanba wixii ka soo rogan Cadan iyo nawaaxigeeda ilaa Harar,

Wuxuu qoraagu ku gaban gabaynayaa in qabaa'il Carbeed oo badani ay dhex galeen oo ku dhex qasmeen qabaa'il Bantuu ahaa ee halkaa deganaa ka dibna ay natiijadoodii noqotay dadka noocan ah (Soomaalida) ee uu midabkooda iyo qaab dhismeedka jirkoodu barxan yahay. eeg; bogga; 210.

Waxayna taariikhyahanada qaarkood sheegayaan in ay si dhamaystiran u kala daateen boqrtooyooyinkaasi iyaga oo ku kala milmay umado kale, sidaa ayeyna ku carrab adag yihiin Daaroodka intooda badani, ayna sii caddaynayaan taariikh daba galayaal badani sida; David D. Laitin iyo Saciid S. Samatar oo leh ( Hartida ku nool Kenya NFD iyo kuwa ku nool Soomaaliya waxaa u dhexeeya xiriir aad iyo aad u taag daran) eeg bogga; 135 ee (Somali Nation in search of a state), London.

Siday aniga ila tahayna waa in wax Daarood la yiraaho oo ah nin laga soo farcamay uusan jirin aslanba, sidoo kale ay ku tiri kuteen aan waxba ka jirin tahay fikradda Daarood Carbaynta iyo isla dhalashada Daarood intaba, arinkuna yahay sidatan soo socota;

Magaca Daarood wuxuu asalkiisu ka yimid (Daar ood), oo wuxuu ku baxay dadyowgii nooc walba lahaa ee waayadaas bilaabay magaala degga iyo guri dhisadka iyaga oo ka dhisan jiray meelo badan oo ilaa hadda raadkoodii laga helayo daaro laga sameeyey dhagax sida kuwa maanta jira, waxaana ka mid ah magaalooyinkaas kuwa dhawaan laga soo qoday ciidda hoosteeda ee ku teedsan xeebta Bari, inta ka dhex leh Bosaaso ilaa Berbara.

Hadaba waxaa berya hore isku kacay dadkaas reer magaalka ahaa iyo dadyowgii kale ee iyaguna isugu jiray nooc walba ee u badnaa xoola dhaqatada iyo beeraleyda, waxayna dantu ka fursan weyday in qolaba goonideeda isaga xigsato cadawga iyo colaadda qolada kale.

Taasina markay muddo socotay ayey isu beddeshay wada dhaladnimo iyo is walaalaysi tiiyoo loo dejiyey abtirssiinyo la isla soo wada gelayo. ugu dambaystiina waxy dagaalladaasi ku dhamaadeen in dadkii daara oodka ahaa ee reer magaalka ahaa laga adkaado, isla markaasna laga sal kiciyo guryohoodii.

taasina waxa ay ku kalliftay in ay iyagiina reer baadiye xoola dhaqato ah isu baddelaan. Haddaba si aan arintaas xaqiiqadeeda u gaarno waa inaan hal hal u kala falanqaynaa iskaashatada Daaroodka, waxaanan ugu horaysiinaynaa Ogaadeen:

# OGAADEEN

1- Ogaadeen, waa qolada ugu badan guud ahaanba qolooyinka Soomaalida, waxaa lagu sheegaa tirada ku nool labada gobol ee xorta ah, 350,000 marka lagu daro Mareexaanka oo la raacsiiyo badanaaba, laakiin marka la raacsiiyo Geriga oo ah;300,000, ayey isku noqdaan 650,000, waxayse gaarayaan Malyan haddii lagu daro kuwa ku nool labada gobol ee ku hoos jira xukunka Itoobiya iyo Kenya. eeg; I.M.Lewis, (Peoples of the Horn of Africa), London, 155, bogga; 26-27.

Waxaa ka mid ah waxyaalaha lagu sheegay in uu ka soo jeedo asal ahaan magacani; in uu ka yimid erayga ah; (Ogaada), kaas oo ku baxay markii sida is daba joogga ah u socdeen dagaalladii diineed ee dhex marayey Saldanadihii Islaamka (Soomaaliya) iyo boqortooyadii Xabashida ayey Saldanadihii Islaamku iska soo aruuriyeen dadkii ugu xoogga weynaa uguna lixaadka dheeraa ayna dejiyeen xadkii Xabashida, si ay uga difaacaan,

Waxaana lagula dardaarmay naga Ogaada oo la mid ah waxaad tihiin ciidan Ilaalo ah. laakiin mudada dheer ee ay ku daa'imeen goobtaas iyo dadkay ka soo tageen oo aan degenaan rasmi ah lahayn awgeed ayey iska illobeen cid kale oo iyagii is walaalaysteen, isku cidna noqdeen, oo magiciina isu sii rogay Ogaadeen si tartiib tartiib ah.

Waxaa kale oo la yiri in uu ka yimid; (Ooga dageen), taas oo loola jeeday dadka ka deganaa waddanka oogada sare ee ah koonayaasha ama xuduudaha, wuxuuna baxay markii la soo aqoonsanayey xuduud soomaaliyeed oo ku beegan qiyaastii waayadii Axmed Gurey, waxaana la oran jiray waxaasi waa fogaadeen oo waxay gaareen Oogada, waxaana loola jeeday inta ugu dambaysa ee laga helayo qof suurad soomaaliyeed leh, waana gaar ahaan xuduudaha Itoobiya iyo Kenya.

Ka dibna waxay reer walba oo halkaa degenaa is arkeen iyada oo la leeyahay waa ooga dageen, magacaasina waa raacay oo kagama harin meel kaste oo ay tagaanba (magac iyo musiibaba maalin bay ku raacaan), waxaana aragtidaas ayidaya magaca dhulka ay dadkaasi ilaa hadda degaan oo la yiraahdo Oogada, dhulkaas oo ah buuraleyda Itoobiya ilaa iyo inta hoos looga soo gaaro carro Mudug, ilaa bariga Nugaaleed, ilaa iyo Hawd (Ogo plateau). eeg, bogga; 8, ee

(Somalia a cauntry of study. by; Harold D. Nelson. F. Areas ST. USA. University.

Qolooyinkii Oogada ka soo guuray ee ku soo noqday gudaha Soomaaliyeed qudhoodu weli way wataan magicii oo ugu lammaansan magacyadii kale ee ay qaateen, tusaale Ogaadeen wuxuu ku jiraa qabiil kaste oo soomaaliyeed, oo waxaad arkaysaa in la yiraaho; sacad waa Ogaadeen, murursade qayb baa Ogaadeen ah, xawaadle waa ogaadeen(inkastoo la leeyahay hadana waa Leelkase), Raxanweyn intooda badan waa Ogaadeen, Hawiye Dir iyo Daaroodba waxaa ku hoos nool qabiilo Ogaadeen ahaan jirtay berigii hore, xataa qabiillada aan saa u sii badnayn sida; Murursadaha. Wuxuu ku gabyey Ina C/lle Xasan (Sacad waa Ogaadeen haddii loo abtirinayee ama Abtirsiiyo awgeedna Sacad waa ina Ogaadeene). eeg; Diiwaankiisa gabayada.

Hadaba waxay tahay is weydiintu hadduu jiray nin la yiraaho Daarood oo laga soo farcamay, Ogaadeenna uu ka mid ahaa Caruurtiisii maxaa kaga duway inta kale dhan walba hadday tahay dhaqan, dhirir, tiro iyo tayaba?, maxaana isu ekaysiiyey Ogaadeen iyo inta la degta ee ka baxsan sida Shiikhaal, Degoodi iyo Harariyiintaba?.

Aan weli sii hubinno hab dhismeedka lafaha hoose ee Ogaadeen ee waxaan tusaale u soo qaadan karnaa; Cawlyahan, magacan Cawlyahan waxa uu ahaa magac loo isticmaali jiray dadka dagaalyahnka ah ee had iyo jeer u taagan colka, wuxuuse ugu dambaystii ku xasilay magacu ciddaan, kadib markii ay dileen nin gumayste ahaa oo la oran jiray Liboyo, ayna arintoodii gaartay meelo badan maadaama ay noqdeen dadkii ugu horeeyey ee dila nin Ingiriis ah ee u yimid in uu dalka qabsado, halkii ay ku dileenna waxay ilaa maanta wadataa magacii gumaystihii Libooy.

Dagaalladaasi awgeed dadkii deegaankaas oo loo kala faniinshay dhulka Baarrey, ilaa Kismayo iyo aga gaarada Afmadow waxaa lagu soo dhaweynayey meel kastoo ay tagaanba waa qof iyo waa reer colyahan ah oo carar ah, wax yar ka dib magicii wuxuu isu rogay Cawlyahan oo lagu sheego cido gooni ah, waxayna kaga mid noqdeen Ogaadeenka maadaama ay horayba u ahaayeen ooga dageenno.

Sidoo kale waxan tusaalaysan karnaa Bartire, magacan Bartire wuxuu ku baxay ol-olihii lagu riday xukunkii wiil-waal, oo dadkii la dagaallamayey ayaa halku dhegoodu ahaa (bartira), ugu dambaystiina haraadigii ciidankii wiil waal iyo dhashoodii dambaba waxaa lagu magacaabay Bartire oo la mid ah Haraadiga maanta loo isticmaalayey xukunkii Maxmed siyaad oo kale.

# MARREEXAAN

2- Mareexaan, magaca Marreexaan wuxuu ka yimid asal ahaan (Maru-reexaan) oo Af Carabi ah macneheeduna uusan waxba ka duwanayn kan Af soomaaliga ee yahay (Marinkii Reexaanta). Magacani wuxuu baxay waagii ay nimanka ka soo safra Carabta Khaliijka ay ka guran jireen gayigeenna Reexaanta iyo Macdanta kale ee qaaliga ah ee aannaan weli fahamsanayn ayey u sii mari jireen marinka xabagta iyo reexaanta deegaanada ay degi jireen waagaas dadka hadda loo baxshay Marreexaanku.

Markaa ayey u dirsan jireen iyaga si ay ugu soo guraan. Waayyo ka dibna waxay Carabtii isugu soo tilmaantaa dhulkii iyo dadkii degenaaba Marin reexaan, oo markay qolo kale oo Soomaaliyeed soo maraan ku oran jireen waxaan u soconaa Marin reexaan.

Waxay arintu sidaa isaga socotana waxaa bilaabatay in ay deeganadii isu wareegtaan oo isa soo dhex galaan markaa ayey dad kale u soo kicitimeen dhulkii iyagoo leh; waxaan u soconaa marru-reexaan, ka dibna waxay noqotay in ay qudhoodiiba isku garabsadaan magacaas. Waxayna iska dhaadhiciyeen in ay isku wada aabbe yihiin.

Waxaa kale oo dad badani ay qabaan in magacani uu ku baxay dagaallo faraha looga gubtay oo dhawr jeer dhex maray dadyow deegaan gooni ah isla degenaa iyo dadyow kale oo doonaya in ay ka sal kacsadaan deegaankaas, dagaaladaas oo ugu dambaystii lagaga guulaysan waayey qolooyinkaas, ka dibna la isla dhex maray erayga ah; " ma riixmaan" oo loola jeedo waa kuwa aan laga riixi karin deegaankooda.

Waayo dabadeedna dadkii iyaga ahaa ee la riixi waayey waxa ay garteen in ay isku cadaw yihiin, waxayna ku heshiiyeen in ay walaaloobaan oo si isku duubni ah isku difaacaan. Waxyaalo badan oo aragtidaan taageero buuxda siinayana waxaa ka mid ah in;

Dadka Marreexaanku ay maantaba yihiin kuwa aan dhiigooda la tusin oo haddii midkood la waxyeelleeyo aan laga nabad gelayn kuwii kale. Inkasttose ay guud ahaanba qabiillada Soomaalidu wada caynkaa yihiin hadana iyagu waa ugu sii daran yihiin, oo iskuma taageeraan waxa aan isu hiillin ahayn. Ka soo horjeedka taas waxay qabbilada kale isku taageeraan dhinacyada kale sida; dhaqaalaha, sharafta, derajada iwm.

Haddaba haddii arintaa loo sii dhabo galo, waxay ku tusin kartaa in ay dadyowgaasi weli iskula jiraan heshiis guunka ahaa ee hore, kaas oo ahaa in isugu hiilliyaan wixii colaad ah oo keli ah.

Dhan kale hadaan ka eegno doodaha, waxan meelo kale ee buugan ah ku soo xusnay in kutubtii ugu horaysay ee taariikhda Soomaliya qortay ay xuseen in qabiilka Marreexaan iyo sadex jifo oo maanta lagu tirin karo laangaab ay ahaayeen kuwa keliya ee jiray Qarnigii 14 aad. Haddaba su'aashu waxay tahay hadduu berigaa Marrexaan jiray uusan aDaarood jirin sidee ayuu maanta Marreexaan ku soo hos galay magac isaga ka sii da' yar. Sidaa awgeed ma Marreexaan baa Daarood ah mise Daarood baa Marreexaan ah?

Isu keenka Marreexaan waxaa la sheegaa in jifada faca weyn ee la yiraahdo Ciis ay ka mid yihiin haraadigii qabiilkii la oran jiray Ciis ee la dhashay Isra'iil oo la ahaa in Isxaaq oo sii ah ina Ibraahim. Kaas oo faraciisu yahay; Ibraahim oo dhalay Isxaaq iyo Ismaaciil, Isxaaqna uu dhalay Ciis iyo Isra'iil.

Arintaasna xaqiiqadeeda waxaa xoojinaya marka loo fiirsado qaabka ay Soomaalidu u dhisto haykalka qabiilada oo waafaqsan qaabka ay Baybalka iyo kutubtii hore uxusaan sheekooyinka qabiiladii Yuhuuda "reer Banu Isra'iil" ee waagaa jiray.

Waxaa kale oo iyana taageeraysa fikradda; Sheekada caanka ah ee la sheego in Marrexaanka uu ku habaaray odaygii Daarood (Afar dhoomood dhexdood Alle ku geli markaad nafta u yaabtana Allaha kuu yasiro), taas oo u daliil noqon karta in dadkani ay lahaan jireen cadawyo fara badan oo isu soo bahaysta, waa walbana soo hareereeya, laakiin ay goor walba iyagu si diorqi ah uga badbaadi jireen.

Waxaa wax lala yaabo oo uusan madaxu aqbali karin ah in maalin walba ay soo baxaan magacyo qabiil oo hor leh aadna arkayso kuwii oo markiiba tixraac abuur ah loo samaynayo.

Tani waa dood ciddaan ku saabsan oo dhex martay aniga iyo aabahay, waxayna ugu dhacday si lama filaan ah sidatan;

Aabahay; Hebel waa asharaaf oo wuxuu naga mudan yahay in aan dhawrno, wax Alle wuxuu rabana waa nagu waajib in aan raadino.

aniga; oo Aabe waa maxay Asharaafta aad sheegaysid? ma suurta galbaa in ay dad Nebi Maxmed ku abtirsadaa joogaan afrika?

Aabe; (isagoo xanaaq iyo naxdin la soo boodaya) war ma waalan tahay, hadal xumidaa, ma ummaddii Rasuulkaa kaa baxsan weyday?

Aniga; Aabe anigu marna ma rumaysan karo Afrikaan baa ka yimid faracii rasuulka?

Aabe; war sidee u hadlaysaa, Anagaaba (Daarood) wax yar ka tirsana Qureyshe.

Aniga; oo maxaa isu kaaya keenay annaga iyo Qureysh, Carab iyo Cajambaaban kala nahaye?

aabe; Maandhow hadaadan wax aqoon dadkaa la warsadaaye; Daarood waa dhal carbeed, wuxuuna leeyahay taariikh qoran oo waxaa la ogyahay goortuu yimid iyo halkuu ka soo farcamay, waxaana buuxa walaaleheen aan isku abtiris nahay qaarkoodna aanba isu egnahay weli, tusaale; Meheri Ismaaciil oo degan Yeman.

Aniga; Horta haddii adinka iyo Mehri Ismaaciil aad isla dhalateen weli waxaad isla tihiin Afrikaan madaw oo ma jiro midab aad hadaba ku kala duwan tihiin, sow ma arag Mehriga ku nool Yeman iyo Daaroodka kale ee la deriska ah sida ay isugu egyihiin?.

Qosol baciidsi ah kadib; oo sow wax lala yaabo ma ahan Daarood wuxuu ku abtirsaday Qureysh iyo Nebi Maxamed, Shiikhaalna ku abtirsatay Abuu-bakar sadiiq, Hawiyana Cumar bin khidhaab, Isaaqna cusmaan bin cafaan, asharaafna Nebigii iyo Cali bin abi dhaalib, Soomaali oo dhan ma waxaa dhalay afartii Khulafa'u raashidiin, sow ma ogidin in soomaali jirtay ka hor soo bixitaankii nebi Maxmed oo ay ahaayeen Qaaruun dhan oo la yaqaan, weliba iyagu wax ka xukumi jiray carriga Carabta, maadaama ay ka mid ahaayeen boqortooyadii Xabashida, oo ay ka mid ahaayeen Asxaabtii Nebiga?

Oo miyeynan taasi idiin cadaynayn marka aad leedihiin soomaalidu waxay heshay Islaamka ka hor intuusan gaarin Madiina? allaylehe waxaan shaki ku jirin in aad iska dhaadhiciseen qisooyin been ah oo aad isku qalbi qaboojisaan, bal been abuurka Daarood, marka ay ku sheekaynayaan Daarood oo keligiis Carabiya ka yimid baa Doombira gooni u xod xodan jiray, Dir iyo Hawiyana la hadlay sow kama baqaan in la weydiiyo Luuqaddee ayuu ku af garan jiray dadkaas ku cusub ee uu soo dhex galay? haddiise ay berigaas ku noolaayeen carradaan oo dhan laba qoys oo la kala yiraahdo Dir, Hawiye iyo qoyskii Daarood oo soo saddexeeyey ayaa ka hor degenaa berrinkaan oo laga dhaxlay?.

Aabe; oo maxaad adigu haatan ku diiddi kartaa sheegashadeena?

Aniga; waxaan ku diidanahay in aan arkayo in aysan wax suurtoobi kara haynin ee ay marba sidii la qumanaata isku raacayaan,

Aabe; oo hadda ma waxaad diiday qabiilkii lagu sheegay quraanka?

Aniga; aabe, Qabiilka aad ku maqashay qur'aanka waxaa loola jeedaa dadka garanaya oo huba abtirsigooda.

Aabe; war naga aamus yaan lagu maqline, nin waashay baad tahaye?

Aniga; Hadduu Daarood Sheekh ahaa oo uu diinta faafin jiray maxaa loogu aqoonsan waayey Ahlu-diin sida; Sheekhaasha, Asharaafta, Xerta iwm?

Aabbe; waxaa jirtay in Daaroodku ay diin faafiska ka sokow xoogga saareen xukun doonka iyo boqortooyo ku dagaallanka, ka dibna ay diin faafiskii la wareegeen qolooyinka kale ee aad imminka sheegtay.

Aniga; Horta Daarood ma hal nin baa la oran jiray mise dadyow badan oo is bahaystay?

Aabe; waa hal nin oo laga soo farcamay.

Aniga; hadday lafaha Daarood oo dhan wada dhasheen maxay beryaahakan u soo allifeen Harti iyo Absame oon horay u jiri jirin, anaguse maxaan labada dhan mid uun u raaci weynay?

Aabe; Harti iyo Absame weligood waa jireen, anaguna midna ma nihin ee waalid baan u nahay?

Aniga; oo maxaa qabiilna u noqday hil iyo hamas (fara badan) qabiilna u noqday in yar oo laan gaab ah?

Aabe; war ma amarka Allaad la dagaalsan tahay, sow ma aragtid in laba nin oo wada dhalatay nina Alle dhal badan siiyo nina uusan waxba farcan ah ka tagin? tusaale jilibyada Mareexaan,

Aniga; su'aalbaa halkaa iigaga soo baxdaye waxaan ku weydiiyey, Mareexaanka halakan Gedo degan, waxay ahaayeen koox yar oo qarni ka hor soo gashay geyiga, maantana waxay isku xireen tan iyo Kismayo ilaa iyo Nageyle, gudaha Itoobiya, hadaba ma suurtoobi kartaa in farcanka intaa la egi ku faafo mudada intaa la eg?

Aabe; War heedhee sideedaba dadka Daarood la yiraahaa waxay weligood ku dadaalaan in uu faracoodu bato iyo in uu dheeraado maadaama ay soo dhadhamiyeen dhibaatada laan gaabnimada, waxay guursadaan cid alle iyo ciday arkaan, sidaa darteed gabdhaha guumaysooba, kuwa fool xun, iyo kuwa la yaso ama ay reerohoodii soo xumeeyeen oo dhan waxay weligeed heerrin ahaan u soo aadi jireen meeshii Daarood ugu dhaw oo ay ka guursan jireen, sidoo kale marka colaadi dhacdo waxay Daaroodku xoogga saaraan siday uga badbaadsan lahaayeen xaasaska iyo caruuraha.

Aniga; waxay ila tahay in kooxdii Mareexaan ee waagaas carrada qabsatay ay ku qasbeen dadkii dhulka degenaa in ay iyaga sheegtaan, oo dadka hadda magaca Mareexaan sheegta ay u badan yihiin ummado kale oo iska illoobay magacoodii hore, waxaanan ku caddaynayaa in laga helayo laf kaste oo Mareexaan ah qolo sheegad ah oon rasmi ahayn, tan kale waxaan lahayn maanta magacyo qabiillo badan oo horay uga jiri jiray carradan, sida; Kasaara gude iyo kuwa kale oo badan.

Aabbe; nin iska caytamayaad tahaye afkaaga edeb u yeel.

Aniga; (anoo weli muran sii diriqsanaya) marka lagu abtirsanayo magacyada qof qofka iyo marka lagu abtirsanayo magacyada qabiilka maxay u kala duwan yihiin, tusaale markii wax xoogaa la tiriyo odayaal laga soo farcamay ayaa marba meel laga soo geliyaa mid ka mid ah magaca lafaha qabiilka, haddaba maxaa mid mid ka mid ah odayaasha laga soo farcamay loo sheegaa kuwa kalena aan loo sheegin in wixii oo dhan magac magac loo tirinayo mooyee? midda kale hadday Daarood iyo Hawiye kala fir yihiin maxaa isku si ka dhigay dhan kastoo laga eegaba?

Aabe; oo sow weligood isma soo dhalayn, oo iskagama mid noqon midab iyo dhaqanba? mise ogtahay in midabku uu u ekaado marba cimilada ay dadkaasi ku noolyihiin, iyo cuntada ay isaga iyo kuwii dhalayba cuneen, oo haddaad adigu haatan ilmo ku dhashid carriga Shiinaha uu u yara ekaanayo shiine, dhawr fac ka dibna ay dhashiisu qaadanayaan midab Shiinays oo rasmi ah, bal eeg Soomaalida beryo hore ku faalashay Afrika iyo kuwa ku faalalay Carab iyo kuwa Yurub intaba waxaad helaysaa in qola walba ay u yara ekaatay qoladay dhex gashay.

Aniga; dadka ay Carab iyo Afrikaan iska dhalaan waxaa lagu yaqaan in ay yeeshaan midab kale oo ka duwan kan Soomaali oo dhami leedahay, waana sida qolada Baajuunta ah ee degan Kismayo ilaa Tanzania, anagase in aan isku aabbe iyo isku hooyo ka nimid baa nala ka garanayaa, oo waxaa iska cad in cunsurkeennu uu yahay mid asal ahaan u jira, tan kale waxaanba arkaa in Soomaalidu ay tahay Shiiqsane oo iyaga mar kaste midabkooda la baddeli ogyahay, tusaale ninka iyo naagta Soomaaliga ihiba markay qof qalaad guursadaan ilmahay dhalaan wuxuu u ekaadaa inta badan qofkii qalaad oo shaki weyn baa gala Soomaalinimadiisa, sidaa darteed midabkeenna ayaa milmi og, taasina waxay ku tusaysaa inaannu isku asal ka soo jeedno.

Mid kalese iga jaahil bixi, iminka anaga jilibkeenna (raaydeenna/lafteenna) waxaa la sheegaa in aan beri hore ku dhex darsanay Hawiye siiba H/gidir, dagaallo dhacay

awgood, haddaba sidee baa lagu xaqiijin karaa in aannu nahay Mareexaankii saxda ahaa ee beri hore haajiray iyo in aannu nahay cida cusub oo Hawiye ah?, illeen meesha wax qoraal sugan ah laguma hayee.

Aabe; dadku sidaada oo kale war moog ma wada aha oo way is aqoonsadaan, nin walbana ilmihiisa ayuu u sheegaa cidday ka dhasheen.

Aniga; oo maxuu qofku ugu dhaadtaa qolada aabihiis sida mintidnimada ah, qolada hooyadiisna uu colaadda kala soo horjeestaa? muu labadaba wada sheegto ama tan hooyo u bato, maxaa yeelay Nebiga NNKHA, ayaa waqtigii dagaalkii Uxud, Asxaabtii reer Ansaar isugu yeeray oo weydiiyey; Ma idin ku jiraa qof aan idinka ahayni? saa waxa ay ugu jawaabeen maya inan ay inanteennu dhashay mooyee, markaa ayuu yiri; Inanka inantu dhashay waa uun qoomka ee. eeg; (dagaalkii Uxud), Bukhaarina waxa uu leeyahay Baab lagu cinwaaneeyey; (*Ibnul-Ukht Minal-Qawm*).

Tusaale ahaan, adiga aabbahaaba sow nalooma sheegin in uu ilmo kale ku dhalay soone Banaadir, maantana aannaan wax war ah ka hayn isagii iyo ilmihii kale ee uu dhalay iyo waxay sii dhaleenba, miyeynan kuula ekayn in ay qola kale sheegtaan oo ay ka mid yihiin kuwa maanta noola dagaalama in aannu Mareexaan nahay awgeed? sowse lama hubo in Awoowe uu bedeshay qabiilkiisii iyo abtirkiisii markuu Banaadir oon laga aqoon soo galay?.

Aabe; xaaladdaas oo kale waa dhif iyo naadir oo lama ictibaarin karo.

Guntii iyo gebangabadiina wxaan soo ogaaday in aysan aslanba dhici karin in ay jiraan dad intay isku hooyo ama isku aabe wada dhalay beri hore oo magicii aabahoodna la yiraahdo Mareexaan ay ilaa hadda isla socdaan oo isu ogyihiin in ay walaalihii berigaas yihiin iyaga iyo farcankooduba. Taasna waxa aan ku keenay baadi goobkaas aan ku cagaagay. Waxaan isu keeni waayey in aan dadyow aan af-Somali ku hadlinin badanaaba aan muslimna ahayn ee degan nawaaxiga Diridhabe iyo Harar kuna abtirsada Oromo ay beryo dhexe hadana soo saareen sheegasho ay ku tixraacayaan in ay Mareexaan yihiin. Laakiin hadana ay sheegashadaasi iska aamustay oo iskeed unuxuustay ka dib markii uu Mareexaan waayey xukunkiidalka ee loo aanaynayey in uu haysto nin mareexaan ihi. Waxaase war oo dhami uu ku soo yaraan karaa in dadka Mareexaan ee kuwada dhaqan gobolka Gedo aysan isku midab, dhaqan, fikrad, iyo aragti toona ahayn oo ay si xoog leh weli u muuqato isku kabkooda qoorta laysu wad surayaa.

## HARTI

Hartida oo ah Daaroodka inta ka soo harta Ogaadeen iyo Marreexaan, waxaa guud ahaan  marka la isku wada daro tiradooda lagu sheegaa in ku dhaw Malyan, laakiin haddii la kala qaad qaado ayaa Majeerteenka oo ugu badan lagu sheegaa; 450,000 - 500,000, eeg; bogga; 320, ee G.P. Murdock.

Haddii aan raad raac ku samayno halka uu ka yimid erayga Harti, waxay u egtahay in uu ku macne yahay talis ama qof awood leh ama karti, wuxuuna macnahaasi u dhaw yahay macnaha ay maanta u yaqaaniin reer koofurku ee ah ninka naagta qaba (*husband*), waxaa la oran jiray taliskii gumaystaha Talyaaniga (Harti Talyaani), sidaa oo kale waxaa la oran jiray boqortooyadii Keyna-diid Harti Daarood.Hase ahaatee waxaa tafsiirkan shaki gelin kara fac dheerida magaca oo ah mid jiray tan iyo bilowgii Saldanadihii Islaamka, si kastese arintu ha haatee aan u soo dhaadhacno gudaha  oo mid walba goonidiisa u tafsiirinno;

## 3- Majeerteen:

Waxaa magaca Majeerteen la oran jiray haweeney asalkeedu Itoobiyaan ahaa oo degenayd soonaha magaalada Boosaaso. Haweeneydaas oo mageceedu ahaa; Majidhan Majeerteen waxay u dhimatay masayr ka dib markuu ninkeedii la guursaday, qisadeediina waxay noqotay mid lala yaabo oo lagu wada sheekaysto sida qisada Cilmi Boodhari.

Waxay sheekadaas iyo foorjadaasi ku dhex socoto bulshadii Soomaaliyeed ee aan waagaas la maqashiin karaynin wax jacayl ku saabsanba waxay ugu dambaystii isu baddeshay in dadkii gobolkaas iyo soonihiisa oo dhan degenaa lagu naynaaso Majeerteen, iyadoo loola jeedo kajan kaftan iyo xifaalayn ka dibna iska dhaqan galay.

Haddaba quruumihii cid walba lahaa ee agagaaradaas degenaa ayey taasi u noqotay fursad is walaalaysi oo way ku midoobeen caydaas iyo gooni u saariddaas, ilaa maantana haddaad u fiirsato dadka deegaankaas waxaad arkaysaa in qaarba meel ka soo haajiray beri hore, ha ahaato Khaliijka Carbeed, Afrika, ama Hindiyaba.

Waxaa ka mid ah caddaaymaha taas ayidaya sida ay ku yimaadeen Majeerteenka laga helay magaalada Kismanyo. Waxaan weli qarsoomin in lagu dirqiyey ka dibna la qabadsiiyey dadkii halkaas degenaa ee kala ahaa cido kala duwan in ay sheegtaan Majeerteen, iyaga oo ka tanaasulaya magacyadoodii hore. Tusaale: qabiilkii la oran jiray Doqon diiddo oo ilaa hada ay tiro badani meesha ka degan tahay waxaa loo rogay magaca Cismaan Maxamud oo ay ka dib ka sii gelayaan Majeerteen. Maxaa wax ka caddayn og haddii la hayo labo nin oo walaalo isku aabbe iyo isku hooyo ah oo uu midna Ugaas (kaabaqabiil) ka yahay Majeerteen, Cismaan Maxamud oo Daarood ah midna Doqon diiddo oo asalkii loo tiiriyo in ay Hawiye ka gasho Gaaljecel. Ugaas Cabdi Xuseen waxa uu boqor ka yahay Cismaan maxamudka degan Kismayu, laakiin walaalkiis da’dii ka yarayd ah, Maxamad Xuseen waxa uu isna Malaaq –boqor ka yahay Doqon diiddo. Sidaas si la mid ah waxa ay saamaysay siyaasadii 1959 kii dhulkaas ka socotay qaybo waaweyn oo ka mid ah qabiilka la yiraahdo Cawramaleh oo iyaguna qaatay magaca Warsangeli oo loo arko in uu la walaal yahay Majeerteenka.

## WARSANGELI

4- **Warsan-geli,** waxay ahaayeen rag badmaaxyo ah oo laga waraysan jiray dhulalkii ay soo mareen intii ay safarrada ku maqnaayeen, iyaguna caadaystay in ay dadka u sheegaan wixii kheyr iyo war san ah.

Ka dibna markii looga bartay samasheega, iyada oo halkaas laga qiyaas qadanayey in badmaaxiintaasi ku dadaalayeen in aysan dadka ka nixin, ayaa la siiyey magaca ah (War san soo geliya) oo hadda u soo gaabsamay Warsan geli, shaqaalahaas oo isku raacay xirfad ahaanna waxay dantu ku kalliftay in ay iyagu is xigsadaan maadaama ay ummadihii oo dhan qaybsameen.

Sidaas darteed waxaad maanta arkaysaa in ay Warsangeligu ilaa maanta badda ku jiraan oo aysan uhanqaltaagin dhaqandhaqaaleedka kale ee ay Somalidu nafta ku xirtaan. Waxaad kale oo arkaysaa in intooda badani ay ku noolyihiin waddanka dibaddiisa oo ay degeen waqti fog oo aysan Somalida kale safaro dhaadheer geli jirinin. Waxaa wadamo ka fog qaarada Africa sida Bariga fog ee Asiya maanta laga helayaa dad ku abtirsanaya Somali (haba tirayaradeene)ka dibna marka dib loo baaro ku tagaya Warsangeli. Waxaaba maanta wadamo fara aad uga for dalkeena laga helayaa qabriyo la sheego in ay dad beriga Afrika ka yimid ku jiraan, marka qaarkood la sii baarana la arkayo in ay yihiin Warsangeli.

Waxaa beryahan bilowday isbahaysiyo hor leh oo ay yeelanayaan Warsangeli Daarood, Warsangeli Abgaal, Cawra ma leh oo iyagu ku abtirsaday Majeeteen, Cismana Maxamuud.

### 5- Leel kase,

Magaca asalkiisu waa (dheel kase), oo waxaa deegaankaas ku caan ahaa cayaaraha la tunto sida Dhaantada jaanta, batarka iwm, ka dibna dadkaas oo lagaga baqay fasahaad ayaa loo diray laba sheekh oo Qur'aanka barta lana kala oran jiray; Max'med Fiqh iyo Maxamuud Fiqh, dadkaasina si sharaf leh ayey u aqbaleen dacwadaas oo waxay u kala qaybsameen xer wax ka barata labadii sheekh,

Ka dibna labadii xer waxay isu baddeleen laba qolo, guud ahaanna magacoodii waxaa loo baxshay Xer oo ilaa hada lagu magacaabo. waqtiga ay magacyadaas iyo is raacaasi ahaayeenna wuxuu u dhawyahay qiyaastii markii magaalada Gaalkacyo oo deegaannadooda ka mid ah laga kacshay Gaaladii Itoobiya.

Aragti kale oo jirta, balse aan iyana la isku raacsanayn waxa ay tahay; in magacani uu ka yimid kelmadda ah (Leel kase), oo macneheedu yahay (Habeenkiisa garte), taas oo ku baxday in odaygii lagu bilaabay magacaasi uu ahaa nin ku xeel dheer tukashada salaadda saqda dhexe habeenkii la tukado ee ah (Salaatu-leyl). Waxayna taariikhda odayaashu isku raacsan tahay in dadkaas intooda badani ay ka kala yimaadeen qolloyinka Xawaadle, Ogaadeen, Marrexaan iyo H/gidir.

6- **Dhul-bahante,**

Magacu wuxuu ka soo gaabsamay ( Dhul banaan hante), wuxuuna ku yimid markii ay dadyow fara badani uga soo kala naqraaceen dhulka iminka u ah deegaanka dhinacyo kala duwan sida; Itoobiya, Waqooyiga, Bariga iyo bartamaha Soomaaliya iyo meelo kale oo aan la ogeyn, dabadeedna waxay asaasteen shirkaddaas Dhulbahante.

Waxyaalaha aragtidaas xoojinaya waxaa ka mid ah; Qaabka isa saarka ee magaca, sida ay ukala qaybsan yihiin oo ku dhisan dhulka ama deegaanka, taas oo ah; in ay kala yihiin reer Hawd iyo reer Nugaaleed, sida ay iyagu ku faanaan ee ah; Dhulbahante dhalayoo dhulkii ballaaray, iyo waxaa kale oo iyana tusaale noqon kara weedhaha ay ku dacaayadeeyaan qolada la deriska ah ee ay xifaaladu kala dhexayso, taas oo ay ka mid yihiin; Dhul bahante dhulka dhase, ku rujiye, kama kece. Taas oo macneheedu noqon karo; nimankii intay dhulka qabsadeen laga kicin waayey ee ku mintiday.

Marka aan ka eegno xagga raadadka laga daba tagi karo ee aan weli rasmi noqonin waxa aka mid ah jilibka la yiraahdo “Fiqishinni” oo iyagu dhawaan si bareero ah u caddaystay in ay yihiin Hawiye kana sii galaan Habar gidir oo ay ka sii galaan Cayr. Taas oo weliba sababtay in qaar badan oo dadkaas ka mid ihi ay usoo qaxaan dhanka Muqdisho oo ay awal ka santaaglayn jireen.

Waxaa kale oo ka mid aha hadalada iska hor imaanaya inay sheegayaan in jifada ugu ballaaran ee la yirahdo “Naaleeye Axmed” ay leeyihiin waxa adhalay Fiqishini. Fiqishinana waxa uu soo degay aagaas mudo aad u dhaw oo uu ka yimid Cayr Hawiye.

Tusaale hadaan usoo qaato mid ka mid ah qisooyinka hab sheekeedka lagu soo weriyey; oday ka mid ahaa qaybtaas horay Dhulbahantaha uga midka ahayd ee fiqishini ayaa berigii todobaatameeyadii ee ay Somalidu is dhex galaysay loogu bishaareeyey in ay inantiisii guursatay nin Hawiye ah, markaa ayuu isaga oo ka xun weydiiyey bal jilibka uu ninku ka yahay Hawiye. Waxaa loo sheegay in uu yahay Cayr, markaa ayuu qayliyey oo yiri; “waaw, waar kolley hadday Hawiye guursanayso may cid xoolo leh ka guursato”.

Laakiin asal la’aanta tirsiga qabiilka Somaaliyeed ayaa maanta arintii soo dhawaysay oo sababtay in uu ninkii mar kale sheegto Cayr.

Qisooyinka dhex wareegaya isla jifada Hartida oo uu ka tirsan yahay Dhulbahante, waxaa ka mid ah in uu Dhulbahante ahaa madi la dhashay sagaal gabdhood.

Habeenkii uu dhashay ayey hooyadii oo la oran jiray Qandhiciley ku alalaastay: "Dhul hante dhalay dhulkiina durug". Markaa ayey islaantii lala qabay oo la oran jiray Uba-lacag oo ahayd hooyadii Majeerteen ku jawaabtay: "Allah waa magacaan sugayey" isla markaana ay naftii ka dhacday.

Haddaba qisadani waxay si ahaan soo dhaweynaysaa fikirkii aan soo jeediyey ee aan kaga hadlay Majeerteen ka. Habarta la oran jiray Qandhiciley waxa la sheegay inay ka dhalatay jifo la Xabshi ahayd oo la oran jiray Majinga Winikh Daanikh. Qisadann iyo qisooyinka aan ku soo aroorinay Majeerteenka waxay iska waafaqayaan dhawr qodob oo kala ah:

1. in ay habarta Majeerteen dhashay Xabashiyad ahayd
2. inay habartaasi maseyr u dhimatay haday dhimatay kolkay tii lala qabay Dhulbahante dhashay iyo haday si kale ugu dhimatay intaba.
3. Inay habarta reer Majinga ahayd ee loo bixiyey Qandhiciley ay la timid wiil markii uu ninkii la oran jiray Saciid Harti ee hadda lagu abtirsadaa guursaday, ugu dambaystiina wiilkii loo bixiyey Maxamed Harti oo hadana mar kale isu sii badelay magaca Majeerteen.
4. Tan ugu weyn ee marka waafaqaysa qisadii Majeerteen waxay tahay in odaygii Saciid Harti ahaa uu ka dardaarmay inuu wiilasha ku jiro wiil uusan dhalin oo dhaxalkiisa aan wax ku lahayn. Haddaba si loo cadeeyo midka uu wiilasha ka yahay wiilkaasi ayay weydiiyeen adeerkood oo ahaa Geri Koombo.

Adeer Geri oo su'aashaas ka jawaabyana waxa uu yiri: "wiilka idinka mid ah ee madaxii odayga keena ayaa ah midka uusan odaygu dhalinin. Waxan ku soo saarayaa in aan xukunka qoyska siino kii madaxa odayga keena". Maaalintii dambe ayaa geed hoostii la isugu yimid oo uu Adeer Geri soo bandhigay ninkii madxii odaygii Aabe ahaa oo la aasay soo qufa ee noo keena ayaan udaynaynaa inuu xukunka qoyska weligii hayo. Hadalkaasi markuu soo yeeray ayuu Dhulbahante ka booday gogoshii oo carigiiba ka hayaamay isagoo ka xun warka soo yeeray. Laakiin wiilkii loo bixiyey waagii dambe Majeerteen waxa uu si hal haleel ah ku keenay madaxii odaygii, halkaa ayaana loogu saxiixay inuu weligii xukunka qoyska hayo laakiin dhaxalka odayga uusan wax ku yeelan.

7- **Carabtii Maxmuud Saalax,**

Adiguba akhristow ila arag ma noqon kartaa jumladani magac nin keliya oo laga soo farcamay?, waxay ahayd mar ay niman Carab ihi booqasho ku mareen deegaanka dadkaas lagu yaqaan ayaa waxaa soo dhaweeyey oo gar hayeen ugu noqday waddanka nin la oran jiray Maxmuud Saalax.
Ka dibna waxaa badatay intii nimankii lagu tilmaamayey waa Carabtuu Maxmuud Saalax watay, ugu dambaystiina waxayba noqotay hadal iska qabta dadkii geyiga oo dhanba.

8- **Hab-iskuul**

waxaa laga yaabaa in dadkaa aan horay u maqlini ay la yaabaan magaca noocaan ah oo la leeyahay waa qabiil weligii jiray, laakiin su'aal baa waxay noqon kartaa haddaad qoladan magac sheegashadooda ka caana diidsan tahay bal mar kale adna qoladaada mageceeda maad dib u fiirisid, waaba intaas oo ay tahay mid ka sii magac foge.
Tan kale ee hortaalla dadka magacaan ku jira iyana waxay tahay; Goormaa ugu horeysay ee magaca Iskuul lagu aqoonsaday Soomaaliya dhexdeeda? waxaa la wada hubaa in markii ugu horeysay ee la maqlo Iskuul ay ahayd waqtigii xornimadii ka dib, waxaase ka sii daran in magaca asalkiisuba uu yahay Af Ingiisi ee uusan shuqulba ku lahayn dhaqan iyo luuqad Soomaaliyeed toona.

# WAA MAXAY IRIR?

Haddaan ugu hor marino sida ay dadka Irirka sheegtaa isu haystaan waxay tahay in ay iyagu mar yihiin kuwa asalka u ah Soomaalida oo magaca soomaalina uu ka yimid Aabohoodii hore ee Samaale, oo lagu geeyo marka la abtirsanayo, inkastoo ay taasi khilaafayso ama ay hakad gelinayso marka ay hadana ku adkaystaan in ay asal ahaan ka yimaadeen Carab, marka ay wadada noocaas ah raacayaana waxay isu kala saaraan Hawiye iyo Iidoor oo ay qola walba iskeed ugu abtirsato Carab,

Isku dar ahaana tiradoodu waxay gaaraysaa Malyan ku dhawaad, marka laga eego natiijadii tirakoobhii 1973 kii, iyo 1984 kii. Waxayna kala yihiin; 400,000 Isxaaq ah iyo Nus Malyoon Hawiye ah. (eeg; tira koobihii laga qaaday dalka oo dhan, iyo kitaabka Dr; Xasan Maki Maxamed Axmed, ee la yiraaho;



أحمد حسن مكي محمد أحمد :د .السياسة الثقافية في الصومال الكبير. 1887-1986 ee lagu daabacay Kharduum, Golaha Islaamka ee Afrika ee Daabacadda, sanadkii 1986/87. boggiisa; 19-20.

Sidoo kale eeg; (*Eest African Pastoralism*, P.320; G.P. Murdock, *Africa; its people and their culture History*. N.york 1958. oo isagu leh marka Hawiyaha lagu daro jacbur kale oo fara badan sida; Xawaadle, Shiikhaal, Abgaal, iyo ururo kale oo sii badan ayey isku gaarayaan, 500,000.

Haddaan u soo noqono sida loogu dhaco abtirsiga Irir Samaale waa sidatan;

Irir, Gardheere, Gurre, Garoore, Xamarre, xariire, Mayle, Maqaarre, Yahaaburu. eeg; kitaabka nasabyada. Laakiin markii baadi goob kale la sii galay waxaa la soo helay abtirsiiyo kale oo in yar khilaafaya kan, sidaa darteed loo malaynkaro in ay labada riwaayadood midood uun wax isaga dhex qaldameen. Laakiin waxan la iska indha saabi karinin in ay labada riwaayadood is taageerayaan oo ay ka dhigayaan akhbaarta mid xiriirsan ama Mutawaatir. Abtirsiimaha kale waa sidatan:

Mahadir, Madoobe, Madalug, Surre, Akashi, Gurgurre, Gariire, Xariire. Tirsiga noocaan ah waxaa ilaa hadda kala wata dhawr qoys oo kala degan dhulka Ethiopia iyo Djabuti, waxayna badankoodu mararka qaarkood ku abtirsadaan Dir.

Sidoo kale kitaabka uu Xuseen Cali Cilmi ka qoray taariikhda Cabdiraxmaan- al Jabarti iyo guud ahaanba halka uu ka soo askumay Daaroodku.

Wuxuu kale oo uu qoray Dr; Maxamed C/qani Sacuudi, in ay yihiin; Samaale oo dhalay Irir, Irirna dhalay; Madoobe, Dir, iyo Haawiye,

eeg; ÇáÕæãÇá ÚÖæ ÌÏíÏ ÈÇáÌÇãÚÉ ÇáÚÑÈíÉ: ee uu qoray qoraaga aan soo xusnay, bogiisa; 20 aad.

Wuxuu kale oo sheegayaa Ustad; Xirsi M. Hilowle oo wax ka dhiga Jaamacadda Caalamiga ah ee Islaamka ee Malaysiya: in uu yahay taxa abtirisku; Hawiye, Waadeer, Irir, Sacmaal, wuxuuna Daktoorku inkiray jiritaanka magaca Samaale, Hadduusan ka imaan magaca Sacmaal.

Wuxuu kale oo ugu abtiriyey I.M.Lewis, bogga; 588 aad ee buuggiisa; (*Sufism in Somaliland a study in trible Islam*), in ay yihiin sidatan; Somali, Irir, Hawiye, Gurgate, Daameey, Hiraab, Martiile. laakiin waxaa si cad looga fahmayaa marka la sii daba raaco qoraalladiisaas oo dhan in tani ay ku salaysan tahay siyaasaddii ahayd Daarood sal kicinta, oo waxay taariikhyahanadaasi iyaga oo aan iska wada war qabin kala geliyeen Soomaalida Carab ku farcantay Afrikaan iyo Afrikaan ku farcamay Carab,

Taasina waa mid hab dhismeedkeedu isaga cad yahay hadba siyaasadda uu qorahaasi ka leeyahay baaritaankiisa, oo waxaad arkaysaa in kuwa qaba in Soomaalidu ay ka timid Afrikaan ay xujooyinkooda u cuskanayaan marna in Soomaalidu ay tahay Hawiye uun, waxayna tusaalaystaan Ajuuraan oo ay leeyihiin waa asalkii Hawiye, loona dhaweeyo tafiirtiisa Bantu (jareer),

Mar kalena waxa ay leeyihiin in Soomaalidu ay tahay Sab oo ah Raxan weyn iyaguna ay yihiin Afrikaankii dhulka lahaa. Halka ay kuwa kale ee ka soo hor jeedaana ka sheegayaan in ay Soomaalidu ka timid muhaajiriintii Carbeed oo dhulkaas degtay ka dibna ay soo dhex galeen kooxo yar oo Afrikaan ihi, wuxuu qoray; (*Encyclopedia of Islam* vol, 4 aad, T.,Z ):

Somaaliya qabiillo badani waxay ku abtirsadaan Beershiya, Madigaskar, Zanzibaar iyo Carab oo dhan, shakina kuma jiro in ay Carab badani halkaa ku jirto, kuwaas oo loo maleeyo Daaroodka, oo ah ilmo Caaqil Bin Abi daalib.

Mar kale haddana ka eego isla fikraddaas oo kale bogga;23-24 ee kitaabka.

العلا قات السياسية بين مسلمي الزيلع والنصاري الحبشة

ÇáÕæãÇá ÚÖæ ÌÏíÏ ÈÇáÌÇãÚÉ ÇáÚÑÈíÉ . Ï: ãÍãÏ ÚÈÏ ÇáÛäí ÓÚæÏí

Sida ay ka qabaan taariikhyahanada iyo qoraayaalka ajnabiga ahi waxaa kale oo ka mid ah sidatan;
(Waxaa loo maleeyaa in magaca Hawiye uu ka bilaamay dhulka Soomaaliland ee waqooyiga Soomaaliya qarnigii tobnaad ilaa laba iyo tobnaad ee AD, taasina waa markii ugu horeysay ee la helo magaca Hawiye) eeg; buuga, (T*he Gaalla in Northern somaliland*), qaybta Soomaalida, uuna qoray I.M. Lewis.
Sidoo kale ka eeg, buugga la yiraaho; *Rassegna di studi Ethiopici* xv (1959-60) bogga; 21-38, iyo weliba waxaad kaloo ka eegtaa; *Som- conquest of the Horn of Afrika*, cutubkiisa koowaad, ee 1960 kii, bogga; 213-230.
Inkastoo ay qoraayadu ku wareereen sida uu dhaqso ugu soo caan baxay magaca Hawiye, oo ay isku wada raacsan yihiin in ay jiri jirtay uun Prehawiye, (Hawiye hortii) oo ah dadyowga iminka loo yaqaan Garre. Laakiin marka arintaas dhab ahaan loo sii baaro waxaa soo baxaya in ay Hawiyuhu ka kooban yihiin dadyow isku dhex yaacsan oo ka soo kala haajiray qabiilooyinkii kala duwanaa ee ka soo qaxayey cadaadiska iyo dilka ay ku hayeen boqortooyinkii Xabashidu ka dib markii ay Muslimeen.
Inkasta oo ay taariikhdu aad ugu wareersan tahay sidii loo kala saari lahaa magacyada Hadiya (oo asal ahaan ka soo jeeda magac magaalo) iyo Hawiya, hadana waxay sheegaan in ay prehawiyaha ka sokow jiri jireen laba magac oo kala ahaa; Hawiya iyo Hawiye, kuwaas oo loo maleeyo in ay ugu dambaystii midoobeen, Dr; Andrzejewski, wuxuu sheegay in (magacyadii Hawiya iyo Hawiye oo isku dhawaaq dhawaa kalana ahaa laba ummadood oon is lahayn ay ugu dambaystii midoobeen isku midna noqdeen, iyagoo dhab ahaan u tuuray kala duwanaantii dhawaaq ee u dhexaysay, waxayna isku raaceen Hawiye) eeg; H.S.Lewis.
Laakiin isla saaxiibkiisa kula walaaloobay shaqadaan Soomaali baarka ah ayaa sheegay in si culus loogu wareeray kala saarka Hawiya, Hawiye, iyo Prehawiye, ka sokow inta aan lagu wareerin halka uu taariikhda ka soo galay Hawiyuhu. eeg, bogga; 26-27 ee buuggiisa; (*People of the Horn of Africa*) london, 1955, by I.M.Lewis.
Taariikhyahanada Al-Idiris iyo Ibnu saciid oo ah kuwii ugu horeeyey ee wax ka qora taariikhda Soomaaliya ayaa si isku mareegsan oo aan kala buunshe baxsanayn uga waramay magacyada Hadiya iyo Hawiya oo ay sheegeen in labaduba ay ka jireen soonaha dekadda Banaadir ee Marka.
Halkaas oo ay Hawiye weli ku nool yihiin, aanse la hubin in magacani uu ka soo farcamay mid ka mid ah kuwaas iyo in

uu yahay magac hor leh. wuxuuna sheegayaa in ay ilaa 700, oo sano halkaa deganaayeen. eeg; bogga; 521, ee

(*Journal of African History* , xv1, 4 (1975), - in great Britain, by; E. R. Turton.

Waxaa kale oo la sheegay in uu magacani ka soo jeedo magac hore oo ahaa Xaawiya, kana mid ahaa Jilibyadii Islaamka ahaa ee ka jiray carra Itoobiya, waayadii Salaadinada Soomaaliyeed.

Waxay kale oo taariikh qoraayaal kale qoreen in ay Hawiyaha iyo Dirtu ka jireen geeska afrika, in badan Islaamka ka hor, ayna rumaysnaayeen diintii Kushitiga, wuxuu leeyahay; I.M.Lewis (Dirta iyo Hawiyaha qaarkood waxay Islaamka ka hor haysteen diinta Kushitiga, ee lagu caabudo Ilaaha Waaq la yiraaho).

Waxaana la arkaa iyagoo ilaa maanta isku dhex qaldaya Islaamka iyo Kushitiga, tusaale, habka Suufinimada iyo siyaarashada, habka barako ku qaraabashada iyo nebi ku abtirsiga qudheedu waa mid laga dhaxlay dhaqanka Kushitiga) eeg buuggiisa; *Sufism in Somaliland*, bogga; 583.

Haddiise la tixraaco taariikhda ugu saxsan mid laga qoro ummadda Soomaaliyeed ee ah sida uu ku qoray Carab Faqiih kitaabkiisa Al-Futuuxu Al-Xabasha, waxaa loo maleeyaa in magacaan Hawiye uu ka soo jeedo magicii Hadiya ee ahaa magaalo ama boqortooyo ka jirtay xuduuda Eretareya iyo Itoobiya oo Muslimiin ahaa, haddana ay taariikhdoodii luntay, wuxuuna yiri Rajab sidatan;

(waxay ahaayeen ciidanka Hadiyuhu kuwa ugu badan xagga tirada, nasiib darrase tiradoodii oo dhami waxa ay ku dhaceen gacantii Xabashada, ka dib markii ay taag daraysay boqortooyadii Awdal ee(Jabarti),

Waxayna boqoradii Hadiya oo dhami u aruurin jireen gibirka (Baadda) boqorkii Xabashida, iyaga oo weliba ugu sii dari jireen gabar ay qoyska reer boqorku dhaleen oo marka la dirayo la gaalaysiiyo, iyaga oo intay kafanaan janaaso ku tukan jiray inta aysan dirin, waxayna dadkaasi ku noolaayeen dhul beereedyo ay ku beeran jireen Digir, masago, iyo Khudaar). eeg bogga; 163, & 25, ee kitaabka Rajab.

Ka dibna reer Hadiye waxaa ugu war dambaysay iyaga oo u soo qaxay kana mid noqday dhanka Salaadinadii Islaamka (Soomaalida) ee webi shabeelle iyo shawaa. Aragtidani waxay garab siinaysaa sheegashada ay Hawiyaha qaarkood sheegtaan in awoowgood Hawiye uu ku aasan yahay ama qabrigiisii ku yaallo magaalada Harar iyo nawaaxigeeda.

Waxayna markaas noqon kartaa taariikhda Hawiyuhu tan saddexaad ee ugu faca dheer qabiillada Soomaalida, inkastoo haddii la sii kala xaqiijiyo oo la sugo tan ay sheegeen Al-

idris, Ibn saciid, iyo Carab Faqiih, oo iyagu ah taariikhyahannadii ugu horeeyey ee laga helo raad raac Soomaaliyeed, isla markaasna ah kuwa keliya ee lagu kalsoon yahay waxa ay qoreen, siiba Carab Faqiih, kuwaas oo si cad uga sugaya qabiillada maanta jira Mareexaan, Habar magaadi, Yibro, Habar Xabuushaad iyo Mad Madigaan oo faninkoodii hada laga sii helayo dalka Tanzania oo keli ah. Waxayse taariikhyahanadu xusaan kuwa aanaan imminka aqoon meel aan uraacno, iyo halka ay ku dambeeyeen.

Haddaba runtii shaki kuma jiro in ay Soomaalida barkeed ama inteeda badani horay u aaminsanaayeen diin ku sheegga Kushitiga, waxaana kuu caddayn ah in in badan oo ka mid ah magacyada magaalooyinka sida magaalada aan anba ku dhashay C/waaq ay sitaan magaca Waaq, sidoo kale magacyada qabiilada in badan oo ka mid ah waxay sitaan magaca Waaq sida; Cabud-Waaq, Jid-Waaq, Gumur-waaq,Tagaal-waaq iyo waaqyo kale oo ku kala abtirsada Ogaadeen, degoodi iyo qolooyin kaleba.

Waxaa kale oo taas ka sii cad in hal ku dhegyada ku saabsan inkaarta iyo ducada ay u badan yihiin baryo lagu baryayo waaq sida; (Waqaad hoogtaaye i dhaaf, weligaa iyo Waaqaa ma maqashay?, Waaq dhaw/Alla bari, IWM).

Laakiin arintani waa mid ay weli si xarig jiidad ah ugu muransan yihiin taariikhyahanadu,iyada oo kuwa Muslimiinta ihi ay isku waafaqsan yihiin in Islaamku uu soo gaaray Soomaaliya ka hor intii uunan soo gaarin Maddiina Al-munawara, sidaa iyo si u dhawna waxaa qaba in kale oo reer Galbeedka ah, sida; David D. Laitin oo leh (Soomaalida badankoodu waxay Muslimeen 15 qarni ka hor) eeg bogga; 44 ee S*omalia Nation in search of a state*.

# IIDOOR = ISXAAQ.

Haddaan u soo noqono fikradda ay qoraayadu ka qabaan qaybta kale ee Irirka, Iidoor waxay u badan tahay in ay qoraayadu raacsiiyaan dadka ay ku tilmaamaan in ay ahaayeen muhaajiriin ka timid xaga Carabta, waxaana inta badan la is xijiyaa iyaga iyo Daaroodka oo la sheego in ay markii hore isku jeel ahaayeen kana wada yimaadeen carooyin Carbeed oo kala duwan, wuxuu leeyahay Lewis.

(Isaaq iyo Daarood waxay si cadaan ah uga soo farcameen Carab, laakiin Hawiye iyo Sab (Raxanweyn/may) iyagu asal ahaan kama imaanin xagga Carabta), wuxuu kaloo yiri;

(Isaaq iyo Daarood waxay soo gaareen xeebta Soomaaliyeed waqti aan weli lagu cadayn taariikhda, laakiin dhaqan iyo caado ahaan lagu qiyaasi karo intii u dhexaysay Hijradii iyo qarnigii 15 aad) eeg; Lewis, 1955, pp,15-9, 23-4. bogga;, 587. Waxaa kale oo ay taariikhaha qaarkood sheegayaan in Isxaaq iyo Marreexaan oo Daarood ka mid ihi wada dhasheen oo ay isla yihiin ilma “Abaadir Muuse”. Waatay Isxaaqu ka barakaystaan Sheekh Abaadir, bal ee heesta ay eray bixinteeda ka midka yihiin” “Abaadirow soo aruuri caashaqa”.

Sidaa oo kale uun bay rumaysan yihiin dadka Iidoorka ihi, waxayna isku qanciyaan in ay yihiin dhashii Sheekh Isxaaq oo ka mid ah dhashii Cabdillaahi Bin Abu daalib, ee Aalu Beytka ah.

Laakiin abtiriskaasi wuxuu si tig tigan uga soo horjeedaa abtiris kale oo ay reer Iidoor isticmaalaan, kaas oo ah; Isxaaq Axmed Maxamed Murbadle Hooshaar, abtirsiganina ma ahan mid salka meel loo geliyey ee wuxuu u muuqdaa sidii farac madax banaan. Waxaa kale oo loogu abtiriyaa Maxamed Xinif-tire Direed oo la dhashay Biyamaal Direed. Magicii ugu horeeyey ee loo yiqiinay Iidoor ama Isaaq waxa uu ahaa “Habar-Magadi” sida ay qoreen kitaabka Carab Faqiih iyo kuwa kale. Laakiin magacaasi maanta wuu sii min guurayaa oo waxa ku sii haray jilib aad u yar oo Isaaqa ka mid ah oo keliya inta kalena way ka weynaadeen.

Haddaba su’aashu waxay tahay sidee ayey Habar magaadigii beri hore keligeed jirtay maanta usoo hoos gashay Isaaq?, oo iminka ma Isaaq baa Habar magaadi ah mise Habar magaadi baa Isaaq ah?.

Marka taariikhda qisooyinka is dhex boodaya la sii daba raacana waxaa soo baxaya in magaca Iidoor uu ku baxay

ganacsatadii ka dhex shaqaysan jirtay waqooyiga iyo galbeedka Soomaaliya, kuwaas oo xiriir ganacsi oo ballaaranna la lahaa Khaliijka Carbeed. Ganacsatadaas oo waagaas gaaanacsan jirtay iyadoon wax lacag ah la isticmaali jirin ayaa ganacsigoodu ku dhisnaa Iidoori (ii badel), oo sheyba shey ayey kaga doorsan jireen dadka kale.

Sidaa ayuuna magucu uyahay macnaha Ganacsadayaal, halkaasna magacaasi wuxuu ku xambaaran karaa qof kaste oo meelahaas ka ganacsan jiray, magaca Isxaaq oo isna mar mar la isticmaalana waxaa loo malaynayaa in uu ahaa nin sheekh ka ahaa geyigaas waqti jiray.

Su'aashuse waxay tahay maxaa loola jeedaa Habar Jeclo, Habar Yoonis, Habar Awal, Habar Garxajis iyo guud ahaanba habrahakan lagu abtirsanayo ee ah caadada aan weligeed sheeko iyo shaahid toona ku soo marin Afrika iyo Carab toona?.

Haddaba si aanu u kala reebno labadaan qolo oo marna is diida marna is qaadata (Iidoor iyo Hawiye), waa in aanu marka hore ogaanaa halka uu ka soo jeedo magacan lagu shirkoobay ee Irir. Arintaas xaqiiqadeeduna waxay tahay in magaca Irir la soo allifay 1960 kii, ayna soo allifeen nasiib wanaag niman weli wada nool oo laga yaabo in ay qoraalkaan indhahooda ku akhristaan, ka dibna ay kaga waantoobaan fidnaynta iyo kala qabiilaynta ummadda Soomaaliyeed.

Nimankaasi waxa ay kala yihiin; Ibraahin Cigaal oo hadda madaxweyne isaga dhiga qabiilkiisa, iyo Cali Jimcaale oo Sacad ah, waxaana nimankaas ku kallifay in ay soo saaraan magacaan si ay u helaan madaxweynenimo ayey dooneen duufsiga shacab badan markaa ayey ku heshiiyeen in ay isku darsadaan labada qabiil ee ay ka kala yimaadeen ee Hawiye iyo Iidoor. Qolada Daaroodka oo tartanka kula jirtayna daaqadda ka saaraan, sidaa awgeed ayey faafiyeen Hawiye iyo Iidoor waxaa wada dhalay Irir. Taasina wax la yaab leh ma ahan oo waaba siyaasadaha lagu soo saaro qabiilka.

Waxaana caddaynteeda ku filan in ay tahay xiilad siyaasadeedka ugu weyn ee laga cayaaro Africa. Tusaale yaanaan meel fog u raadine aan idin soo qabto madaxweynaha dalka deriskeena ah ee Kenya markii uu jagada si lama filaan ah ku qabsaday waxa ugu horeeyey ee uu ku fikiray waxay ahayd sidee baad xukunkaan maanta kuu soo gacan galay ku adkaysataa? Wuxuuna ugu horayntiiba soo helay fikradda ah in qabiil la samaysto, markaa ayuu ku dhaqaaqay in uu isu keeno quruumo aad ugu kala duwan wax kaste; aan isku af ku hadlin, iskuw ax aaminsanayn, aan isu ekaan la isku soo qaban karin, aan iskusi dhaqaale u

samaysan ama isku si unoolaanin, oo ay ku jirto qolo aad u tiro yar oo uu isagu ka dhashay. Wuxuuna ugu baaqay in ay isku cid noqdaan saaka laga bilaabo, oo wuxuu u baxshay magaca la yiraahdo “Kalanjiin”.

Haddaba maanta dadka waddankaas ku nool iyo xataa kuwa wax ka qora way ku adagtahay in ay kaa maqalaan in aysan qolada Kalanjiintu isku fir ahayn oo isku meel ka soo wada askumin. Yaabku haddaba waxa uu yahay xoogaysan ogaa oo xidido adkaysan ogaa maba qaan gaarin magucuye. Sow tay shalaydaan ahayd markii la siu keenayey?. Haddaba taasi waa cashar ka mid ah sida loo allifo qabiillada guud ahaanba Afrika oo ay Somalidu ugu horayso.

Dhan kale hadaan ka eegno Jaaliyadaha Carbeed ee Soomaaliya lagu sheegayo waxaa loo malayn karaa kuwa aan is wada haysan oon hal meel ku ekayn ee ku kala firirsanaa deeganaanda oo dhan waxaana dhici karta in aysan intooda badan iskaba war qabinin, tusaale, sida uu sheegayo Ibnu batuuta waxaa ka cad in goob kaste oo dalka ka mid ah ay joogeen niman Carbeed oo wadaniyiin ah, taasina waa mid laga garan karaa hadalkiisa in Muqdishana ay degenaayeen dad Carab ihi qarnigii 8 aad oo waafaqsan qarnigii 13 aad ee M., Wuxuu sheegayaa in suldaanka Muqdisho oo la oran jiray Abuubakar Ibnu Sheekh cumar ay isaga iyo qaadigiisiiba ahaayeen Masaari. eeg; *Ibnu Batuuta; Ahlu Barbara Wa Zeylac*; bogga; 223-224.

Xuseen M. Aadan ayaa ku qoray kitaabka; *Conflict* een kor ku soo xusnay; bogga; 104 aad, in uusan Hawiye wax la yiraahdaa ku jirin Soomaalidii dagaalka kala soo hor jeeday Amxaarada waagii Axmed gurey, wuxuuna in badan oo qoraalladiisaas ah ku caddeeyey in ay cilmi baarayaasha ama taariikh baarayaashu kala hogaaminaya Mad-habaha taariikheed(*scholars*) ay garan la'yihiin oo ku wareersan yihiin faraqa u dhexeeya qabiillada Soomaaliyeed. eeg; bogga; 114, wuxuuna sheegay in la dhaafsiin la'yahay xaalkooda in ay isku wada aabbe yihiin oo uu oday qudh ihi wada dhalay, eeg; bogga; 115 ee isla buuggaas.

Siday aniga ila tahayse waxaas oo dhami waa mala-awaal iyo hadal macaansi, xaqiiqaduna waxay u dhawdahay sidatan soo socota:

Hawiye, baaritaankii aan ku dheeraaday ee aan ku hayey sida lagu soo helay magacan waxay ila dhaafi weyday in uu waqti waqtiyada ka mid ah jiray nin la oran jiray Hawiye oo ka faafin jiray diinta Harar iyo nawaaxigeeda, ka dibna ay Itoobiya soo sal kicisay dadkii raacsanaa oo ay u soo qaxeen

dhanka Soomaaliya.  ka dibna loogu yeeri jiray waa dadkii Hawiye.

Dadkaas oo ay ka mid ahaayeen Garre iyo qolooyin kale oo dadkooda dhinac ka raacay waxay taariikhyahanadu u yaqaaniin Prehawiye, waana iyaga uun kuwa ay dhab ahaan ugu qirsan yihiin Hawiyenimada.

Waxaa kaloo la leeyahay dad beeraley ah ayaa markaas ugu horayn ka kacay geyiga meelo ka mid ah, waxayna gubitaan iyo geed qaad ugu dhaqaaqeen dhulka Soomaaliyeed ee hawdka u badnaa. Ka dibna waxaa lala yaabi jiray sida ay dhaqsaha ugu baneeyaan dhulka oo ugu haawiyaan, markaas ayaa beeraleydii lagu dhihi jiray waa Haawiye.

Qisa kale oo wareegaysaa iyana waxay tahay in barigii ay colaaduhu aadka ugu faafayeen ardigeena ay jiri jireen dhallinyaro ardaallo ah oo falfal xumo isku biirsada, una hawl gala siday dadka u dhici lahaayeen ama u layn lahaayeen ujeeddo la'aan (*arsoning*).

Hadaba dadka Soomaaliyeed oo weligoodba kuwa fidnoolayaasha ah u qira raganimo iyo geesinimo awgeed ardaalladaasi ma aynan kala kulmin bulshada wax sumcad darro ah balse waxayba ficiladoodu ahaayeen kuwa lagu faano oo waxaa la isku cabsiin jiray ka mid ahaanshadooda, halku dhegii u faafayna wuxuu noqday (Haawiye) oo loogu baxshay in ay carro camiran yimaadaan ka dibna ehelkeeda dabada ka galaan oo ardigii haawiyaan markaa ayaa la oran jiray “ Ina hebel wuxuu galay Haawiye, halkaan waxaa soo galay Haawiye” iwm.

Waxayna taasi waafaqsanayd isla sida tan maanta jirta ee ah; (Ciyaal Faay Cali, Mooryaan, agoon, jirri, Aakhira moog, dhafoor qiiq, Daroogo iwm). Dabadeedna waxay u egtahay in dhallin yaradaas dableyda ahaydi ay is biirsadeen oo reera yeesheen noqdeena cida degan oo lala xaaltami karo.

Ugu dambaystiina u ballaartay sidii qabiil, habka qabiil samaysadka noocan ihina waa mid weli socda oon lala yaabi karin. waxaa mudan in aan tusaale u soo qabsano qisadan;

1992 kii markii Mandera, Kenya  laga furay xerada gargaarka ee lagu daryeelayey Soomaalidii ka soo bara kacday Koonfurta dalka waxaa meel walba qabsaday caruur da'doodu u dhexayso 6-10 oo wada tuugsanaya, halhayskooduna yahay (Iriireey wal i sii).

Caruurtaasi oo markii hore isaga kala timid afarta qibla ee Mandera, waxay ku wada hareen Mandera ka dib markii ay qaxootiyadii ku kala noqdeen dhulalkay ka soo bara kaceen, waxayna yeesheen is bahaysi gaar ah oo waxay barteen in ay isku af ku hadlaan iyagoo wada qaatay lahjada ay ku isticmaalayeen dawarsiga, hadaba sanooyin yar ka dib ayaa

loo baxshay caruurtii oo soo kortay (Iriirey) iyadoo loola dhaqmayo sidii qabiil jira, hadaba maxaad u malayn kartaa iyagoo inta dhaqaale yeesha reera tacbada oo gooni u dega?

Waxaa kaloo jirta in  xilliga qisadani ay ku abaaran tahay oo ah xilligii kala qola qolaysiga iyo hanti kala yeelashada soomaaliyeed, ay arintu taagnayd intee baa isla xoogsan karta oo wax wada qabsan karta, fikradaas oo ah tan maanta ay ku dhaqmaan wadamada hore umaray.

Waxaa iyana sii daba galka qisooyinka laga fahmayaa in ay soo bexeen naynaaso fara badan oo maanta lumay iyo kuwa weli noolba, waxaana la dareemi karaa in kala qaadashada magacyadu ay waa dhaw soo xasishay ee ka hor ay soo geli jireen magacyadaas hadba intii ka ag dhaw halka laga isticmaalayo.

Taasina waxay ka marag kacaysaa xasilooni iyo ku adkaysasho li'ida maanta ka muuqata kooxaha qabiillada iskula jira dhexdooda noocay doonaanba ha ahaadeene. tusaale; waxaanu mar walba maqalnaa reer hebel way ka toloobeen reer hebel, waxay sheegteen reer hebel, iwm, sida ay kooxo fara badani u soo galeen magaca Hawiye ka dib markay dagaaladii Soomaalida hogaamiyeen oo kale. Waxaa beri hore la maqli jiray (Dir iyo Daarood in loo qaybsamo, hadana Hawiye iyo Daarood).

Si kastba arintu ha ahaatee bal aanu iminka u soo dhaadhacno gudaha Hawiye oo aan findhicilno sida ay qola walba ku dhisan tahay:

## *HABAR GIDIR*

2. Habar gidir; Hadaan ka nabad galno muran iyo afjig, aan ku weydiiyee akhristow ma kula tahay in nin Soomaali ah loo baxshay magaca Habargidir uu ilmo dhalay oo laga soo farcamay? waxaa la sheegaa in dad ku noolaa meelo ka mid ah gobolada dhexe ee dalka ay beeran jireen Digir, ka dibna ay ku xifaaleeyeen xoola dhaqatadii, illeen wax beerashadu ilaa hadaba waa ka ceybe, waxayna gaartay in lagu caayo waa asal ama habar Digir,

Erayga Digir iyo gidirna waa isku mid oo marba midkii la doonaa la isticmaali karaa. Marka la sii kala findhiciliyo waxaa lagu sheekeeyaa in Sacad iyo Saleebaan ay isku jaal noqdeen markii ay kala boobayeen dhaxalkii, oo loo wada baxshay Ilma Qumis, in ay ku qaylinayeen (ar noo qumi) oo intaad haysoo noo la sii carar awgeed. Cayr iyo Saruurna isku jaal noqdeen loona baxshay Bah qodato, ka dib markay cayrtoobeen oo ay beero iska qoteen illeen xoolihii waxaa wada gurtay Ilma Qumise.

Waxay kale oo qisooyin is birinaya sheegaan in Shiikhaal oo meesha taagnaydna ay qaybteeda ka heshay dhaxalkaas, marna waxaa la yiraahaa waxaa qayb ka helay Duduble, sidaa darteed waxaa la isku yiraahaa; afarta H/gidir iyo Adeerkood. Way badan yihiin oo is wada burinayaan qisooyinka abtirsigaan ku soo aruuray oo waxaa ka mid ah in **Sacad** uu yahay Daarood, Ogaadeen, lana yiraaho; Sacad Saciid Wili-wili, ayna hooyadiis la timid isaga iyo Sac cad, dabadeedna Alle u barakeeyey halkii Sac, laakiin mar dambe ay xoolihii ka marteen ka dib markuu Alle ku caasiyey ee uu yiri (war waxani siin Ilaah ka badane ma siin Wili-wili baa?), dabadeedna uu la shirkoobay ilmo gidirka kale. Waxaysan weli sheekooyinka la iska wariyaa kala caddaynin midda ay hayad Habartaan Saca wadatay. Ma tii la timid Shiikhaal baa? Ma tii la timid Xawaadle baa? Mise qisadu waa sida aan hadda u sheegnay oo waxa ay ku kooban tahay Saacad?.

## Saleebaan

waxaa la sheegaa in ay Saleebaanka ama Suleymaanku ahaayeen kooxdii soo dhaweysay Sacadka oo la maashay Sacii cadaa iyo firkiisii.

Maanta hadaad dhab ugu fiirsato waxaad arkaysaa in Sacadka iyo Saleebaan labada ay isugu jiraan qayb Hindi u eg iyo qayb Jareer u eg.

Cayr waxay dadka yaqaan intooda badani isku raacsan yihiin in Cayr la wada oran jiray dadyowgii dhulkaas degenaa ee aan xoolaha nool lahaan jirin oo dhan, illeen ninkaan xoolaha la daaqsado lahayn waa ka cayr wadankee.

## SARUUR

**Saruur,** waxaa la isku raacsan yahay in uu ahaa inan Jareer ah (sankadhuudhi) oo la soo korsaday badelkii inankii Saruur ee dhabta ahaa, oo waxaa lumay wiilkii Saruur oo yar, Aabihii Madar kiicis Hiraabe oo indhool ahna waxaa lagu qancin waayey wax aan Saruur ahayn,

Markaa yaa maalintii dambe loo keenay Saruurka hada la sheego, markaa ayuu inta meel walba ka taabtay oo fahmay in uusan wiilkiisii ahayn isaga xasilay oo yiri (San weynaa oo Sarara weynaa Allow Saruur Madar kicis kaa yeel).

# DUDUBLE

**Duduble**, Sida ay iyagu taariikh ahaan ugu sheekeeyaan qabiilkani, waxa uu ka yimid ilmo dhashay oo dudun laga soo hoos qaaday. Oday lagu qiyaasayo in uu yahay kii isku soo aruuriyey dadyowga ugu dambayntii noqday Habar gidir ayaa isaga oo xoolo ka baxsaday baadi goobaya ka helay dudun hooskeed ilmo markaa dhashay oo la iska tuuray. Wuu soo qaaday, haddaba, oo u keenay habartii la oran jiray Gidirey oo ma dhasho ahayd, laakiin iska jeclayd caruur korsiga. Waxa ay haddaba ku dhex darsatay dhawrkii hore ee ay haysatay ee kala ahaa; Sacad, Saleebaan, Saruur, Cayr iyo Sheekhaal oo mar dambe lagu soo daray taxa sheekadatan, si loogu soo jiito taxaalufka ama isutaga midowga Habargidir.

Hase ahaatee marka la sii dhiraan dhiriyo sheekooyin cilmiyeed kale oo laga soo aruuriyey ilo kale waxaa loo malaynayaa in magaca "Duduble" uu ka yimid oo laga wado Guduble, oo ay ugu baxday cayaarta gobollada ay dadkaasi degaan laga cayaaro ee loo yaqaan "Waalada" oo marka ay laba ruux isaga hor imaanayaan iyaga oo ku tartamaya uu midna doorto in uu bidix qaato midna doorto in uu gudub ka cayaaro, kolkaa ayey geelleeydii ugu badisey mar walba ka qaadan jireen Gudub,

Ka dibna caruurtoodii lagu magacaabo waa reer Guduble, is bedelkii waqti iyo duruufeedna uu soo gaaray duduble, iyo in ay isla tegaan oo is kaashadaan, maadaama ay isku horin ku ahaayeen xirfadda Waalada.

Maanta oo la joogo waxaa iska cad in qabiilka Duduble uu ukala baxo laba jifo oo midina Carab rasmi tahay midina Jareer rasmi tahay.

Waxaa lagama maarmaan ah in aan halkaan ku xusno sheeko ku tiri ku teen ah oo ay qabiil walba oo Soomaaliyeed ku sheekaystaan dhexdooda. Gaar ahaan kuwa ku dhaqma gobolada dhexe ee dalka oo iyagu markaste ah beerta uu ka soo baxo abtirsiga qabiilku. Waxayna tahay midda sheekooyinkaas naga qusaysaa sida ay Habar gidirtu ku sheekeeyaan ee ah:

Odaygii Hiraab ahaa ayaa intuusan dhiman dardaarmay. Hase ahaatee dardaarankiisii waxa uu noqday in uu uga tago midkaste oo inamadiisii ka mid ah habaar dhaxal gal ah. Waxayna taasi ku timid ka dib markii ay ku dhega adaygeen oo ay fudayd dhallin yaro awgeed ka diideen talooyin iyo awaamir fara badan. Waxa uu ku yiri:

Aar maandhow Mudullood (hadda waxaa loo yaqaan Abgaal) dhaanka dhaami? Mudulood waa ka diiday. Odaygiina waxa uu uga tagay habaar ah: "Taran oo Tanaad, talse ha isku raacin". Mar kale ayuu odaygii gabankiisii Madarkicis (hadda loo yaqaan Habar gidir) ahaa ka codsaday in uu dhaamiyo. Hase ahaatee isna waa diiday. Markaa ayauu ku habaaray isna " Col aan damin iyo Iimaan darro Alle kugu rar". Maxamuud Hiraab ayuu hadana weydiistay in uu dhaamiyo. Isna waa diiday. Markaa ayuu ku habaaray "Ha tirmin hana tarmin". Ugu dambaystii ayuu Martiile (hadda loo yaqaan Shiikhaal) ku baryey dhaankii (yeelyaa iyo diidyaa lama caddayen weli).

Isla qisadaan qiso la mid ah waxa ay caan ku tahay taariikhda Daaroodka. Waxa ay dhahaan in uu Duqii Daarood ahaa gaboobay markaa uu damcay in uu imtixaano wiilashiisii si kooda ugu caqliga wanaagsan ugu wareejiyo mas'uuliyadda reerka. Wuu isugu yeeray, wuxuuna u sheegay in uu col culusi (kolley Hawiye) baalka ku soo hayo reerka uusan haynin awood uu ku kaco (iska daa mid uu ku dagaallamee).
Talo ayuu nin walba ka sugay. Yuusuf Daarood oo isu haystay nin ku firfircoon talo bixinta ayaa la soo booday in la qaxo oo weliba meesha looga cararo maatada (ka kuditaanku waa u caado Daaroodka ilaa hadda). Duq Daarood uma bogin taladiisa waxa uuna ku habaaray; " Allow Ur Ubixi…).
Tanade Daarood (hadda loo yaqaan Leel kase) oo dhab ahaantii fariid u muuqday ayaa isna ku taliyey in fadhiga loo gogol badsado oo dumarka la qabo laga qayba galiyo talada (xaasasku koley waa Hawiye). Hase ahaatee duqii aad buu uga soo hor jeestay taladaas, waxa uuna ku habaaray "Taladaada tafa naagood Alle geli".
Kablalax (hadda loo yaqaan Ogaadeen iyo Harti. Wixii ka horeeyey dagaaladii sokeeyey ee dalka waxay kala ahaayeen Hartidu: Majeerteen, Dhulbahante iyo Warsangeli) oo u muuqday wiil mucaarado badan ayaa taladii dood iyo muran ka saari waayey, tiiyoo uusan wax talo ahna haynin. Markaa ayuu isna ku habaaray "In aad is ciisho mooyee yaan lagu ciilin.
Ciise Daarood oo iska miskiin ahaa waxa uu ku taliyey in la is dhiibo. Markaa ayuu isna ku habaaray "Hana tirmin hana tarmin".
Markii dambe Sade Daarood (hadda loo yaqaan Marreexaan) ayaa soo jeediyey fikrad ah; in rayidka gudaha la soo gashado la iskuna difaaco bartaas intii tabartood ah, dee markii la laayana ay arkaan uun. Isna odaygii uma bogin, wuxuuna ku

habaaray " Afar dhuumood dhexdood Allaha ku geliyo markaad nafta u yaabtana Allaha kuu yasiro".

Shaki kuma jiro in ay sheekooyinkani ugu yaraan yihiin kuwa ay odayaashu ugu sheekayn jireen wiilashooda dhallinyarada ah si ay iyaga u adeecaan. Haba iska suurto gal ahaato in ay mar uun ku dhacday qoys jiray, laakiin waxa aan marnaba suurto gal ahayn sida loo sheego.

Bal aan is weydiinee, inkastoo aan shaqo ka weyn dhaanka la haynin, hadana maxaa kulli qiso kaste ku soo arooriyey dhaanka? Inkastoose aan gabdhaha dad ahaan loo tirsanin, maxay hadana marna uun gabadhi usoo geli weyday sheekada? Inkastoose dadka deegaanku iska yaraa, meeye dadyowgii kale ee kula noolaa geyiga? Haddayse keligood ahaayeen maxaa keenay cadawyada iyo tartanada dhaqaale, iyo guud ahaanba ceelasha loo aroorayo?

Aan usoo noqono mawduucee, qaybta ugu weyn ee Dudublaha ka mid ah ee lagu magacaabo Adan TuurCadde waxa ay in muddo ahba ku andacoonaysay in ay ka timid qabiilka konfurta dega ee la yiraahdo "BaadiCadde". Laakiin si loogu diido sheegashadaas reer Tuurcadde waxa la keenay dood ah in Baadicaduhu gebi ahaantiisba ka baxsaday Dudublaha beri hore oo markaa qaybta Aadan Tuurcadde ee ka tirsan Baadicaduhu ay tahay gobol ka lumay reer Aadan tuurcadaha ka midka ah Dudublaha. Ka dibna Baadicaddihii ayaa isna ku soo dooday in Dudublahan la sheegayaaba uu gebi ahaantiisba ka yimid xagga baadicadde. Murankaasina waa mid ilaa maanta sidaa utaagan oo aan la xallinin.

# SHIIKHAAL.

2- Shiikhaal; inkasta oo ay weli dood ku jirto cidii ay ka mid ahaayeen dhawr sano ka hor, waxa ay mar haatan afar sano laga joogo, 1992 kii ku biireen liiska Hawiyenimada, halkaas oo lagu daray qaybihii cusbaa ee loo qaatay ururka Habargidirnimada. Ka dib marki ay wacad la galeen qabqabliha dagaalka ee guntiga dhiisha isaga dhigay sidii uu Habargidir cay uga dhawri lahaa (Caydiid).

Aniga oo muran ka dheeraanaya aan ku weydiiyee weligaa ma aragtay nin lagu magacaabayo Shiikhaal, mase is weydiisay magacu ma keli baa mise waa koox (jamac)? Waxay ila tahay in aan nina wiilkiisa u bixiyeen Shiikhyada isagoon hubin waxa uu noqon doono iyo halka uu ku dambayn doono, waxaase hubaal ah in is qabiilaysiga Soomaaliyeed uu intiisa badani ku dhisan yahay saaxiibtinimo iyo isku ardaynimo (isla xeraysi),

Sidoo kale inta badan waxay ku abtirsadaan Sheekha wax barayey ama kan ugu dhaw ee deegaankooda ka faafinayey diinta. Sidaa darteed waxaan laba is weydiinayn in Shiikhaali tahay arday kutub ka wada raacan jirtay hal ama laba sheekh. Waxay taariikhdu taageeraysaa in ay yihiin xertii laba Sheekh oo kala ahaa Awqudub iyo Loo boge, sal dhigooduna ahaa galbeedka Soomaaliya.

Sheekh ku abtirsashaduna waxay ka ahayd Soomaaliya iyo wadamo kaleba wax la isku qadariyo waayo nin walba wuxuu doonayey in magiciisu ka soo jeedo meel sharfan si uu bulshada uga helo sumcad iyo nolol qadarin leh, waxaadna taas ku garanaysaa in maanta la helayo qaruumo kala duwan oo wada sheeganaya Shiikhaal iyo in ay ka soo farcameen Abuubakar Sadiiq, tusaale;

Waxaa degan magaalada Buusiya ee ku taal xuduuda kenya iyo Ugand qabiil la yiraaho Abuubakariya oo Afrikaan ah, kuwaas oo sheeganaya in uu Abuubakar dhalay. Hadaba waxaa hakad iyo calaamad su'aal ku sugan Abuubakar ku fir sheegashada Shiikhaaleed iyo weliba isla dhalashada dhexdooda ah. waxayna sheegashadoodaasi ka hor imaanaysaa waxyaalo badan oo waaqici taagan ah sida;

Is khilaafka dhexdooda ka dillaacay oo kale, kaasoo ah; in Reer Aw xasan, qayb weyn oo ka mid ahayd ay dhawaan cadaysatay ka bixitaankooda iyagoo sheegtay in ay ka madaxbanaan yihiin aysan markii horena la dhalan,

Inkastoo ayse Reer Awxasan deegaanada qaarkood toos uga madax banaan yihiin Shiikhaal hadana weli meelaha qaarkood waxay ku hoos jiraan maamul Shiikhaaleed, oo waxaa weli ka dhexeeya dagaal xornima doon ku dhisan. Waxaa kaloo iyana ka hor imaanaya sheegashadoodaas tan cusub ee Hawiyenimo iyo in ay beryahakan dambe ka gilgisheen sheekhnimadii oo ay u arkeen ceeb dib u dhac ah iyadoo ay burcadoodu isku magacawday (Aakhira moog).

Waxaa kaloo ka hor imaanaya sheegashadaas cadaynta loo hayo in ay dadkani ka mid ahaayeen dadkii xuduuda Itoobiya weligood deganaa ee ay ku baxday Ooga dageen, waxaana la yiraahaa (Ab iyo Ogaadeen). Meelaha qaarkoodna waxaa looga yaqaan (Ogaadeen jimce dhashay), taasoo loola jeedo xagga wadaadnimadooda iyo in ay yihiin uun xubin ka mid ah Ogaadeen. Waxaa laga sheegay oday Isaaq oo ah deriska Ogaadeen iyo Sheekhaal in uu yiri: “Ogaadeen la barayoo Sheekhaal baa ugu dhib badan”. Taas oo uu ku cabirayey sida aysan Ogaadeen iyo sheekhaal ugu kala duwanayn dhan walba.

Waxaa kale oo baaritaano badani cadeeyeen inay reer Awqudub ka so jeedaan faraacinadii hore, magaca Aw-Qudubna waxaa laga wadaa “Aal Qibdi” oo ah qoysas ka soo fakaday qabiilkii Fircoon ee ka jiray Masar oo ku soo qaxay geeska Afrika. Waxaana arintaas xaqiijinaya calaamada ay reer Aw-Qudub ku dhigtaan geeladooda oo ah isla tii calanka Faraaciinta iyo weliba isku tallaabta ah calaamada Masiixiyiinta.

Isku soo duuduube tani waxay la mid tahay tan dhawaanahanba ka socotay dalka ee ah (hebel waayo? waa Akhwaanul-muslimiin), waa uun xer, sheekh, iyo intii ku kaalmayn jirtay ee ay wada cunka iyo wax wada qabsiga lahaayeen, taasina ma xuma oo weyba dhaantaa hababka ay kuwa kale isku aruursadeen, waxaana kuu cadaynaya taas in Shiikhaali sheegato in ay qaarkood ka soo farcameen Sheekh Yuusuf Al-kowneyn,

Waxaana la wada ogsoon yahay in Sheekh Yuusuf keliya carigaas u joogay muddo yar diin faafis darteed, ka dibna uu u wareegay xagga Boorame, oo ay Geda biirsayna sheegtaan in uu iyaga ka mid ahaa, waxaad kaloo arkaysaa in Shiikhaali ay weli ku jirto qola kaste sida; Sheekhaal Awqudub waa Ogaadeen, Sheekhaal Loo bogay waa Hawiye, Sheekhaal Gandarshe waa reer xamar, Sheekhaal Jasiira waa dadkii degenaa xeebta Jasiira. Waxaad war isaga deysaa in ay beryahan dhawaato soo badanayaan jifooyinka Sheekhaaleed oo kuwada salaysan deegaan, tusaale: Sheekhaal Dharkeenley oo la soo allifay 1991 kii.

# *HIRAAB*

## 3. ABGAAL

Abgaal, waxay isugu abtiriyaan in ay yihiin; reer Hiraab, laakiin waxa ay su'aali ka taagan tahay habka ay ugu arooraan oo ah mid liiq liiqanaya, aanana la xasilin karin, waayo waxa aan la kala sugi karin asal ahaanba sida ay isu waafaqsan yihiin kooxda ilmo Hiraab ee kala ah; Mudulood Hiraab, Martiile Hiraab, Madar kicis Hiraab iyo kuwa kale oo ku sii lifaaqan, tiiyoo ay guud ahaanba dadka Hawiyuhu marba nooc u abtirsadaan iyaga oo mar galaya; Hawiye, marna Hiraab, marna Samaale, marna Irir, marna Gurre, marna Gorgaate, marna Dir iyo siyaabo kale intaba waa la sheegaaye.

Magacan Abgaal asalkiisu waa fir- gaal, wuxuuna ku baxay waayadii ay wadanka iska daba imaanayeen ajnabigii ka soo caga dhigan jiray soone Banaadir, halkaasna waxay soo dhaweyn kaga heli jireen dadkii deegaankaas oo isku qas ahaa, waxayna u la dhaqmi jireen si Aadaminimo toosa ah.

Haddaba taasi waxay shacabkii soomaaliyeed ee kale ku dhalisay xanaaq ay kaga xumaanayaan ajnabiga la soo dhaweynayo, sidaa darteed dadka Soomaaliyeed oo ahaa dad aan weligoodba lagu dhex noolaan karin hadaan qolo lagu tiirsanayn, tan kale qofkaan qabiiladooda ka mid ahayn u haysta in uusan diin lahayn kuna tilmaama Gaal, waxay dadkii ajnabiga soo dhaweeyey ku caayeen in ay yihiin fir gaalo ka soo jeeda, iyagoo ku leh abkiinii horaa gaala ahaa (Abgaal),

Taas waxyaalah ugu horeeya ee cadaynaya waxaa ka mid ah in maanta qofka Abgaal ihi uu weli maanka ku sii hayo ciddii uu asal ahaan beri hore ka yimid. Tusaale ahaan, jilibka loo yaqaan Macallin dhiblaawe oo horay uga yimid qabiilka Daaroodka ku tirsan ee la yiraahdo Majeerteen waxa ay weli ku adkaystaan oo ay gocdaan marka ay qoonsadaan Abgaalka intiisa kale dhalashadii hore ee Majeerteenimada. Sidaas si la mid ah Warsangeli oo aan iyagu weliba iska badelin magicii ciddii ay ka yimaadeen ee ahayd Warsangeli Daarood waxaa weli ka muuqda faquuqnaan iyo dabataagnimo. Waxa ay inta kale ku ximiyaan bah gooni ahaan, iyagoo dhahaya Warsangeli waa reer Waqooyi. Taas oo macneheeda loola jeedo in ay markii horeba waqooyi ka yimaadeen. Xataa lafaha hoose ee ay ka sii yihiin Warsangeli isla sidii ayey weli uga sii jiraan Warsangeliga Abgaal.

Dadkaas oo weliba la takooray waxaa dadkii dib dambe uga tagey lagu eedayn jiray in ay ku biiireen gaaladii iyo gaala la jirayaalkii, markaa ayaa lagu naynaasay (Gaal gale).Sidaa awgeed ayaad maanta dadka Abgaalka ah ka garan kartaa ku walba asalka uu ka soo jeedo marka aad ka eegto xaga dhaqanka iyo midabka.

Abgaalka waxaa ku jaal ah oo ay isku abtirsadaan dhawr qabiil ooy ka mid yihiin: Udeejeen, Mobilen, Wacdaan, iyo kuwa kale. Haddaba iyaga qudhooda ayaa waxa u badan dadyow ka soo farcamay Ethiopia. Tusaale, sanadkii 1903 dii ayaa dawladdi Xabashidu go'aan ku gaartay inay isku soo ballaariso xeebaha Soomaaliya si aan wadan Soomaaliya la dhaho looga goynin. Weeraradii ay soo qaadeen ayaa waxaa ugu weynaa kii la magac baxay Tayteynley oo ka dhacay magaalada Balcad. Halkaa ooy Xabishu rabtay inay ku qabsato Muqdisho ayaa waxaa ku jebiyey qabiilka Mobileyn. Halkaa waxa lagu soo qabsaday kumanaan Ethiopian ama Xabshi ah waxayna maanta dadkaasi ka mid yihiin oo ku dhex farcameen Abgaal iyo Mobileyn.

## 4- MURURSADE

Mururursade, waxa ay kooxdani iyaguna ku abtirsadaan Hiraabyada marba kii ay la noqoto, waxayna taas kala mid yihiin guud ahaanba jaallayaashooda kale ee aan soo xusnay.

Waxaana la sheegaa in Magaca Murursaduhu ku yimid dadka qaraabsigooda ku hela habka indha sarcaadiska ama qori-ismariska, taasoo marka si kale loo oranayo la dhaho; Afar qooble oo loola jeedo (bahal is ka dhigid). Waxaa kale oo la sheegaa in uu magacu ugu baxay habeen miradka iyo habeen wax dhaca, oo ahayd in loo yaqaanay dadka habeenkii wax dhaca (Murruqsade) ugu dambaystiina isu badelay (Murursade).

Marka gudaha loo sii galo Murursadaha waxaa la helayaa in ka kooban yihiin dhawr qabiil oo kala duwan sida; Ogaadeen, Abgaal, Mareexaan, Majeerteen iyo kuwa kale. Waxaaba loo kala qaybiyaa laba bahood oo la kala yiraahdo: Bah Ogaadeen iyo Bah Mareexaan, marka aan la isticmaalaynin labada magac ee kale ee iyagu u muuqda in lagu sameeyey si deg deg iyo ka fiirsi la'aan ah, ka dib markii loo baahday horayna laga soo qaban waayey magac kale. Labadaas magac waxa ay kala yihiin: Sabti iyo Foorculus. Ogow kelmada ama magaca "Bah" waa iska af Soomaali qayaxan oo ah "is bahaysi".

Waxaan garanyaa mar aan nin weydiiyey qabiilka uu yahay markaa ayuu reer hebel ii sheegay, waxan ugu war celiyey war sow adigii maalin hore reer hebel ii sheegtay? Wuxuuna iigu jawaabay; haa waa runtaa waxan umaleeyey inaad ka wado qabiilka aan ahay marka aan meel hebla joogo. Waxaa kale oo isoo martay in aan mid kale sheekadiisa ka dhex helay; aniga awoowgey waxa uu ahaa qabiil hebel laakiin anigu weligey qabiilkaa ma noqon. Laakiin aniga oo ninkii ku qoslaya ayaan isa soo xasuustay aniga qudhaydu oo awoowgey waxa uu ahaa marii cid ugu war dambaysay qabiilka la yiraahdo Galadi ee Digi iyo Mirif ka tirsan, ka dib markii uu kaga soo haajiray Mudug, halka ana aanan weligey qabiilkaa noqon.

Haddaba qabiilka la sheegaa waa shirkado, iskaashatooyin, asxaab, is bahaysi, isku xilfi, isla qaraabato, iyo ood wadaag. Tusaale; qabiilada ku dherersan xeebta u dhexaysa Muqdisho ilaa Kismaayo waa wada; reer Xamar, reer Iskaashato, reer Tol. Ama shanta caleemood, shanta, gamaas, shanta, culimo,

shanta shangaani, shanta aw xerow, shanta jasiira, iwm, oo iyaguna ka dhigan guutooyin.

Waxaa iska caadi ah in markii qoys uu barrin cidla ah soo dego u isla markiiba sheeganayey cidaha ugu dhaw ee ay deriska yihiin oo ay ka dhexaynayso quud iyo qaaraan. Taasi marka ay dhacdo qoyskaas ama qabiilkaas way dhacaysay in uu lumiyo magiciisii iyo qabiilkiisii hore wayna dhacaysay in uusan weli lumin ee la soo bixi jiray dhalashadiisa asalaka ah markii dambe ee loo baahdo.

# GUGUN DHABE IYO KUWA KALE.

## 5- XAWAADLE

Xawaadle, inkastoo ay guud ahaanba qabiilada Soomaalidu wada la'yihiin meel loogu soo hagaago ama lagu saleeyo, hadana Xawaadle gaar ahaan isaga ilaa hadda lama xaqiijin karo abtirsi toos ah oo lagu sheego, balse waxa uu marna galaa marna ka baxaa Hawiye, oo uu siyaabo kala duwan ugu kala abtirsado.

Waxaa la sheegaa in loogu baxshay Xawaadle oo macneheedu yahay (Xoog iyo xawad) dhallin yaro geelley ahayd oo si xoog ah ku qaadi jirtay waxay arkaanba, dabadeedna iyagu is biirsaday.

Dad kalena waxay sheegayaan in ay ahaayeen ardaallo carra jiif ah oo jidka u fariisan jiray markay Soomaalida badankeedu ka soo qaxaysay waqooyiga iyo bariga waddanka oo u soo geediga ahayd koonfurta dalka. waxaana ilaa hadda lagu yiraahaa qofka xoog badnida isku tuhma (xoog badanidaa maad xawaadle xoola u doonatid),

Taas oo ka timid markay dadkii hore ku oran jireen qofka awood is bida war hadaad tabar leedahay kaalay xooleheenii Xawaadle nooga soo dhici.

Haddii aan ku sii fogaano waxa la sheegayaa in ay qabiilka Xawaadlaha oo ku caan baxay dgaca geelleynimada, ka dibna loo baxshay Xawaadleyaal oo ah kuwii xoogga isticmaalayey sidatan soo socta:

Jilibka ugu madaxa weyn oo loo yaqaan Cali madaxweyne waxa ay asalkoodii ka yimaadeen sida la cadaynayo qayba ka mid ah Dir oo ilaa haddaa aysan labada magac is khilaafin, kuwii Dirtana waxaa weli la yiraahdaa Calimadaxweyne, kuwii Xawaadlahana waxa weli la yiraahdaa Calimadaxweyne. Sidaas si la mid ah jilibka kale ee Cabdalla waxa la soo cadeeyey in ay yihiin qayb ka mid ah jilibka la yiraahdo Cabdalla oo ka tirsan Ogaadeen. Ilaa maantana way jirtaa qaybtaas Cabdallaha ee Ogaadeen.

Waxaa kale oo jirta in beryahan dambe uu xawaadle ka baxay Hawiyenimadii oo cadaystay in uu madax banaan yahay, walow ay horay Hawiyaha kale ugu xaman jireen in uu Daarood yahay hadana weli Xawaadle cidna kuma biirin ee wuxuu ku adkaysanayaa in uu iskiis isu taago.

Mar aan walaalkey oo qolooyinkaan u dhashay kula dooday jiritaanka magacyadaan ay sheeganayaan, ayuu ii sharaxay

naynaasaha lagu dacaayadeeyo oo ay markaas doodeenu ku wejahnayd, waxaana hadaladiisii ka mid ahaa oraahyo caan ah oo ay mar hore ka dajiyeen arinta odayaasha qabiilku si ay xal iyo cudur daar ugu helaan hadal ceebeedyada lagu duro guud ahaan qabiilka gaar ahaanna laf laf, waxayna ahaayeen sidatan;

1. Xawaadle wacal ma ahan ee Hooyadiis baan la xirin (mehrin).
2. Murursade Dhurwaa ma ahan waase dheelmad badan yahay.
3. Abgaal dabbaal ma ahan waase caqli baddelan yahay.
4. H/Gidir Tuugo ma ahan waase Tulud eryataa (geelay boobaan).

## 6- JAJEELLO

Jajeello, inkastoo ay qabiiladoo dhan yihiin golayaal ay weli albaabadu u wada furan yihiin oo uu nin walbaa soo geli karo, hadana Jajeelo waa dadka ugu furan, waxaa magaca jajeelo marna la raaciyaa Hawiye marna Raxan-weyn. Asal ahaanse magucu waa dhulka ay dadku degaan oo ku caan ah geedka Jajeelada lagu magacaabo.

Qaybo ka tirsan qabiilkaan Jajeelaha ayaa dhawaan dib usoo gocday halkii ay beri hore ka soo askumeen sida la tixraacay. Tusaale ahaan jilibka la yiraahdo Yacquub, waxa ay ku adkaysanayaan in ay ka yimaadeen Abgaal (inkastoo Abgaalka qudhiisaba uu muran culisi ka sii taagnaa). Sidaas si la mid ah qaar kale wayba isaga bexeen oo waxa ay ku kala biireen qolooyin kale sida Hadamaha oo ay ku biireen Sharmooge. Qaarna iyagu waxa ay doondoonayaan madaxbanaani ka dib markii ay dareemeen isku filnaansho.

## 7- XASKUL HAWIYE

Xaskul Hawiye, inkastoo midaynta iyo isu keenista reerahan la bilaabay waqti aad u dhaw hadana waxaa mar horeba magaca Xaskul lagu naynaasi jiray dadkii dan yarta ahaa ee ku noolaa gobolka Baareey iyo nawaaxigiisa oo ga ganacsan jiray Xaskusha oo ay ka soo guraan dhulalka fog-fog, ka dib ayey qaarna iyagu ka unkumi jireen Maacuun qaarna beec geyn jireen iyadoo ceeriin. 1990 kii uun bay ahayd markuu Caydiid kula dhex dhacay qayla dhaanta iyo habar wacadka una baxshay Xaskul Hawiye.

## 8- KARINLE HAWIYE

Karinle Hawiye, waxa uu magacani kaga baxay isla geyigaas dadkii dharka toli jiray iyo kuwii hargaha magdayn jiray waayadii ilbaxnimada cusub ka hor, isla waqtigaas ayuuna Caydiid isla qayla dhaantaas ku mideeyey kagana soo saaray Karinle Hawiye.

# DEGOODI.

9- Degoodi, waxay si aan caddayn ugu abtirsadaan Hawiye, walow la arko in ay mararka qaarkood ku abtirsadaan Boorane, Itoobiya.

laakiin si kastaba arintu ha haatee waxaa qisooyin la soo aruuriyey ay isaga markhaati kacayaan in mar haatan laga joogo in ka badan boqol iyo dhawr sano ay dad badani ka soo qaxeen dagaallo faraha la isaga gubtay oo ay wadeen burcad iyo dooxatooyin aan maal iyo moodba reebayn oo ka socday gobolada waqooyiga, bariga iyo bartamaha waddanka.

Haddaba dadkii iyaga ahaa oo iska soo daba habaqtamayey ayaa soo galay gobolada Gedo ilaa iyo Wajeer iyo ilaa iyo Nageyle, waxayna socdeen qaxootigaasi ilaa sanadkii 1958 kii oo ay dadkaasi u yaqaanaan Jimcadii Wajeer degga, waxuuna xoogga dadkaasi soo degayey sanadkii 1893 kii, oo loo yaqaan gugii Gulnat Soran Sora, eeg Almanik, kenya, xornimadii ka hor.

Haddaba soo degitaanka dadkaas cusub oo wax ka badeshay dhaqankii deegaankii hore ayaa la oran jiray ciddii soo degtaba waa soo degoodi oo la mid ah waa soo gelooti ama Galti. waxaa kaloo la yiri, waxaa loo baxshay Degoodi markay caadaysteen in ay soo dhaweeyaan dadkii dambe ee dib ka imaanayey, si ay iyaga u xoojiyaan oo ugaga hiilliyaan dadkii deegaankaas oo ciilay,

Sidaa ayaa lagu yiri waa soo degoodiye oo amcneheedu yahay dad kale ayey soo geliyeen. Si kastaba magacani ha ugu dhagee waxaa la hubaa in ay Degoodi ka kala yimaadeen dhawr qabiilo oo kala duwan, waxayna kala yihiin lafahooda iyo halkay ka soo kala jeedaanba sidatan soo socota;

1- Jibra'iil oo ah Ogaadeen.
2- Alla gumar oo ah Xawaadle.
3- Faay oo ah Shiikhaal iyo Ajuuraan.

4- Beydiisle oo ah Baadi cadde.

5- Masaro oo ah Asharaaf.

6- Cabud waaq iyo Jid waaq oo ah Ogaadeen iyo Caruuse.

7- Fardaano oo aan ilaa hadda meelna lagu caddayn karin loona malaynayo in ay yihiin dadkii soo wada dhaweeyey.

# MURALLE

10- Murrale, sida ay dadka ku jira qabiilkani ku andacoonayaan waxay ahaayeen dad asalkii hore ka mid ahaa qabiilka la yiraaho Jidle, waayyo dabadeedna hoos galay Marreexaan oo ay waa dhaw ka madaxbanaanaadeen, 1990 kii markii lagu ol-olaynayey Hawiye aruursiga oo dadyowga faraha badan laga soo buuxinayey Hawiyahana waxay qaateen Hawiyenimada.

Su'aashuse waxay tahay Jidle qudhiisa oo la is weydiinayo halka uu ka yimid iyo cidda uu ku tirsan yahay iyo iyada oo dadka tirada yar ee laga helo Hiiraan qudhoodu aysan sugi karinin abtirsiga la xiriira Murallenimada.

Midda kale ee doodu ka taagan tahay waxay tahay haddii ay ka fac ka fac ahaayeen Mareexaan dadka dhawaantan laga soo saaray ma asalkii Jidlaa mise waa Mareexaan? maxaase lagu kala garan karaa ama lagu kala duwi karaa oo la isku diidsiin karaa dad boqol sano iyo wax la mid ah isku dhex jiray?.

Si kastese arintu ha ahaatee waxaysan dantu dhaafaynin in la caddeeyo sidii lagu soo allifay Muranlle, waxayna ahayd sidatan soo socota;

1950 kii ayaa laba nin oo nasiib wanaag weli nool oon filayo in ay indhahooda ku arkayaan qoraalkan ay ka dooneen gumaysigii Ingiriiska jago, jagada keli ah ee waagaas u furnayd qof la gumaysanayana waxay ahayd in uu noqdo beel daajiye ama kaaba qabiil (Chief), taasoo ilaa maantaba aad loogaga tix geliyo carriga ay ciddani degto ee Mandera, Kenya.

labadaas nin oo la kala yiraahdo; Aadan Xirsi iyo Cabdi nuur Geesey oo asxaab kale wata ayaa hadaba si ay ugu helaan cod ku filan oo u suurtoobin kara jagada ay u sharexeen oo ah in ay u madax yihiin qabiil ka gooni ah kuwa kale ee jiray, waxay dad badan ka soo aruursadeen Mareexaan, Degoodi iyo qolooyin kale oo halkaa ka ag dhawaa,

Xoogga dadkaasina wuxuu ka soo jabay Marexaan, sababtoo ah in Mareexaan markaas ka baxsanaa maamulkaas ingiriiska oo loo gooyey dhanka Soomaaliya, uusanna si bareer ah uga

qayba qaadan karin doorashooyinka Kenya iyo iyada oo dadyowga kale ee carriga degenaa uu nin walba ugu shubayey qoladiisii oo ay ku adkayd in uu ka baxo ciddiisa. Waxaa ka mid ahaa raxanadii waagaas soo buuxshay xeradii ay ooteen Geesey iyo ina xirsi kooxdii Caalimow oo ka soo go'ay Degoodi.

Si kastaba ha ahaato sida ay isugu soo duubmeene waxaa dhacday in arintaasi ay dhalisay muran ka dhex dhasha dadkaas gooni u baxa noqday iyo dadkay ka baxeen, ka dibna markuu murankii dheeraaday ayey nimankii soo bar goostay dadkaan u baxsheen kooxdoodii Muranla', dadkii laga soo baxayna waxay u baxsheen Muranlle, waxay doodii socotayna wuxuu hadalkii isugu soo aruuray Muranle, dabadeedna waxaa luntay Ndii oo wuxuu noqday Murale.

# GARRE

12- Garre, sida ay aqoonsan yihiin qoraayaal badan oo soomaalida wax ka qoray dadka Garruhu waa dadkii hore ee loo aqoon jiray Hawiye, iyadoo la dhayo magaca ah Prehawiye. eeg; (East African Pastoralism, by; Lewis, iyo Bantu, galla, and som migrants in the Horn of africa). sidaa si la mid ah iyaguna wey aaminsan yihiin inkastoo aysan isku raacsanayn dhexdoodu, taasina waxay u noqonaysaa kala duwanaantooda ay qolaba meel ka soo jeeddo.

Waxaa la sheegaa in magacan Garre uu macnihiisu yahay Garle, taasoo ka timid markii la asaasay qabiilkaan oo la yiri; gar bay u leeyihiin in ay midoobaan oo qabiil samaystaan. waxaana la yiri; beri hore ayaa dad fara badan isaga kala yimaadeen dhinacyada Itoobiya, somaaliya, Suudaan iyo ilaa Jaad,

Gaar ahaanna qabiillada reer Itoobiya ee Boorane, Oroma, Gabre, Caruuse, Uraago, Gurre, Garramare, Gujji, Jajeelle, Gaal jecel, Isxaaq, Gedabuursi iyo kuwa kale oo fara badan oo soo galay kuna dhex faafay carradii iyadoon weli la garan sumad ay wateen. waqtigaas bilowgiisiina waxa uu qiyaastii ku beegnaa markii ay Soomaalida oo dhami ka soo qaxayeen carriga Itoobiya ee lagu soo jabiyey Jihaadkii Axmed Gurey.

Muddo ayey kala dhex xulayeen dadkaasi iyagoon wax aqoonsi ah lahayn xuduudaha; Itoobiya, Kenya iyo Soomaaliya ee maanta jira, laakiin duruufta iyo marxaladaha culus ee waqtigaas lagu jiray kama raalli noqon karin in qofna noolaado qabiil la'aan,

Sidaa awgeed waxaa bilaabatay in dadyowgaas kala firirsanaa ee isku tawaanta ahaa ay isa soo aruursadaan isuguna baaqaan midnimo iyo is dugsi qabiileed, taasna wey ku heshiiyeen iyagoo is dhaarsaday oo is tusay daacadnimo, ilaa maantana sidii ayey isu haystaan u ballankii u dhawraan inkastoo inta badan ay cid walba hoosta ka ogtahay halkay ka timid.

Waxay dadkaasi isu qaybiyeen laba koox, kala qaybsigaas oo ku salaysnaa qola walba xirfadeeda iyo waxa ay ku caan tahay, waxaana koox wadaado ahayd oo tufta iyo raatibka u akhrin jirtay loo baxshay Tuf, kooxdii kalena waxaa la isku

raacay in lagu sifeeyo tira badnidooda iyo sii tarankooda oo la yiraaho Quraanyo (tira badanaa ma quraanyaa)?. sidaa ayeyna maanta u yihiin laba lafood oo kala ah Tuf iyo quraanyo.

Inkastoo ay dadkani isu jecel yihiin in ka dhaw sida ay kuwa kale isu jecel yihiin ama isugu xiran yihiin, hadana dhawaanahan waxaa dhacday in kooxo badani ay salka sii gashadaan halkay maqleen in ay markii hore ka yimaadeen sida; Bursini oo shiikhaal isku dartay 1993 kii oo kale. laakiin waxaa taas qarinaya isu daacadnimada inta weli is haysata, sidoo kale waxay kaga horeeyaan soomaalida kale dad soo aruursiga oo albaabkoodu aad buu u furan yahay, waana lagu soo dhaweeyaa nin walba isagoo si dhab ah markiiba u helaya xuquuqda wadaniyiintii hore oo kale.

# WAA MAXAY DIGIL IYO MIRIFLE (Raxanweyn)?.

Digil iyo Mirifle iyagu marnaba ma inkirsana in ay yihiin ururis ka kala yimid dhinacyada Soomaaliya oo dhan, laakiin is haysadkooda iyo isu daacadnimadooda ku dhisan ballan iyo axdi dhawrka ayaa kaga xoog badan kala daadad ku dambeeya fashal iyo macna la'aan, waxaana marka loo dhaba galo laga fahmi karaa in ay kaga ilbaxsan yihiin xaga qabiilaysiga inta kale,

Taasina waxay u noqon kartaa khibrada dhib iyo rafaad ee ay ka soo mareen taasoo ah tan isugu keentay deegaanka ay ku wada nool yihiin imminka oo ku midaysay iyadoo uu nin walba toos uga baxay cidduu horay u sheegan jiray, sidaa darteed waxaan filayaa in hab dhismeedkooda qabiileed uu tusaale u noqon karo hab dhismeedka qabiileed ee inta kale.

Inkastoo laga yaabo in la xujaysto in ay ku kala duwanaan karaan waqtiyadooda oo kala dambeeyey awgeed, hadana dhan kasta oo laga eegaba tani waa daliil cad oo ayidaysa in qabiilka Soomaaliyeed ku dhisan yahay ku tiri ku teen, uuna yahay shirkado iyo iskaashatooyin danwadaag ah.

Qoraayada ajnabigu waxay badankoodu ayidayaan gooni uga saaridda Digil iyo Mirifle xerada Soomaalinimada, oo waxay leeyihiin in loo kala baxo Sab iyo soomaali. I.M.Lewis, wuxuu qoray ( waxay kala yihiin Sab/Raxanweyn iyo Soomaali, waxaana sab loogu baxshay Raxanweynta beera falashada oo lagu yasayo awgeed). Wuxuu kaloo sheegayaa in Raxanweyn ay iyaguna sheegtaan in ay ka soo farcameen Caaqil Ibnu abii Daalib, oo ay yihiin Qureysh. eeg; "*Sufism in somaliland"*.

laba macne ayaa la isku raacsan yahay in uu midkood ka yimid magaca Raxanweyn,waxayna kala yihiin; Raxan weyn (reewin)oo loola jeedo raxan ama kooxo dad ah oo is bahaystay, iyo Raaxa weyn oo loola jeedo dhulka oo lagu amaanayo beerihiisa iyo nimcadiisa lagu raaxaysan karo. laakiin tu kaste oo la yiraahaba waxaan la isku diidanayn waa in la isu yimid isku cidna la noqday.

Hadaan sii fur furno habka uu midowgaasi u dhisan yahayna waxaa haboon in marka hore aan ka soo qabano labada lafood ee ugu waa weyn ee kala ah; Sagaal iyo Sideed, waxaa la yiri mar lagu heshiiyey in koox koox loo nolaado korna la iskala jiro ayaa la is weydiiyey magacyadii lafaha hoose loo

kala bixin lahaa. Markaa ayaa la soo jeediyey kooxda sagaalka nin matalayaana waa Sagaal, kooxda sideedana waa Sideed.

Hadana kala goobeyntii iyo kala beelayntii reer magaalnimada ku dhisnayd intaa laguma ekayn ee waxaa la bixiyey laba magac oo kale; Digil iyo Mirif. Nidaamkaan gobolaysiga ama Federaalka ah waxaa lagu saleeyey in todobadii reer ee istaagi kartaba magac loo bixiyo. Todobada Digil waxa la isku raaciyey jifooyinka kala ah: garre, dabarre, tuni, geeladle, jiiddo, begedi, iyo Geladi. Ayaamahana waxaa iskaashatadaas ku soo biiray xooga cusub ee loo bixiyey Shanta Caleemood.

Si aan fahamkaas u sii bayaanino waxa ala yaab leh in xataa kuwa isla dhashay laakiin deegaan ka juqraafi ahaan ku kala durugsanaa ay isku raaci waayeen magac bixintaan. Tusaale: Geladi iyo Gasaaragude waa isla dhasheen, hadana midna waa Digil midna waa Mirifle.

Laakiin taa qudheeda hadaan sii kala saarno waxaa inoo soo baxaya laba madax oo sare kalana ah; Hadamo iyo Liisaan, sidaa darteed waxaysan naga fursanayn in aan iyagana sii kala falanqayno si aan biya dhaca u gaarno.

## HADAMO

Hadamo, wuxuu ku baxay magacu, ka dib markii heshiis lagu galay in la walaaloobo oo kulli la isku abtirsado ayaa la is weydiiyey magaca qabiilka la wada sheeganayo, markaa ayaa la isla gartay in loogu magaca daro geedkii hoostiisa lagu qabtay shirka oo ahaa geedka weyn ee Hadamo ee ka baxa caradaas Xudur ee dadkaasi degaan.

Laakiin waxaa iyana mar kale la is weydiiyey magacyadii loo kala bixin lahaa lafihii hoose, waxaana isla fadhigiiba ka soo if baxday sifo lagu tilmaami karo qola walba sida;

Nin baa hal geel ah ul ku dhuftay markaa ayaa lagu ceebeeyey taas loona baxshay isaga iyo qoladii uu ka mas'uulka ahaaba Gaal boorre, kii ka xumaaday ee ka dhiidhiyey hasha la garaacayna waxaa loo baxshay isaga iyo dadkii uu matalayeyba Gaal jecel, ku kale oo goobta shirkaba isaga maqnaadayna waxaa loo baxshay isaga iyo intuu u odayga ahaaba SHirmooge.

Hadaba kuwani waa liiska jilibyada hoose ee Hadamo iyo jilib walba cidda uu asal ahaan u ahaa, ilaa maantana dusha kala socdo inkastoo ay isu daacadnimadoodu kala weyn tahay.

1- Waanjeel oo  Gaal jecel ah.
2- Shirmooge oo Jajeelo ah.
3- Khamiisle oo Ogaadeen iyo Abgaal isugu jira.
4- Liksi oo Iidoor ama Isxaaq ah.
5- Gaal boorre oo Ogaadeen ah.
6- Reer Xasan oo Mareexaan,  qaybtiisa reer Xasan ah.

# LIISAAN

Liisaan, sidaa si la mid ah wuxuu magacanina ku yimid, ka dib markay dadkii deegaanku ku heshiiyeen in ay isku wada cid yihiin ayey is weydiiyeen magicii loo bixin lahaa qabiilkooda. Ugu dambaystiina waxaa la isku af gartay in lala baxo magaca laan qalalan oo la soo gooyo lagana taago dhulka,
taas oo hadii la arko iyadoo qoyan marka berri loo soo noqdo la ogaanayao in heshiisku daacad yahay lana hir gelinayo, hadii berri loo soo noqdo iyadoo qalalana la ogaanayo in laqdabo meesha ku jirto oo ay qolo khayaano wadato, sidaa darteed berridii ayaa la isugu soo noqday goobtii mise laantii waa qoyan tahay,

Halkaa ayaa lagu aqoonsaday qabiilkii la isku af gartay dhisidiisa, waxaana dhidibada loo asaasay qabiil loogu magac daray laantii (Liisaan), laakiin waxaa hadana la is weydiiyey



magacyada loo kala bxin lahaa jilibyadii hoose, taasna waxaa ugu dambaystii la isku raacay in la yiraaho;

Inta degan dhinaca qorrax ka soo bax ee laantana ha loo baxsho Qorraxsin (Orsi), inta degan bariga laantana ha loo baxsho Bari. Sidaa ayeyna ilaa maanta ku yihiin qabiil la yiraaho Liisaan oo u kala baxa Bari iyo Orsi.

Intaas oo keliya ma ahan dhismaha Raxanweyn ee waa ciidaasoo kale oo lama soo koobi karo, kulligoodna way is ogyihiin in ay ka kala yimaadeen qaybo kale oo ay heshiiyeen, welina lama arag iyagoo dhexdooda iska soo horjeesta ama is ximiya inta midaysani,.

Waxaan maalin la kulmay odayaal aad u murugaysan oo ka mid ah qabiilka Yeentaar ee Raxanweyn, ka dibna anoo aad ula xumaaday ayaan weydiiyey waxa ku keenay murugta iyo muraara dillaaca intaa la eg, markaa ayey iigu jawaabeen wuxuu dagaalka Hawiye naareedku (Hawiye naareed waxay u yaqaanaan Daarood iyo Hawiye oo la isku daray) na baray fool xumooyin aan weligood na soo marin, waxaan sii weydiiyey wax ay yihiin fool xumooyinkaasi, markaa ayey ii sheegeen in ay tahay;

In ay ka koobnaayeen sideed fadhi (beel) oo afarna Hawiye ahayd afarna Daarood, kuwaas oo ay u kala weynaayeen labada jilib ee kala ah; Qulane oo ahaa Ajuuraan iyo Madherow oo ahaa Geri koombo.

Haddaba waxaan dareenay in cilaaqi ay na dhex taal oo aan isu kala ximinayno Hawiye iyo Daaarood, tiiyoo ay dhacayso in marka ay Daaroodku na qabsadaana ay kuwii asalkoodu ahaa Daaroodku la heshiinayaan oo ku dirayaan kuwii kale, markii ay Hawiyuhu na qabsadaana ay kuwii uu ahaa Hawiye asalkoodu ay raacayaan.

# DIGIL DAYEYAAL

## Biya maal.

**Qoladani** waa kalluumaysatadii beri hore jirtay oo waa dambe u kala leexatay beero iyo xoolo, ka dib markii lagu caayey kallluumaysigii, waxayna ahaayeen shaqaale iyo xoogsato ay dani isu keentay. Waxa dib ka soo cadaatay in ay ka soo firdhadeen dhulka Waqooyi galbeed, halkaas oo ay magangelyo siyaasadeed iyo deegaamaynba ka heleen kooxo markaas ku abtirsanayey Dir. Laakiin badankoodu dib dambe ku kala biireen qolooyin kale ama gooni isu taageen. Si aan taas ugu cadayno qoraalka waxaan iyagana tusaale uga soo qaadanaynaa in lafaha hoose ee ay usii kala baxaan ay weli sitaan magacyadii cidihii hore ee ay kakala yimaadeen.

Qabiilka Biyamaal waxay sheegtaan inay soo hoos galaan dallada Dir oo iyadu ah mid aad uballaaran lagana isticmaalo dhamaan Geeska Afrika siiba Ethiopia. Waxayna jifooyinka qabiilkani ukala baxaan sida soo socota: Sacad, Saleebaan, Ismin, Buraas iyo Dadow oo la sheego inuu adeerkood yahay. Haddaba afarta jifo ee loo kala saaray Biyamaal mid kasta oo ka mid ihi waa jifo mar kalana ka mid ah cido kale, tusaale: Buraas waa jifo ka timid Murursade oo weliba reer Suldaan ka ah. Sidaa oo kale jifooyinka Sacad iyo Saleebaan waxayba wtaan magacyadii ay kala yimaadeen Habargidir. Markii aan cilmi baaristaan samaynayey ayaan u tagey qabiilkaan oo damcay in ana waraysto Suldaankooda, markaa ayaa la ii geeyey nin Jareer ah. Waxan weydiiyey sababta uu isaga oo reer Baarre ama Jareer ah hadan ku xukumo qabiilkaan jileeca ah. Laakiin inta la igu qoslay ayaa la igu yiri; sow ma ogid in Biyamaal laba jifo oo midna jilic tahay midna jareer tahay ka kooban yahay?. Waxa aan weydiiyey sida ay hadab dadkaas kala nooca ihi ku wada dhasheen, waxana la iigu jawaabay sow qabiilka la sheegayaa iskaashatooyin iyo oori wadaag uun ma ahan?. Halkaana waxaa iiga soo baxay in magacyada qaarkood ay iska jiraan xilli kasta laakin ay dadka magacaas sheegtaa is badelaan oo ay mararka qaarkood dhacdo in cid magicii sheegata la waayo inta laga kala baxo cillado yimid awgood. Sidaa awgeed ay magacyo hore oo jiray maanta raad beeleen, kuwa cusubna la xiisaynayo dadka sheeganaya ay yihiin isla kuwii shalay magacii hore sheeganayey.

## Gaal jecel

**Qoladani** waa dhallin yaradii geelleyda ahayd oo lagu xifaalayn jiray in ay geela ujeclaayeen si xad dhaaf ah, ka dibna wuxuu magucu ku dhegay maalintii uu goobta shirka ninku hasha ku uleeyey ee uu ninka geelleyda ihi ka xanaaqay oo ka dagaallamay. taasina waxay keentay in geel raacyadii oo dhan lagu wada naynaaso gaal jec/geel jecel. ka dibna waxayba arintii isu badeshay in ay iyagii is biirsadaan oo qabiil noqdaan, geeloodana wada dhaqdaan.

Maanta oo ay ka soo wareegatay isu tagoodii mudo aan ka yarayn qarni iyo bar, waxa ay weli jilibayada hoose kala sitaan magacyadii jilibyadii qolooyinka kale ahaa ee ay kakala yimaadeen. Tusaale: Jilibka la yiraahdo Cawramaleh waqtiyo dhif ah oo ay duruufo lama huraan ah jiraan mooyee waxa ay sheegtaan in ay Majeerteen yihiin. Inkasta oo sheegashadoodaasi ay mar kale ka hor imaanaysa taariikhda samaysadka Majeerteenka qudhiisa, hadana waxa ay wararku isugu soo aruuri karaan in ay markii horena ka soo haajireen dhulka Bariga markii dambana ay ka mid noqdeen qolooyin loo tababarayey in ay qaataan magaca Majeerteenimada oo la doonayey in lagu faafiyo Koonfurta Somalia. Halkaa oo lagu qalqaaliyey dhawr qabiil oo degenaa dhulka Jubooyinka loo yaqaan in ay yihiin Majeerteen, gaar ahaan ay ka sii yihiin: cismaan Maxamud iyo Cumar Maxamud.

**Shanta Caleemood,** waxaa magacaan dhawaan laga soo saaray Wallan-weyn, waxaana ku aruuray dadkii aan markaa wax qabiil ah haysan iyo kuwa ka soo baxsaday qabiillo kale. Qabiilada isku bahaystay magacaan waxaa horay loo yiqiinay jifada Jambaluul oo ka tirsanayd Digil.

**Shanta culimo**, waxaa iyagana laga soo saaray Hiiraan dhawaan 1993 kii, duruufaha qabiil oo halkii hore ku soo noqday awgeed, waxaana ku aruuray magacan dadkii deegaanka ee qabiil la'aanta ahaa iyo kuwa ku caasiyoobay qabiiladoodii hore, iyo sidoo kale beelaha dhawaan laga sameeyey ee loo bixiyey “Shanta Shangani” oo lagu saleeyey deegaan. Taasi waxay kale oo la sii mid tahay beelaha laga abaabulay Muqdisho oo iyagana loo bixiyey “Beesha Banaadir”.

# ASHARAAF

Asharaaf; waa dad si gaar ah loo ixtiraamo oo ku dhibi dhista wadanka iyagoo halkay doonaan ka sameeya waxay doonaan, sida ay la qabaan kuwa kale oo fara badan kuna kala nool inta badan wadamada Islaamku ku badan yahay. Dadkani waxay sheegtaan in ay yihiin kuwa ka soo farcamay Nebi Maxamed NNKHA, in kastoo ay nasiib darro tahay in intooda badani ay ka lunsan yihiin marinkiisii, ayna garab marsan yihiin ujeedadii fartiintiisii.

Si aan uga sal gaarno sheegashadaas waa in aan is weydiinaa marka hore Nebi Maxmed NNKHA farac ma ka haraay? su'aashaas jawaabteeda markaa aan la beegsano Qur'aanka iyo taariikhda Islaamka, dad badani waxay ku qanacsan yihiin in uusan Nebigu wax farac ah ka tagin ha ahaato wax ka farcama gabadhiis ama wax ka farcama wiilkiise,

Waxay ku adkaysanayaan in uu Nebigu ahaa Macallinkii iyo Aabihii ummadda, sida ay xaasaskiisuba u ahaayeen Hooyooyinkii iyo Macallimiintii ummadda Muslimiinta ah.



waxayna taas u daliilsanayaan,;Aayadda qur'aanka ah ee uu ilaah ku leeyahay;

ماكان محمد أبا أحد من رجا لكم ولكن رسول الله وخا تم النبيين وكا ن الله بكل شيئ عليم

(Ma ahan (Nebiga) Muxamed ah Aabaha ruux raggiina ka mid ah, laakiin waa Adeegihii (Rasuulkii) Eebe iyo geban gebadii (khaatimidii) Nebiyada, Eebana wax walba waa ogyahay) Al-axzaab;40.

Sidaa ayey ku leeyihiin haddii Alle uu doonayo in uu farcan ka reebo Nebiga kama dili lahayn wiilashiisii oo dhan intaysan wax dhalin, sidoo kale eebe wuxuu ku sheegay aayadda in uu isaga wax naga ogyahay,

Taasina waxay noqon kartaa in hadii Nebiga dad ka farcamay ay nala joogaan ay nagu kibri lahaayeen iyagoo ku faanaya abtirsiiyohooda, taasina ay keeni lahayd isku dhac iyo diin ka faasiqid. oo laga yaabee in dad badani ay iyaga dartood uga carari lahaayeen Diinta.

Waxaana taa kaaga marag kacaya in iyada oo aan maanta wax huban la wada hayn ay culima badani ku tageen Imaamada (Madaxweynenimada) Muslimiinta ma qaban karo nin aan ahayn Aalu-Beyt, iyo in ay shiica iyo wixii la hal

maala oo dhami Islaamkii u garab marsan yihiin u danaanayn ay si indha la'aan ah ugu danaanaynayaan Aalu-Beyt ka.

Waxyaalaha la yaabka leh ee sida aan meer meerka lahayn ucadaynaya waxa ay Soomaalidu ilaa haatan aaminsanyihiin ee ay ka midka yihiin in: Ilaahay uu markii ugu horaysay abuuray qabiilka Nabi Maxamad ( waayo waxaa jira Xadiis taag daran oo aan lagu kalsoonaan karin oo sheegaya in wax Eeabbahay abuuro wixii ugu horeeyey ay ahaayee nuurka Nebi Maxamad (NNKHA) ka dibna uu dunidainteeda kale oo dhan ka sameeyey nuurkiisaas) , ka dibna ka farcamiyey Soomaalida oo ku abtirsta reer Qureyshka qudhooda (inkastoo aysan Soomaalidu dhexdooda libintaas isu wada ogolayn oo ay qolaba qolada kale ka riixdo iyaguna isku qoraan derajadaas la jeclaystay).

Bal haddaba akhristoow adoo caqligaaga isticmaalaya ma kula tahay in tafiirta ilaa heerkaas la iska kala riixanayo oo ay cid walba naf iyo maal uhurayso in ay si uun ugu dhawaadaan walow ay adeegayaal unoqdaan haddii laga reebi lahaa raad ku abtirsada Nabiga qudhiisa maanta meel laga joogi lahaa kibirkooda iyo santaaglayntooda, taas oo maalin walba fali lahayd waadiyaal dhaadheer oo ay ku qulqulaan dhiigaga Muslimiinta, iyada oo ay waxa ugu weyn



ee la isku laayaana ahaan lahaayeen dagaallo ba'an oo lagula jiro kuwa iska sheeganaya si ay isaga saraysiiyaan inta kale, markaa ayey cid waliba ku maagi lahayd cidda kale “anaga ayaa cidaas ehe idinku ha sheeganina”.

Taasna waxaa kaaga marag ah waxa ka taagan maanta dhawr wadan (sida Urdun iyo Moroco) oo guud ahaanba dadka ku nooli ay kuwada adkaysanayaan in ay si toos ah Nebiga ugu abtirsadaan welibana ay yihiin kuwii lagala dardaarmay in ay guud ahaanba dunida iyo gaar ahaan diinta Islaamka hogaamiyaan, lana weydiin doono iyaga oo ka mas'uul ah.

Waxaase iyana tusaale taas ka sii qaab daran ah in ay qaar ka mid ah wadamada Carbeed ee ku nool Khaliijka mamnuuceen in dadka aan u dhalan dalkooda aysan ku labisan karin xadhigga madaxa lagu duubto ee madow loona yaqaan cigaal, kaas oo ah dhaqankii hore ee Carbeed halka uu calalka loo yaqaan Tayka ay reer Galbeedku qoorta ku xirtaan. Sababtuna waxay tahay in la ogaaday in ay jiraan dad isugu ekaysiiya iyaga ku labisaashada xadhigaas.

Waxaase waxaas oo dhan kaaga tusaale dhaw nimanka ka dhasha dadka qabiil ahaanta ay qola waliba ku yasto oo intay markiiba mara cad soo xirtaan ku baaqa in ay yihiin Aalu-beyt ama Asharaaf ka dibna ku dullaysta sheegashadaas beenta ah ummadda inteeda badan.

Ku abtirsiga Faaduma Bintu muxamed, waxaa aaminsan dadka qaarkood, haba ahaato inta badane, kuwaasina waxa ay ku doodayaan in uu weli ku jiro ifkan farcankii Xuseen, wiilkii Cali bin abi daalib, in uusan xasan wax farac ah reebinse waa la isku wada raacsan yahay. Laakiin dadka faraca xuseen aaminsan qudhoodu kama hayaan wax ka badan abtirsi aad u gaabinaya, oo hal ka hal, kaasoo ah sidatan;

Xuseen wuxuu dhalay Zaynul-caabidiin keli ah, Z/cabidiinna Muxamed, Muxamedna Jacfar, Jacfarna Ismaaciil iyo muse, Ismaaciilna muuse. ka dibna sidaa ayuu farucu ugu sii socday si caga jiid iyo laan gaabnimo ah.

Hadaba su'aasha in la is weydiiyo mudani waxay tahay abtriskaas hal keliyaalaha u dhacayaa ma noqon karaa mid ay ka farcmaan nooc kaste ee ka mid ah aadanaha dunida ku jira? waayo hadaad tagto goob kaste oo ka mid ah Carab waxaad arkaysaa quruumo sheeganaya Abtiriskaas,

Sidoo kale meel kaste oo ka mid ah Afrika waxaad ku arkaysaa malaayiin sheeganaysa, sidoo kale Aasiya iyo yurub intaba waxaa ku sheeganaya dad kaga gedisan dadka Carbeed dhan walba oo laga eego.

Waxase la yaab leh dadka Soomaaliyeed ee halkaa isku ciriiriya waa dad la yaqaan intooda badan qabiiladii ay ka soo kala yimaadeen hadana waxaa looga cabsadaa in ay yihiin ilma Rasuul awgeed. waxaad in badan maqashaan Asharaaf Ogaadeen, asharaf Hawiye, asharaaf Raxanweyn, sharaaf reer Xamar, iyo Asharaaf cid walba.

## KUWA KALE

Qabiilada soomaaliyeed ma ahan intaa aanu isa soo saar saarnay ee waxaa jira kontomeeya kale oo ka madax banaan aanana la saari karin kuwa aanu iminka xusnay, waxaa kale oo jirta in magacyada qabiilada Soomaaliyeed ay marna dhuuntaan marna muuqdaan, taasoo keenta in magacyo qabiil oo xilli jiray ay lumaan xilli dambe iyadoo ay ka soo kor marayaan oo daboolayaan kuwa kale oo cusub.
Taasina xujjo uma noqon karto in qabiilada qaarkood ay dabar go'aan oo ka cirib tirmaan adduunka ee waxay xujjo u noqon kartaa in magacyada la isticmaalo la iska baddelo oo marba hab cusub loo qaato, taas oo ku tusinaysa iska abuuradka abtirsiimaha Soomaaliyeed. eeg Futuxul-Xabasha.

Haddaba haddaan waxa tusaalayn ah ka soo qaadano qabiiladaas iskooda u madaxa banaan waxaa ka mid ah;
Dir, magacaan Dirta oo tiradooda lagu qiyaasayey dagaaladii ka hor in ka badan 150,000. eeg; kitaabka Dr; Xasan Maki een soo xusnay bogga; 19.

Wuxuuna magacani ka mid ahaa kuwa ugu faca weyn ee ka jiray dalka, waxaana lagu sharfaa in qabiilo badani ay isaga ka soo farcameen, sidoo kale waxay dadka dirta ihi sheegtaan in inta badan ee Itoobiya ay tahay qaybo iyaga ka mid ah, sida; Gaala, ama Oromo, Cafar, Ciise, Caruuse iyo kuwa kale oo badanba.

Si katase oo la isugu dayo in loo sugo abtirsiga iyo qabiil ka dhigidda Dir waxaa is hortaagaya weydiinno badan iyo cadaymo badan oo mar walba beenaynaya wixii la sheegto, sidaa darteed ilaa hadda lama dhaafin karo in dir ay ahayd magac ama eray hore oo beri hore la jeclaa isticmaalkiisa, haday jiraan dad ku abtirsan karana ay yihiin wax aan maanta la sugi karin oo isku dhex qaldamay, meel laga qabtana aan joogin waqtigaan xaadirka ah.

# GEDA BIIRSAY

Geda biirsay, waxay dadkani ku adkaystaan in aysan soo gelin mid ka mid ah qolooyinkaan is madax buuraya oo iyaguna iskood u yihiin qola kale, waxayna qudhoodu sheegtaan Carabnimo, laakiin sida ay ka qabaan qoraayada iyo Taariikhyahannadu waa in ay ka soo farcameen Dir, wuxuu ku sheegayaa I.M. Lewis, kitaabkiisa; (Sufism in Somaliland), boggiisa; 584; (in Geda biirsaygu ay ahaayeen laan ka baxday Dirta inkastoo aysan hadda is aqoonsanayn.

Laakiin sida ay isku raacayaan qisooyin la soo aruuriyey waxay tahay in dadkii ganacsadayaalka ahaa ee dib dambe u la baxay Iidoorku ay cadaadin jireen dadka dan yarta ah ee carigaas ku noolaa iyagoo ugu shaqaysan jiray si gumaysi waafaqsan,

Ugu dambaystiina ay dadkaasi u adkaysan waayeen oo ay oodda jabsadeen iyagoo u dhagac yiri xagga Gobolada gedo oo hadda barkood weli ku nool yahay, hase ahaatee markay taasi dhacday ayey is caabsadeen ganacsadayaalkii oo ay dib u dejiyeen iyagoo xornimo siinaya, waxana halku dheg noqotay ( Gedo ayey biirsheen, Gedo ayey beegsadeen, iyo Gedo ayey buursadeen), sidii ayaana la bilaabay in la yiraaho; ha la hadlina yeysan Gedo u yaacine. Markaa ayey iska caadiyowday in la yiraaho waa kuwaii Gedo biirsiga ahaa.

Laakiin si loo xaqiijiyo halka ay Gedo biirsaygu ku fir leeyihiin haddii ay yihiin qabiil gooni u taagan ayaa adkaatay in la sugo. Taas macneheedu waxa weeyaan in dadka qaar ka mid ihi ay aaminsan yihiin in Gedo biirsaygu ay ka mid yihiin Isaaqa, halka ay qaar kale oo uu Isaaqa badhkii ka mid yahay aaminsan yihiin in uusan ka mid ahayn laakiin uu la dhashay, oo ay labaduba ka soo wada farcameen nin la odhan jiray Dir. Kaas oo wada dhalay Isaaq, Gedo Biirsay iyo Ciise.

Laakiin Ciisaha oo walaaltinimadaan lagu soo darsaday isagu inta badan ma ogola in uu Gedobiirsayga walaaltinimo la wadaago oo marna waxay dhahaan waxa uu Gedobiirsay ahaa inan aanu soo korsanay marna waxay dhahaan inagu Isaaq iyo Gedo biirsay midnaba ma naqaan oo waxanu nahay Ciise iskii u madaxbanaan.

Si kastaba arintu ha ahaatee, waxa soo cadaatay in qaybo ka mid ah qolloyinka degan konfurta ee iyagu weli qirsan ina y ururis yihiin ku jiraan qaar ka mid ah Gedobiirsayga. Tusaale ahaan qabiilka la yiraahdo: **Baadicadde** waxa uu ukala

baxaa Zubeyr iyo Adan tuurcadde. Zubeyr waxa uusan ilaa maanta inkirsanayn in uu ka mid yahay Gedobiirsay. Ilaa hadana qaybtii ka hartay iyaga oo isla magicii Zubeyr wata ayey ku jiraan Gedobiirsayga.

Haddii aan daraasada ku sii wadno is baritaanka khuseeya Baadicadde, jilibka kale ee ugu weyn Baadicadde waxa iyagana ka taagan dood culus oo weliba beryahan dagaalada jira awgood sii hurguntay. Jilibkaas oo ah Adan Tuurcadde, waxa ku dhegay qabiilka la yiraahdo Duduble oo iyagu ku doodaya in ay reer Tuurcadde usoo noqdaan. Sidaa darteed waxa ay doodu mararka qaarkood ku xirmanaysaa yaa ka dambeeyey isku abaabulkii labadan jilib ee kala ah Gedobiirsay iyo Duduble oo hadana u baxshay magaca cusub ee ah Baadicadde. Marka la doono in taa laga jawaabo waxa ugu soo horeeya ee qalbiga ku soo dhacayaa waxa ay noqonayaa tafsiirka macnaha uu magaca qudhiisu tusinayo. Kaasina waa in reerku ay gebiba yihiin baadi iska cad, oo is qabsatay ka dib markii ay is arkeen, tiiyoo markii la cadayn waayey halka ay asal ahaan kakala yimaadeen laysaga gaabsaday “Baadicad”.

## UJUURAAN

Ujuuraan, wuxuu magacani ku baxay askartii haysatay mid ka mid ah xukumadii ugu horeeyey ee ka kaca dalka dawladnimo guud ka hor, kuwaas oo loogu baxshay Ujuuraan ujuuradii ama canshuurtii ay dadka ka qaadayeen awgeed, maadaama ay dadku ahaayeen dad aan weligood canshuur la weydiin waxay u arkeen baad aan geedna loogu soo gaban, waxayna xukunkaas oo ahaa mid diriqsanayey ee aan la aqoonsanayn u baxsheen Ujuura qaatayaal oo la mid ah Baadtiisteyaal.

Xukunkaas oo runtii lagu amaani karo sida uu wax qabadka la taaban karo u muujiyey xilligaas iyadoo ay duruufihii sidaa u cuslaa ay ku xayndaabnaayeen, waxaa weli ka dhisan meelo badan oo dalka ka mid ah ceelashii uu qoday iyo baraagihii uu dhisay.

Ugu dambaystiina xukunkaas dabadaa loo rogay oo waa la gumaaday iyadoo la isugu tagey, waxayna faniinkii askartaasi dib isugu aruursadeen xuduudda Kenya iyo Soomaaliya iyagoo uu ku dhegay magicii Ujuuraan ee ay dadku ku colaadinayeen.

Ciidamadaas oo ahaa xukuumad la jebiyey ayaa noqday wax la is weydiiyo. Arintaasina waxay toos u waafaqsan tahay dhaqan-siyaasadeedka Soomalaiyeed oo ku dhisan dumi oo burburi. Waxaa weligeedba caado u ahayd Soomaalida inay dawlad ama nidama jira xididada usiibaan oo cirib tiraan intii ku lug lahayd sida tii hadda ugu dambaysay ee uu hogaaminayey madaxweyne Maxamed Siyaad Barre. Haddaba waxaa ajuuraankii la gaarsiiyey heer laga cabsoodo ama laga xishoodo sheegashadiisa oo ilaa maanta waxay Soomalaidu ku maahmaahdaa; “Abwaayaa Ujuuraan sheegta”.

Dhanka kale markaad ka eegto waxaad arkaysa ain qabiilo badan oo Soomaaliyeed oo manata jira ay u badan yihiin dad waagii hore “geegi marree” ahana jiray Ujuuraan tusaale ahaan qabiilka Eelaay intiisa badan waa Ujuuraan. Xilliyadii ugu dambeeyey dagaaladii dhex marayey dawladdii Ujuuraan iyo mucaaradkeedii oo ka socday gobolada Jubboyinka waxay Soomaalidu u qaybsanayd: Aji iyo Ujuuraan oo loola jeedo jabhadihii ku kacsanaa dawlada iyo haraadigii ciidankii dawladda.

Dadyow kale oo madaxabanaan ayaan iyagana tiro ahaan la soo koobi karinin. Waxa keliya oo ay noqonaysaa marka la

doonayo in la tiriyo in la isticmaalo tiris lambar oo ku salaysan deegaanka. Waxaa ka mid ah; Tunni, Gelledi, Dabarre, Cawramaleh, Doqondiiddo, Jiiddo, Reer Baarre, Reer Xamar, Shaashi, Madhabow, Moorshe, Muqshabeel iyo kuwa kale oo fara badan oo maalinba mid cusub la maqlo. Sidaas si la mid ah xagga Waqooyiga Somaliya waxa iyagana ka soo baxa marba kooxo cusub oo aan horay ujiri jirin. Kuwayowgaasi inta badan waxa ay ku dhuuntaan in laga tiro badan yahay sidaa darteed ay laangaab yihiin oo ay mar kaste u hogaansamaan awaamirta kuwa ka tirada badan, sidaas darteed isma caddayn karaan ee caadka ayey isku qariyaan cabsi ay kuwa kale ee qawlaysatada ah ka qabaan awgeed.

# WAA MAXAY MIDGAAN (Boon)?

Saddex u dhig dhig ka mid ah ummadda Soomaaliyeed waxay ku jiraan gumaysi iyo cadaadis ay ku hayaan inta kale, gumaysigaas oo hadda war beelay waa mid qaraami ah oo xataa haddi la isku dayo in la baddelo ay adag tahay oo aan laga guurin karin kuwa la qabadsiiyey cadaadiska intaanba la gaarin kuwii cadaadiska ku hayey, taas oo ka timid waaritaanka ay caadadani waartay oo caadowday.

Dadyowga noocaas ah ee la haystayaalka caadoobay ku kala ah dacallada dalka waxaa loo kala yaqaan magacyo kala duwan oo ay ka mid yihiin; Midgaan, Boon, Kaba tole, Jaaji ama Dabato, Birtume, Yibro, Yaxarro, si kale marka loo isticmaalo magacyadaan waxaa lagu sharfaa in loogu waco magac looga khafiifinayo cayda lagana dhaadhiciyey in uu yahay kii ciddooda, waxaana kuwaas ka mid ah; Ma dhibaan, Hawraarsame, Waraabeeyo, Lo'jir, Yibro, Tumaal Gabooyo, iyo kuwa kale.

Haddii loo sii dhaba galo macnaha magacyada ay dadkani haystaan oo lagu sii kabo hab dhaqameedkooda jira waxaa la helayaa in ay weligood ahaayeen dadka kuwa ugu wanaagsan, uguna sareeya xagga deeqsinimada iyo ixtiraamka. tusaale macnaha;

**Ma dhibaan** waa Dhiblaawe, oo waxaa lagu siiyey dhib iyo shidda la'aantooda, taasina waxay ku baxday oo lagu duray markii uu dhaqankoodii ku tagey edeb iyo asluub ku salaysan ixtiraam iyo dhib la'aan, deegaanka dadkani wuxuu u badan yahay waqooyiga, bariga iyo bartamaha dalka.

**Hawraarsame**, waxaa loogu baxshay in ay ahaayeen dadka aan waxa xun badanaaba laga maqli jirin wax san mooyee, marka wax lagu dirqiyana iska aqbali jiray si ay u dhawraan ammaanka, waxayna oran jireen (waa yahay ama Hawraarsan),

Hawraarsame waxay degaan magaalada Beled-xawo ee ku taalla xuduuda u dhexaysa Soomaaliya, Kenya iyo Ethiopia. Waxaadna heli kartaa sababta uu magucu ugu baxay oo ahayd in ay wanaaga xigasdaan uun awgeed hadii aad arinta dhex gasho, ama aad waraysato.

Haddaan tusaale uga soo qabano dhacdooyinka maanta jira waxaa ka mid ah; qofka edebta leh oo iska degan waxaa la ogyahay in uu yahay qof ka ceebaysan oo la yaso bulshada dhexdeeda, waxaana lagu foorjeeyaa waa wadaad, waa miskiin, nacas naag naag ah oon rag wax la qaybsan karin, iwm.

Sidaa oo kale qofka sama doonka ah isna cay ka sokow waaba lala dagaalamaa oo la collaadiyaa, waxaana markhaati kaaga filan in maanta qola kaste ay dhexdeeda kala dagaalanto oo disho ama cadaadiso qofkii ay ku tuhmaan in uu maslaxo raadis yahay, waxaana lagu eedeeyaa Sulux, hadaba waa adigaa arkaya in qola walbaa ay ku qayliyaan Suluxu ha dhaco, iwm.

Sidaa oo kale waxaa Xarako Islaami ah oo jirta lagu eedeeyaa magacooda oo ah; Islaax, waase yaabka yaabkiise sidee loola dhaqmaa dadkan ay maslaxada iyo wanaagu heerkaas ka taagan yihiin?.

Aan u soo noqono ujeedada iyo dhumucda qoraalkeeniiye, magaca Waraabeeya isna wuxuu dadkaas ugu baxay in ay ahaayeen deeqsiyiin dadka biyo waraabiya xilliyadii ay biyuhu ciriiriga culus ku jireen, inkastoo ay dadka soomaaliyeed ku faanaan marti soorid, deeqsinimo, iyo huguri xumo ka dheeraansho hadana weli ma gaarsiisna heerka ay sheeganayaan.

Dadkan ay yasaan oo iyagu ah kuwa ugu dheereeya noocaasna way kala dagaalamaan oo way duudsiiyaan xuquuqdooda, waxayna ku caayaan qofkooda ay rabaan in ay wax ka qaataan ee isku dhejiya (midgaan, yaxar, boon iwm), waxaan tusaale u soo qaadan karnaa qisadan sheegaysa;

Waxaa safray nin, markaa ayuu saadkiisii oo isugu jira noocyo cunto oo heer sare ah ku rartay midgaankiisii, laakiin ninkii marka uu wax cunayaba waxba kama siiyo midgaankii ee markuu u soo habeeyo ayuu gooni isaga fariisiyaa, ugu dambaystiina intuu midgaankii nafta u yaabay gaajo awgeed ayuu hadalkaan ku tuuray ninkii ( Ajiyow Midgaanna ma tihide ma hooyadaa baan Aji ahayn)?"".

**Yibro,** iyagu waxay ka mid yihiin dadkii afku qaraabadka yiqiinay ee loo aqoon jiray Afmaalka. Laakiin noocooda Afmaalnimo ayaa gedisnaa oo waxay iyagu ku dhacaan dadka awoodo been ah oo qarsoon, iyagoo ilmihii dhashaba ka qaada baad, tiiyoo ay dadku ka baqayaan in haday u diidaan uusan ilmahaasi sii noolaan doonin.

Isla sidaas ay ku handadayeen dadka ayaa hadana looga dhigay cay, maadaama aysan la mid ahayn kuwa gubta loo

yaqaan ee geela dhaqda. Waxaase iyana fool xumo kale ahayd markay kuwoodii ilbaxay dhawaan sheegteen in Yuhuud yihiin, oo magacooda Yibro uu ka yimid magaca Yuhuudda ee ah Hibru, tiiyoo lagu sii andacoonayo Soomaalida oo idlina waxay ka sii farcantay qoladaas.

Dadkani inkastoo laga helayo meel kaste oo dalka ka mid ah hadana waxaa u asal ah waqooyiga, bariga iyo bartamaha dalka, laakiin siyaasadooda nololeed ayaa ku salaysan in laga helo meel kaste oo uu ku nool yahay qoys Soomaaliyeed.

**Jaaji ama Dabato**, waa dadka ku noolaan jiray kalluumaysiga, waxaana looga dhigay shaqadoodaas ceeyb lagu yaso, welina laguma cadayn karo dambi aan ahayn in ay kheyraadkaas Alle u xalaaleeyey kala soo baxaan badda. deegaan ahaana waxay u badan yihiin xeebaha koonfureed ee dalka.

**Birtume**, waa Farsama yaqaanadii isku dayey in ay la qabsadaan ilbaxnimooyinkii waayahaas bilowga ka ahaa dunida, maantana faraha ka baxay oo aan lala qabsan karin. Waxaana lagu eedeeyey in qof ka mid ah deegaanadaas maalin lagu arkay isaga oo weelkiisa kabanaya, ama shey kale farsamaynaya iwm.

**Kaba tole,** waa sida la arkayaba Farsama yaqaanno damacsanaa in ay ku shaqaystaan, dalkana horumar ku gaarsiiyaan farsamada Kabaha iwm.

**Lo'jir**, waa isla sida uu magucu tilmaamayo, oo waa dadkii lo'da dhaqanayey iyo kuwii qawsaarada ka ahaa ee iskooda isaga shaqaysanayey, waxaana ceeb iyo dambi looga dhigay hab nololeedkoodaas iyo hab dhaqan dhaqaaleedkoodaas. waxay dadkani asal ahaan u degaan magaalada Ceeri gaabo iyo agagaaradeeda.

Si ay inoogu cadaato waxyaalaha sababayey is midgaamaynta iyo iskala hufka beenta ku salaysan waxaa ila qurxoonaatay in aan soo bandhigo mid ka mid ah qisooyinka ay magacyadani ku baxaan, waxaanan ka soo qaadanaynaa qisada Hawraarsame oo ah sidatan;

Nin boqor ahaa ee ka mid ahaa qolada Mareexaan oo la oran jiray Maxamed Da'uud, ayaa waxaa dilay niman ardaallo ah, ka dib waxaa ninkii loo qabsaday dhammaanba beeshii ka ag dhaweyd soonaha ay nimankaasi ka yimaadeen. Muddo dheer baa loo fadhiyey sidii lagu xallin lahaa arintaas, iyadoo ay weliba dadkii lagu eedeeyey aqbaleen wax aale iyo wixii loo soo jeediyo ama lagu xukumo,

Haddaba wax arintii la rog rogaba qoladii la xukumayey waxaa loo baxshay (Hawraarsame) oo macneheedu yahay Aqbal wanaagsane, koox ku taagnayd oo magtii la keenaba lahayd celiya waxaa loo bixiyey (Celi). doodii dheeraatayna waxaa ka baxay hal hays ah (arintu daba dheeraa ma magtii Maxamed Daa'uud baa)?.

Ugu dambaystiina waxaa taladii lagu gabangabeeyey in dadkii la eedaynayey laga dhigo midgo, taasoo jidka loo marayaa uu yahay in laga dhaco wax Alle iyo waxay xoolo haystaan, laguna xareeyo xero aysan ka bixi karin, markay nafta u yaabaana loo soo dhigo Bakhti, iyadoo haduu qof ka mid ihi cuno bakhtigaas ay kulligood ku sugnaanayso (midgaanimo).

Marka laga eego qaab dhismeedka guud qolo kaste oo Midgo ihi waxa ay ka farcameen oo ku abtirsadaan qola ka mid ah kuwa isla qabka weyn, waxaana lagu takooray dhacdo yar oo la xiriirta dhaqan dhaqaaleedka sidaan horay usoo xusnayba, tusaale:

Hawraarsame, waa Marreexaan.

Ma dhibaan, waa curadkii Hawiye oo waxaa la yiraahdaa Maxamed Gorgaate.

Tumaallo, waa Majeerteen.

Yibro, waa Isxaaq. Yaxarna, waa qayb Hawiye ka mid ah. Inkastoo marka runta loo dhaadhaco ay kuwa lagu abtirsanayo iyo kuwa ku abtirsanayaaba ay ku tiri kuteen isu laqinayaan, oo ay ku midaysan yihiin danwadaagnimo, haddana sidana waa sida ay ku sheekaystaan xilliyada aaranka ee la wada waramo.

# Cutubka Tobnaad.

# WAA MAXAY XALKEENNU?

## ISKU DAY BIDH BIDHAAMAYA.

Dadaal badan oo lagu raadinayo xalka soomaaliyeed ayaa socda, cid walbana waxay u ol-olaynaysaa in ay iyadu soo hesho taladii iyo xalkii lagu gaari lahaa nabad waarta iyo dawlad soomaaliyeed oo mar labaad la isugu yimaado. Laakiin su'aasha la is weydiin karo ayaa waxay tahay maxaa ilaa iyo haatan loo la'yahay xalka rasmiga ah, maadaama si kaste la isugu hawlayo?.



Si loo helo jawaabta su'aashaasna waa in marka hore la is weydiiyaa maxaa ka hir geli karo shaqada uu qofka aadanaha ihi u kaco?, sharaxaado badan baa laga bixin karaa waxa ka hir heli karo hawl uu qof u kacay, laakiin waxaa nala quman in aanu isaga soo gaabsano; waxa keliya ee dhaqan geli kara waa hawsha loogu kaco si daacadnimo ah oo aan laqdabo ku jirin, isla markaasna loo hayo awood wax qabad oo dhan kastaba leh.

Marka aan raacno jawaabtaas waxaa inoo soo baxaya in isku day fara badan oo la isku dayey in wax loogaga qabto xaalka murgay ee dawlad la'aanta soomaaliyeed uu yahay mid lagu eedayn karo isku dayeyyaashiisa dambiilayaal isku dayey in ay khayaanaan ummadda soomaaliyeed, ayna ku fulsadaan dano iyaga iyo qolooyinkooda faataa dhugta ah u gaar ah.

Waxaa gefafka ugu waa weyn ee rayidka Soomaaliyeed laga galo ee aan taariikhdu illoobi doonin ka mid ah; marka la isugu yeero mujrimiinta ama qab qablayaasha dagaalka Soomaaliyeed oo mid walba uu wax kaste dhaafsiisanayo hal maalin oo lagu sheego madaxweyne, dabadeedna la yiraaho ku heshiiya xukunka dalka.

Waxaa mudan in la is weydiiyo maxay ku mutaysteen in ay ka hadlaan amuuraha Soomaaliyeed marka ay yihiin iyagu

kuwii shiday dabka Soomaaliyeed siina shidaya? waxaa kale oo la is weydiin karaa xagee ayuu ka imaan karaa heshiisku mar hadday arintu taagan tahay aniga ha la iga dhigo madaxweyne iyo aniga ha la iga dhigo aan kala liiqad lahayn? su'aasha kale waxa ay tahay miyaa weligoodba la isugu soo yeeray heshiis loo soo diyaariyey in uu u dhaco sidii uu u dhici lahaa heshiis lagu heshiin karo?.

Haddaan intaa uga gudubno dhibka iyo caqabada hortaagan daaweynta Soomaaliyeed, waxaanu ka hadli karnaa maxay qabaan aqoonyahanada iyo wax garadka Soomaalyeed ee cabbursan uusanna banaaneyn mikarafoon ay ku hadlaan, (kuma jiraan khaa'iniinta ka caada qaata ee kaba qaadka u ah kaaba qabiillada iyo qab qablayaasha dagaalka ee ay weli maskaxdooda ku jirto jaahiliyadda qabiilku).

Haddaba innaga oo soo aruurinayna fikradahooda kala gedisan waxaa ka mid ah; (Islam, Federation, Confederation, Autonomy, Decentralisation, Segmantation,

Precinctation, iyo to ban pastoralism). kuwaas oo hadaan sharaxno noqonaya sidatan soo socota:

## RA'YIGA WADAADADA.

1- Xalku waa Islaamka, Inta badan bulshada soomaalidu waxay maanta u ooman yihiin in lagu xukumo kitaabka Ilaahay, waxay garawsan yihiin in aanu jirin xal kale oo la cuskan karo iyo meel kale oo loo irkado.

Taasina waxay salka la gelaysaa quusashada ay dadweynaha soomaaliyeed ka quusteen dhawr mabda' oo kale, ayana baahi u qabaan in ay mar uun arkaan Sharciga Islaamka oo lagu dhaqayo si ay u tijaabiyaan ama u dhadhamiyaan wax tarkiisa loogu baaqayo, maadaama ay dad Muslimiin ah yihiin oo ay ku waajib tahay in ay qaataan uun xukunka Ilaahay. Laakiin aan isku xukunno sharciga Eebee aan is weydiino su'aalo dhawr ah oo kala ah; Yaa inoo maamulaya hadaan helno dawlad Islaami ah? taasi waa qodob ay ila tahay in haddii laga gudbo la gaarayo ciqaab adduun iyo mid aalkhiraba ayna haboon tahay in laga taxadaro inta aan lagu hamin Shareecada Islaamka.

Waxaanan taa u leeyahay in ay dhaliil culisi ka muuqato inta badan dadka maanta ku baaqaya shareecada Islaamka, ayna arintu u muuqato in iyagu ay marka hore soo dhisaan ikhlaaskooda iyo daacadnimo doonkooda, waayo waxaa loo malynayaa in ay qaarkood u dan leeyihiin aad mar uun xukunka fara ku dhigtaan, qaar kalena ay u dan leeyihiin aad mar uun qabiilkiina sare u qaadaan, isla markaasna ay hoosaysiiyaan ama cirib gooyaan qabiil kale.

Waxaa kale oo taas la sii xariirta iyada oo ay muuqato u diyaar garow la'aan iyo fahmid la'aan dawladeed oo ku jirta kuwa u ol-olaynaya xukuumadda Islaamiga ah, oo waxaaba cad in haddii maanta faraha loo galsho xukunka aysan haynin khabiir keliya oo lagu aamini karo mid ka mid ah Hay'adaha ay dawladi ku dhismi karto. sidaa darteed waxaa lagama maarmaan ah in la helo kaadirro bisil oo u taba baran xukuumad Islaami ah oo la qabsan karta casriga maanta jira, matalina karta guud ahaanba Muslimiinta jirta.

Haddaanse si kooban u sheegno, Shuruuda dhawr ah ay Imaamada Islaamku ku xireen in Shareecada Islaamiga ah Xadka lagu oogo, iyaga oo tix raacaya Qur'aanka iyo Axaadiista, waxaana ka mid ah shuruudahaas lama dhaafaanka ah;

1- In la helo Bulsho fahamsan Shareecada Islaamka.

2- In la helo Bulsho ku qanacsan Shareecada Islaamka.

3- In la minguuriyo Shirkiga iyo Xaaraan ku dhaqanka.

4- In la oogo Waajibaadyada, sida; Salaadda, iwm.

5- In dhidibada loo aaso Walaaltinimada Muslimiinta.

6- In Rukumada loo taago Dawlad Islaami ah, iyo Xaakin ama Madaxweyne ay Muslimiintu si madax banaan oo kalsooni leh ku soo doorteen, Shuurana ku soo baxay.

7- In Beeca lala galo Xaakinkaas, oo lagula heshiiyo xukunkiisa.

8- In la sugaa horumarka iyo dhaqaalaha Bulshada iyo Xukuumaddaba.

9- In ay Shacabku haystaan shaqooyin iyo ila dhaqaale.

10- In la gudanayo oo aysan laab laab ku jirin Acmaasha Xajka iwm.

Kan xaqqa u leh in uu Xad oogana waxaa laga rabaa isna in uu soo buuxsho Shuruudahakan soo socda;

1- Waa in uu leeyahay Cudud uu wax ku muquunin karo, oo ay rayidka ceeb ka saliinka ihi ka raalli yihiin.

2- Waa in uu ahaadaa nin aad u caalim ah.

3- Waa in uu yahay nin ay Ummaddu la gashay Beeco (Heshiis iyo ballan).

4- Waa in uu yahay mid masalaya kulanka Musliminnta.

5- Waa in uusan ahaanin Kelitaliye ee uu yahay nin Ra'yiga u celinaya wax garadka iyo aqoonyahannada (Ahlul- xalli wal-caqdi).

Waana sidaas sida ay na barayaan Aayaadka Qur'aanka ah, Axaadiista, Siirada Nebiga iyo tan Asxaabtuba.

eeg, dhammaanba Fiqhiga Afarta Mad-habood iyo kuwa kaleba.

Waxaana ay dad badani ku doodayaan ma gaareen shacabka Soomaaliyeed heer ay aqbali karaan oo ku haboon yihiin xukunka Islaamka? taasna waxaa sababaya dhaliilo diin faham oo ka dhex muuqda bulshada inteeda Islaamka loo taba baray iyo inta kaleba. Hadaba taasi waxay lagamamaarmaam ka dhigaysaa in la helo shacab si dhab ah ugu baraarugsan diinta Islaamka iyo dunida maanta, iyagoo is waafajinaya dhaqanka Islaamka iyo hab dhaqameedka kale ee jira. taas oo macneheedu yahay Islaam lagu dhisay waaqici.

Sidaa darteed ayey wax garadku ka wel welayaan in hadii la guda galo xukun Islaam iyadoo ay weli dal dalooladaasi jiraan ay dhacdo ay rumowdo dacaayadda mulxidiinta ee ah waa la kala dhawraa diin iyo dawlad, ayna dad badani halkaas kaga leexdaan Islaamka, iyo in ay weliba dhacdo in

intuu markaas fashalmo xukunka Islaamiga ihi uu hadana reebo utun iyo uur ku taallo sababta in haddii waa dambe ay soo baxaan dad nadiif ah oo Islaam doon ah la gala hor tago; war Islaamka aad sheegaysaan sow kii berigii ma ahan? iwm. Taasina ay na bado adduun iyo aakhira seeg iyo weliba magac xumo aan naga harin. waxaa kale oo dhacaysa sida muuqata in ay qaar ka mid ah qabqablayasha dagaalka ama kuwa aan ka sokeyn iyagu ay sheegtaan in ay wax ku xukumayaan Sharciga Islaamka, taas oo ah fikrad uu la dhaafi waayey caqli siyaasadoodkoodii, oo ka dib markay arkeen dadweynihii oo wada doonaya Islaamka ayey door bideen sheegashada Shareecada.

Nasiib darrose waxay ka taagan tahay marka ay dadku fahmi waayaan xiiladahooda oo ay ka xishoodaan qof kula gor gortamaya Shareecada Islaamka, taasina ay cirka ku shareerto daawadii la doon doonayey oo ay ka dhigto arinta Kud ka guur oo qanjo u guur.

Waxaase hubaal ah in haddii la helo xukun Islaam oo dhab ahaan u cilmiyeysan loolana jeedo Ilaahay dartiis uu noqonayo mid lagu istereexo oo lagu hilmaamo dhibka jira oo dhan, ayna dhacayso in dunida jeha wareersan oo dhami ay ku daydaan oo uu Islaamku gaaro dhul badan oo uusan maanta sharaf ku lahayn.

Waxaana la heli lahaa in aan dib dambe la isugu qabsan xukun, waayo waxaa la arki lahaa faa'iidada rasmiga ah ee uu heli karo qof madaxweyne ah, illeen waxaa meesha ka bixi lahaa xaq darrada la kala hororsanayo iyo hantida dadweynaha oo loogu loofarayo sida gaar ahaaneed, waxaana soo bixi lahaa waajibaadka hor yaalla qof walba iyo xuquuqda uu mutaysan karo qof walba.

## RA'yiga CILMAANIYIINTA.

2 - Xukun wadaag ah, (*Federation*) waa in qolo walbaaba ama gobol walbaaba uu goonidooda isu xukunto isla markaasna ay jirto dawlad dhexe oo la isugu wada yimaado maamulkeeduna isku dhafan yahay. Laakiin fikradanina waxay leedahay mucaaradkeeda oo waxaa lagu doodayaa marka hore iyadoo aysan dadka soomaaliyeed ku kala qoqobnayn gobol gobol iyo tuulo tuulo.

Inkastoo ay taasi yara jirto hadana ma ahan mid maamul lagu habayn karo oo magaalo walba waxaa ku jira dad isku dhaf ah oo aan ka yaraan karin dadka loo aaneeyo in ay degaan waayo sababta xukunkii hore oo ay siyaasadiisii qabiil baabi'intu ku salaysnayd isku qasid deegaan iyo isu baddelid madax oo ay ku waqti dheeraatay xukuumaddiisu ayaa abuurtay in dad badani ay ku xasileen mabda'aas oo ay deegaan rasmi ah ka dhigteen dhul aanay horey u deganaan jirin, iyagoo aaminay Soomaali hanti wadaag ah oo ay wax walba ka dhexeeyaan.

Hadaba taasi ma qancin karto in ay qoysaska hantida iyo guryaha ku lahaa deegaamada ay hada masaafuriska uga maqan yihiin ee looga cayrshay sabab qabiil awgeed ka tagaan dhulkoodaas ay bar yaqaaneen oo ay biirshaan dhul hor leh, sidoo kale kuma ay heshiin karaan qabiilada kala magaca duwan ee isku gobolada degani shakhsiyaadka laga soo dooranayo gobol ahaan, sidaa si la mid ah isla qabiilka dhexdiisu kuma heshiin karo qofkii looga soo dooran lahaa qabiil ahaan.

3-Dawlad wada wadaag ah (*Confederation*), oo ah in uu jiro is maamul goboleed hoose iyo maamul qaran oo ku wada shaqeeya hab is xukun iyo is kala xukun ah. Laakiin waxaa hortaalla waa dadkee dadka caynkan lagu dhaqi karaa? goorma ayeyse u bislaan karaan dadweynaha Soomaalidu hab nololeedka macnahakan ku dhisan?.

4 - U Kala googo' dawlado yar yar oo kala madax banaan, dad badani waxay ku adkaysanayaan in halka ay maanta xaaladu gaartay uu yahay mid aan la isugu soo laaban karin ayna keliya daawadu ku jirto iyada oo ay qola walba iskeed

isu maamusho una raadsato aqoonsigeeda dawladeed, (*separation and segmantation*).

4- Dawlad dhexe, in aan weli laga quusan maamulkii dawlad dhexe oo la wada leeyahay waa fikrad iska jirta inkastoo aysan u xoog badnayn sida kuwa kale, taasna waxaa keenay ka dib markay daba dheeraatay Dawlad soomaaliyeed oo la helo iyada oo la isku wad raacsan yahay, sidaa darteed ku doodayaasha dawlad dhexe waxaa hor yaalla su'aalo fara badan oo ay adag tahay ka jawaabidoodu, ayna ka mid yihiin;

Sidee ku illowsiin kartaan dadka cuqdadii kala dhex gashay? sidee isugu soo celin kartaan ummaddii kala qaxday ? sidee u bi'in kartaan dekanihii iyo godobihii la kala galay? hadii la isugu yimaado hal xukun yaa ka noqon kara madaxweyne? sow nin walbaaba kama imaan qabiil uun? waa qolama qolada qolada kale wax u ogol? sidee ugu qancinaysaan ka bax guriga aad ku jirto ari jirkii dhibka iyo naf hurka ku qabsaday guriga uu ku jiro, aanana haysan meel dambe ee uu ku noqdo oo arigiisii baytamaalay? Sidee u helaysaan aqoon yahanno daacad u ah dalka iyo dadweyne u aqoonsada aqoontooda oo uga hara wax tarka? sidee ku kala xulaysaan kuwa bidhaanta aqoomeed dhadhanshay ee uu mid walba oo ka mid ihi uu buurta dheer isla saaran yahay isaga oo isu arka kan keliya ee jira dhan walbaba.

Su'aasha ugu culus ee taagan ahaana qodob mar walba saaran miiska doodeed ee soo noqnoqda ayaa ah; haddii la isugu soo noqdo dawlad dambe xaggee baa laga dhigi doonaa Caasimadda dalka, maadaama la arkay Muqdisho iyo dadkeedii deegaan ahaanta u sheeganayey, oo la isku raacay in ay yihiin dad aan u baraarugin faham dawladeed, sidaa darteed ku anadacoonaya maxaa naloo kugu yimid?. Waxayna taasi hakad gelinaysaa meesha ugu habboon ee la isugu imaan karo iyada oo aan cidna sheeganayn, kuna haboon xarun dhexe oo soomaaliyeed. kuwaas iyo ciiddaas oo kale oo ah caqabado aan la dhaafi karin in iyaga la xalliyo intaan dawlad la raadin mooyee.

5- Qab qablayaasha oo la gawraco, waa xal ay dad aad u badani had iyo jeer soo jeediyaan, waxayna dadkaasi hadal ku daynayaan in aysan suurta gal ahayn dawlad soomaaliyeed iyada oo ay wax kaga siqayaan ifka daallimiinta dabka ku shiday gurigii soomaaliyeed ee gurigood ba'a ah. Laakiin waxaa iyagana markastaba hortaagan yaa soo gawracaya? haday reer hebel kooda cayrshaan ama ka daba haraan reer hebelkii kale ma is dhaafin iyaguna mise ka daba harin?

6- Faraha ha laga qaado, dadka qaarkood waxay ku adkaysanayaan; Maxaad u wanaajinaysaan qoom ilaahay la

doonay halaag iyo habaw? waxay leeyihiin haddii faraha laga qaadi lahaa dadkaas mar hore ayey xaaladoodu degi lahayd, oo qola unbaa quusan lahayd, markaa ayey qolada kale iska addoonsan lahayd taasina waxay dhaami lahayd tan maanta taagan.

Tan kale waxaa meel beeli lahayd rajada fidna walayaasha oo markii wada hadal loo sheegaba sii cusboonaanaysa, uuna mid walbaba ku dadaalayo intee gobol baad haysashadooda la shir tagtaa?

7- Wax ha laga baddelo cimilada dalka, sida Geela oo la laayo iyo wax la mid ah, waa fikrad ay dadka qaarkood qabaan, waxayna ku marmarsiyoonayaan kulli fidno cinda geel, waaba geela waxa u horseeda beel kaste oo soomaaliyeed dagaalka, waayo dadkeenu waxay had iyo jeer iska daba socdaan geela oo haduu la galo meel kaste iyaguna way ka daba galayaan, isla markaasna waxaa dhacaya iska hor imaad iyo isku dhac dadkii halkaa degenaa iyo dadkii soo raacay geelooda.

8- Ha la cirib tiro iskaalmaysiga iyo is tollaysiga ku dhisan ehelnimada iyo qaraabanimada. Waxaa loo arkaa in tan ku abuuraysa in ruux ugu hiilliyo ruux kale ina adeertinimo iyo isku cidnimo ay tahay ka filashada uu isba ka filanayo wax tar kale ruuxaas, taas oo ka timid markii qof aan weligii shaqaynini uu ku dul noolaaday qof kale oo ay qaraabo wadaag yihiin ee shaqeeya, isla markaasna sharciyeysay in nin walba uu isku halleeyo ninka kale xoolihiisa, kuna tashado oo ka ilaashado cadawga kale, ayna gaarto in uu hantiilahaas ku difaaco kuna kaalmeeyo gar iyo gardarraba, illeen waa isaga kan u baxsanaya miraha falkaas ka yimaada ee.

## SIDAY ANIGA ILA TAHAY.

Inta aanaan u sii dhaadhicin tala soo jeedintayda ayaa waxaa ila quman in aan kolka hore isla garano waa kee hab wanaagga iyo xalka aannu doonaynaa? ma dhalanteedyada ay dad badani ku daalaan ee ah heshiisyo khayaaneedkaa mise waa heshiisyo dhaqameedkii hore ee ay odayaasheenu sida ku meel gaarka ugu kala saxiixan jireen geedka hoostiisa? Sidoo kale ma is khayaanaynta iyo is daba mardaamaynta ay kuweenna siyaasi iska yeelaka ihi ay isku khayaanaynayaane uu mid walba ku doonayo in uu kana kale jaraha uga boodaabaa?.

Dhabtii haddii uu mid ku fikirayo noocyada dhalanteed ee ay kuwaasii ka mid yihiin yuusan isku daalin akhriska Kitaabkaygan ilaa iyo inta uu ka soo garawsanayo waxa xaqiiqa ahaan u suurtoobi kara ee ruux la gudboon in uu ku fikiro ama ku han weynaado.



Akhristow ma ogtahay in dhakhtarkuba uusan dawaynta bukaanka ka bilaabin qalliin (*surgery*), ee u soo maro heerar kala duwan oo kala hooseeya, kuwaas oo uu midba midka kale u sii gudbinayo dariiqooyin iyo tabooyin loo maro oo ay keentay lagama maarmaanimadeedu.

Marka hore wuxuu dhakhtarku ku siiyaa Kiniinka xummadda jebiya iwm, marka labaad ee aad isla xanuunkii ugu soo noqotana wuxuu kugu caawiyaa xabbado Kaniiniyo ay heerarka Garaamkeedu sareeyaan ah, marka saddexaadna waxaysan daweyntaadu ka fursanaynin Irbado, marka afraadna in lagu jiifiyo, ilaa iyo marka dambe oo ay xaaladaadu gaarayso heer qalliin.

Bal haddaan anna isku dayo in aan ka dhiibto ra'yigeyga arintaan murugsan oo madaxa iskula jirta, aan qodobyo kooban ku soo aruuriyo qaabka ay iigu muuqato in lagu gaari karo dhismo dawladeed oo ka fiyow calool xanuun iyo daacuun cuqdadeed, kuna shaqaysata dhiifoonaan iyo hididiilo ay ku tiigsanayso dhaamankii socdee ka hor wabxay. waxayna yihiin qodobadaasi sidatan;

1- Ha la helo doonis dhab ah oo maman laguna doonayo dawladnimo, taas oo ka dhar la' guud ahaanba malabsiga iyo

ciilkaambiga ku dhisan Munaafaqnimada, una go'doonsan Ilaahay dartiis.

2- Ha laga tanaasulo isla weynida iyo isla qumanaanta, oo ruux walbaa ha aqoonsado jiritaanka iyo dadnimada kan kale.

3- Ha loo liqo dib dhammaanba is huruufiddii iyo ficiltan foodleygii la caadaystay oo ha lagu mashquuliyo maskaxda samafallo dhaama.

4- Ha ku mashquulo waddani kastaaba wax soo saar uu naftiisa iyo ehelkiisa ku anfacayo, hadduusan cid ka dheer wax ku tarayn.

5- Ha loo baddelo isugu gargaarkii iyo isku kaalmaysigii reer hebelka iyo ina hebelka ee ku salaysnaa dulmiga reer hebel iyo ina hebel, mid kale oo ah isugu kaalmayn iyo isugu gargaarid horukicin, wax tacbasho iyo Naar Aakhiro iyo halaag adduun iska badbaadin.

6- Ha la faafiyo tacliinta Islaamiga ah iyo midda maadiga ahba.

7- Ha ku soo noqdeen dalka aqoonyahannadii iyo wax garadkii ka qaxay, oo ha abuureen tartanno dhaqaale iyo wax barasho si ay ugu meelaysmaan halkii tartanka xukun doon.

8- Ha midoobeen dhaq dhaqaaqyada Islaamku, maadaama aysan isku khilaafsanayn wax asal diin ah ee ay isku afjigayaan arimo furuuc hoose ah, oo kala tagoodu yahay (*Ikhtilaafu Tanawuc*), ayna aad uga fog yihiin (*Ikhtilaafu Tadhaad*), ugu yaraana ha wada shaqeeyeen guud ahaanba wadadada diintu iyaga oo ka soo wada go'aya qabiilladooda iyo hunguriga., oo ku wada walaaloobaya dar Alle iyo diinta u gargaarideeda.

9- Ha laga masaxo qalbiga dadweynaha daxalka iyo urugada qabqablayaasha dagaalka.

10- Ha laga soo jeediyo dadweynaha Kaaba qabiillada, Suldaanada, Ugaasyada, Boqorada, Wabaryada, Malaakhyada, Sayidyada, Imaaanada, Islaanada, iwm.

taasna macneheedu wuxuu yahay; way ku mahadsan yihiin intay oday qabiileedyadaasi bulshada soo dhaqayeen, nasiib darrase maanta xilkoodii wey la kufeen, ceebna kuma ahan taasi waayo waxaa is baddelay samankii oo hawlahani ma ahan kuwii ay yiqiineene looga dambeeyey, ee waa dawladnimo iyo in lagu shiro dayaxa korkiisa halkii geed hoostiis bacaadka lagu saldhaysan jiray. Sidaa awgeed ha ku soo wareejiyeen xilka dhallinta curdoon ee ku hagi karta ummaaddaan tubta ay waalkood ku socdaan iyo tan ay ku badbaadayaan Adduun iyo Aakhaba.

11- Ha la soo celiyo, hana la hormariyo is dhex galkii bulshada sida; kala guurigii iyo xididnimadii, ganacsi is dhaafsigii, is magan gelintii iyo is badbaadintii, isu

xeraysigii, iyo guud ahaanba is bahaysiyadii kale ee ku dhisnaa samafalka ama isku danaysiga iyo kheyr isku kaalmaysiga iyo guud ahaanba wixii kale ee soo celin kara wada noolaansho iyo horumarin arimo bulsho.

12- Ha iska dhiseen gobol walba iyo qola walba dhexdooda dawlad yar oo aan go'in ( *Precinct*) iyaga oo si dimoqraadi ah isaga soo dhex dooranaya kuwa u qalma in ay maamulaan.

13- Ha u wada qaybsadeen si caddaalad korjoogto leh maamulka qabiillada kala duwan ee hal gobol isla degani.

14- Ha la isugu yimaado shirweyne dhexe oo loo dhan yahay, ayna ka soo qayb galaan ilaalo shisheeye oo lagu kalsoon yahay la islana wada doortay.

15- Ha la dhiso guddi wadaag ah oo masala dawlad dhexe oo loo dhan yahay, kuwaas oo u wada shaqeeya sidii dawlad rasmi ah oo dhisan.

16- Ha iska soo dhex doorteen gudoomiye guud oo masala booskii madaxweyne, kaas oo aan marnaba gaari karin wax go'aan ah keligiis.

17- Ha dhisteen gudigaasi Dastuur iyo nidaam u gooni ah oo waafaqsan sidii ay isku af gartaan iyagu dhexdooda.

18- Ha loo daayo gobol walba maamulkiisa iyo hawlihiisa, oo ha isku xukunto qola walba sharciga iyo nidaamka ay doonto, goboladii doonaana ha midoobeen.

19- Ha la kala goboleeyo hay'adahii dawladeed ee xarunta keliya lahaa, kala ahana sida; Poliska, Waxbarashada, War faafinta, Garsoorka, Arimaha bulshada, Arimaha diinta, Arimaha gudaha, Shaqaalaha, Wershadaha, Ganacsiga, Dhaqaalaha, Malliyadda iyo guud ahaanba inta caynkaas ku socon karta.

20- Ha la hanti gaareeyo (*Privatization*) dhammaanba hay'adahii dawliga ahaa sida; Poliska, Waxbarashada, Warfaafinta, Caafimaadka, Wax soo saarka, Biyaha, Dabka, Gaadiidka, iyo guud ahaanba wixii la mid ah.

21- Ha ka shaqeeyaan guddiga dhexe wixii la xiriira hanti isu celin, dib u dejin, iyo dib isugu soo celin dadkii kala baytamaalay, dhidibadana ha u aaseen rajo dawladnimo oo xidideedu qotomaan, jirideeduna xajmi culus leedahay, laameheeduna sal iyo baar bexeen, sidaa oo kale ha askumaan cilaaqaad dawli ah.

22- Ha soo dhiseen guddigaasi xubnihii dawladda dhexe iyo hay'adeheeda masali lahaa, oo ka kala yimaada gobolada, laguna soo wada doorto hab ku dhisan maxaad taqaan iyo maxaad tari kartaa ee aan ku dhisnayn saami qabiileed oo keliya, hana ku kala shaandheeyaan tartan lagu qiimaynayo wax qabadkooda ka dib markii ay hawlgalaan, iyada oo qola

walba indhaha loo saarayo dhaliilaha kii ay ceelka keensadeen.

23- Ha ka qayb qaateen guud ahaanba dhismahaas iyo tabaabushahaas dawladeed dhammaanba Aqoonyahannadu, Culima'u diinku (aqoonyahanka diinta Islaamka), Waayo araggu (qurbaawiga khibradaystay), Ganacsatadu, Xoogsatadu, iyo kulliba wax garadka ummadduu. Iyada oo qof walba uu ka qaadanayo hawsha halka ay uga soo aaddoo ee ay tabartiisa iyo aqoontiisu dhigto, aanana u hanqal taagayn ama ku doodayn wax uusan cilmi u lahayn ee u daynaya kan u ehelka ah.

24- Ha u madax banaanaado gobol walba horumarinta iyo meel marinta dadkiisa iyo goofkiisa, oo dhammaanba mashaariicda horumarineed waxay ku xirnaanayaan hadba sida dadka deegaankaasi ugu dadaalaan horumarintooda, waxaana u fasaxan in ay xiriir iyo heshiisyo la galaan ciddii ay doonaan mar hadduunan xiriirkaasi wax u dhimayn masaalixda guud iyo mid gobol kale toona, sida; kuwa dumiya diinta iyo sharfka guud.

25- Ha la dhiiri geliyo iskaashatooyin isugu dhafan qabiillo kala duwan oo xiriirro la yeesha iskaashatooyin ajnabi ah, hawshooduna ha gaarto heer caalami ah, iskaashatooyinkaasina ha ahaadeen nooc walba oo hawlaha aadanuhu galaan sida; kuwa ganacsi, kuwa wax soo saar, kuwa dhismo, kuwa wax barasho, kuwa fikir, kuwa dhaqan, kuwa diin faafin, kuwa cayaartooy, kuwa abwaanno iyo hal abuurro ah, iyo wixii kale ee aan mucaaradayn hiddaha Islaamka.

26- Ha abuureen guud ahaanba mas'uuliyiinta iyo wax garadku kaadirro u bisil la qabsiga habsami u socodka dunida, iyo jiilal hanta hawlaha mustaqbalka oo loo carbiyey siday u xamili lahaayeen hawshooda.

27- Ha soo dhiseen guddigu waax u xil saaran qiimaynta iyo daba galka (*monitoring and evaluation*) habsami u socodka guud ahaanba shaqada waddanka ka socota , kuwaas oo guud ahaan isla jira gaar ahaanna u kala jira gobol gobol. hadhowna kala raaca hay'adaha dawladda.

28- Ha sameeyeen guddiga dhexe ee dawladda masalayaa ila dhaqaale iyo wax soo saar oo hadhow noqda hanti qaran, taas oo aan ahayn mashaariic nafci ah, ee ah diyaarin mustaqbal.

29- Ha ku shaqeeyaan dhammaanba xubnaha ma'uuliyiinta ihi iskaa wax uqabso iyo nafhurudnimo, oo mid walbaa ha iska biilo jeebkiisa.

30- Ha la sameeyo guddi xisaabi xil ma leh, oo daba gala hanti dhawrka, iyo hawl wadeenadaba.

31- Ha la ogeysiiyo guud ahaanba shacabka rayidka ah wax kaste oo dalka soo wajiha iyo wixii soo galaba.

32- Ha la abuuro laan ay dadweynuhu ku dhiibtaan ra'yigooda, taas oo kala munaaqashoota ruux walba fikraddiisa.

33- Ha la abuuro golayaal fikirka iyo fiirooyinka lagu kala qaato oo madax banaan, lana dhiirri geliyo.

34- Ha la abuuro ilo qoondayn oo dhaqso loo quud darreeyo.

35- Ha la cusboonaysiiyo, dabadeedna ha lagu mideeyo meel ka gedisan tan iyo heerka ay maanta joogaan Dabeecadaha dadweynuhu.

36- Ha la faafiyo qodobo cusub oo looga hadlo maalinle ahaan.

37- Ha la is daba taxo Mashaariic mustaqbaleed oo hufan.

38- Ha la tix geliyo, oo ha la daraaseeyo Taariikhda macallinka ah.

39- Ha lagu ol-oleeyo galab iyo subax sidii looga guuri lahaa raas nololeedka aan subax walba ku soo waabariisanno ama aan ku cabbaar furanno.

40- Ha loo ogolaado gobolkii doona go'itaan iyada oo shardi lagaga dhigayo in uusan weerar soo qaadayn, in uusan dhul dheeri ah qaadanayn, in uusan dacaayad colaadeed abuurayn, in uusan cuuryaamin dhaqaale iwm abuurayn, in uu ogolaanayo xiriir saaxiibtinimo iyo walaaltinimo oo uu la lahaanayo guud ahaanba goboladii uu ka go'ay, oo uu kula noolaanayo derisnimo iyo wax wada qabsi.

41- Ha laga samro aslanba gobollada maqan u doodistooda.

42-- Ha laga caago dagaal shisheeye iyo mid sokeeyaba, oo ha la taagto callan nabadeed.

43- Ha laga dhigo dadka hubka, taas oo macneheedu yahay yaan ninna hantidiisa (qorigiisa) lagu qabsan laguna handadin ee maskaxdiisa ha laga baddelo oo ha loo geliyo maskax aan hubaysnayn.

44- Ha ka heshiiyaan guddigu halkii xarun u noqon lahayd fadhigooda iyo dawladda mustaqbalkaba, iyada oo laga taxa darayo hurgun fidno oo dambe oo ka yimaada eelka dhul sheegasho iyo goof is xijisiin.

45- Ha u gogol xaareen guddigaasi midnimo Soomaaliyeed oo aan ku salaysnayn hab reer baadiyood iyo reer guuraanimo ee ah mid la haysata nolosha casriga ah, ee ay adag tahay si aannu utiigsanno fogaanta ay naga fog tahay awgeed, marka ugu horaysa ee la xaqiijiyo in ay dadweynuhu taas u bislaadeenna, ha loo ol-oleeyo tallaabada xigta.

46- Ha qaban qaabiyeen guddiga iyo guddomiyahoodu doorasho caam ah oo ku salaysan dimoqraadiyad dhab ah (*caddaaladda Islaamka*), iyada oo la soo doorte kaste lagu

xirayo shuruudaha aan horay u soo xusnay ee loogaga baahan yahay ku kaste oo mas'uul ka noqonaya shacab Muslimiin ah.

47- Ha la joojiyo kaalmada shisheeye, kol haddaynan ahayn mashaariic horumarineed si ay dadku u gartaan wax soo saar iyo harjad.

48- Ha weydiisteen guddiga dhexe hanti yar oo hawl fulineed shirkadaha iyo hantiileyda ladan ka dib marka ay wax soo saarkooda soo ban dhigaan oo kobcaan.

49-Ha la furo guriga tartanka dhaqaalaha, ama isugu faanka maalka iyo awlaadda.

50- Ha la furo guriga tartanka Qur'aanka iyo cilmiga Islaamiga ah.

51- Ha la dhiiri geliyo guurka iyo awlaad korinta iyo tarbiyeyntooda.

52-Ha xisaabtamo qof kaste oo hadana xisaabtankiisa ha u sii gudbiyo qoladiisa iyo kooxdiisa, iyaga oo kuwada xisaabtamaya kana tashanaya, maxay danteenna shakhsi ahaaneed inoogu jirtaa? tusaale; Haddii aan dagaalka joojiyo dagaal la'aanta ma ku heli karaa intii aan dagaalka ku heli jiray hadday tahay magac iyo hadday tahay maalba.

53- Ha lahaadeen shirar joogto ah oo qiyaastii maalin dhaaf ah, guud ahaanba guddiyada; talo go'aaminta, hawl fulinta, daba galka, qiimaynta iyo isku xirka.

54- Ha la xaqiijiyo in aan madaxweyne dal xukumin ee uu shacabku is xukumo, isla markaasna uusan madaxweyne hormarin karin qaran kol haddaynan iyagu is horumarinaynin.

55- Ha laga dhawro awoodda in ay cid gooni ah ama shakhsi gooni ah faraha u gasho, oo ku kaste oo talo loo dhiibtaa ha ku ekaado hawl fuliye isku agaasima dadka iyo talooyinkooda.

56- Ha la kala saxiixdo mar walba heshiisyo qoraallo iyo markhaatiyo leh (*contracts*) oo haddii la jebiyo la qaadi karo tallaabooyin jebiyahaas isna lagu jebinayo.

57- Ha ku wareejiyaan guddigii soo halgamay xilka dawladda la soo doorto, dawladdaasina marnaba ma noqon doonto mid awood ku dhisan, sida aysan u yeelan karin awood sharci dejin oo ay u madax banaan yihiin, iyo sida aysanba u gaari karin go'aan kelitalisnimo.

58- Ha garawsado ruux walbaa in uu Insaan qaldami kara yahay, Eebbana uusan gar daraysanaynin ee uu falkiisa ku abaal marinayo.

59- Ha ku deg dago ruux walbaa Tawbad dhab ah oo ku dheehan khushuuc iyo Eebbe isu dullayn.

60- Ha bilaabo ruux walbaa in uu ka guurayo falalkiisii qaldanaa ee uu dareemay, hana saaro cagta toobiyaha toosan ee ay ku hagaagayaan shuquladiisa oo idili.

61- Ha waajibiso dawladdii la soo dhisaa in ay shaqaalaha dalku shaqeeyaan ugu yaraan saddex iyo toban saacadood maalintii, (6 da aroornimo ilaa 7 fiidnimo). Fasax aan ka ahayn labada ciidood ee Islaamiga ahna ha la joojiyo. Meelaha wax soo saarka sida Wershadaha iwm, waa in furnaadaan afar iyo labaatanka saac oo ay galaan laba koox shaqaale - (*shift*).

62- Ha laga dhigo waxbarashada asaasiga ah mid qasab ah oo lagu barto Afka Soomaaliga. Dugsiga dhexe, maadooyinka ha lagu dhigo Afka Carabiga. Dugsiga sarena Afka Ingiriisiga. Jaamacaddana Ingiriis iyo Carabi. Intaasna waa in uu sii dheeraadaa ol ole dadka oo dhan lagu barayo Diinta Islaamka iyo luuqadda Carabiga.

63- Haddii ay kala qaybsanaantu noqoto lama huraan, yaan lagu deynin dalka sida uu hadda ku socdo ee ah xuduudda lagu kala dhigay; waqooyi iyo koonfur. Hala ballaariyo xadka waqooyiga, oo ha la soo gaarsiiyo ilaa magaalada Gaal kacyo. Haddaan si kale u dhahn, Majeerteenku ha la midoobeen Isaaqa, dhul bahantaha, samaroonka-gedobiirsiga iyo wersangeliga. Taasi waxa ay faa'iidaynaysa dhawr arimood oo kala;

B- isu dheelli tir xuduudda iyo tirada dadka ee ku kala go'aysa dalka.

T- Isu dheelli tir dawladda ka jiraysa waqooyiga. Haddii ay dawlad isku sheegga waqooyigu ku socoto; isla saraynta, isla badnida, iyo is xijinta reerka Isaaq waxa ay khatar ugu jiraan in ay sii dhex dabaashaan halaag ka sii fool xun midka ka socda Koofurta. Xataa haddii laga nabad galo colaad uu la yimaado qabiilka Dhulbahantuhu. Waxaa khatar kale ah isa sii findhicilinta Isaaqa dhexdooda oo sii koraysa, mar kaste oo ay waayaan cadaw kale.

J - Is garabsi labada quwadood ee ka kala jira Boosaaso iyo Berbera ama Hargeysa ee ah dhan dhaqaale iyo ciidan.

X - Xasillooni iyo isku kalsooni deg deg ah oo ka dhacda Koonfurta. Tani waa qodobka ugu muhiimsan. Waxaa jirta in ay dadka Hawiyuhu cuqdad aan ilaa hadda sabateedu caddayn ka qabaan Majeerteenka. Sidaa darteed aysan marnaba u ogolayn in ay xukun u qabtaan. Ka soo horjeedka cuqdadaas, Majeerteenka qudhiisa oo eedo badan oo laga galayna tirsanaya, wanaagyo ay galeen sida ay is leeyihiina tirsanaya, waxa ay aaminsan yihiin in ay iyagu xaq u leeyihiin talada dalka.sidaa darteed, kol hadduu Majeerteen

ka qaado koonfurta cadaadiska iyo loolanka siyaasadeed ee uu ku hayo, bal waxaa la rajayn lahaa in ay mucaaradiintooda sida H/gidirtu waayaan wax dambe oo ay ku mar marsiyoodaan, ayna joogsato fidnadu, iyada oo ay sahlanaanayso jago qaybsigu.

Kh- Waxaa dhalan lahaa ama xoogaysan lahaa tartan dhaqaale iyo waxbarasho oo dhex mara labada dhinac ee dalka kala go'ay oo markaa isu dhigma dhan walba.

D- Waxaa sahlanaan lahayd isu soo noqod iyo isu soo xiiso dambe. Waxaa la ogsoon yahay in ay dadka reer waqooyi ka yara go'an yihiin dalka intiisa kale. Waxaa yar cilaaqada guur, ganacsi, qaraabanimo iyo saaxiibtinimo ee ay la leeyihiin koonfurta. Laakiin marka uu Majeerteen ku sii biiro iyaga, waxaa dhacaysa in ay go'I weydo cilaaqadii lala lahaa koonfurtu, oo labadii dawlad ee kala go'day shacabyadoodii way isku sii dhegenaanayaan.

65- ha lagu nuukixiyo rejada dib usoo celinta dawlad Soomaaliyeed nidaamkaas luudinta ah ee ku dhisan mabda' "tadarujka" ee ay shariicada Islaamku ku salaysan tahay. Taas waxa aan ula dan leeyahay: ha laga bilaabo sharciga iyo dhismaha dawladda Soomaaliyeed in gacan ku dhiiglaha looga tago waano iyo Alle soo xusuusin keliya, waa halka ay



maanta joogtee, ilaa laga gaarsiiyo in xabsi dheer lagu xukumo qofkii dariiqa ku candhuufa.

Si uusan dhaqaaqaasi u noqon dhalanteed iyo dhaan daba gaalle, waxaa lama huraan noqonaya in la helo kaadiro daacad ah oo u bisil hawsha una haya nafhurid iyo niyad bir ah oo loola jeedo Alle dartiis.

Haddiise sidaa loogaga dhabayn waayo waxaa dhab ahaan u dhacaysa in arintu isugu soo biya shubato qaraw iyo dheelalow run la mooday, sow ma aragtid in qarawgeenuba uu huradada noogu soo ban dhigo qaar ka mid ah faylalkii badnaa ee ku dhex cakirnaa caloosheena, ee kolkaa uu inoo kala falanqeeyo isaga oo noogu kala qaadaan dhigaya ama hab rajo iyo raaxo ama haba tiiraanyo iyo wel-wel.

Taas oo aan ugu dambaysta ku dhamayno soo toos iyo gacmo maran, oo aan inoo kordhin wax aan ahayn fikir iyo ruwaayad been ah oo hor leh, taas oo naga sii lumisa waqti iyo maskax. Sidaa waxaa ku masal noqon kara heshiis beenaadyada ay maanta in badan dadka dunidu isku maaweeliyaan iyaga oo isku qancinaya in ay qolo ku majixaabinayaan iyo in ay qolo qoor qabad ku xukumayaan.

Tan ugu weyn ee loo baahan yahayna waxa ay tahay in la helo bal wax Mabda' ah oo lagu kalsoon yahay, laguna

heshiiyo ama ha la iskula jiro ama ha lagu kala jiree, ka dibna la isku ixtiraamo oo qola walba goonideeda u dabra.

Waxaa kale oo iyana loo baahanayaa in la helo nafhurid, is daahirin iyo dib isu cusboonaysiin, taas oo ah in mar labaad la dhasho oo macneheedu yahay in weji cusub lala yimaado dunida.

Waxaa kale oo walaalayaalow lama huraan ah in marka la baadi goobayo xalka Il qota dheer lagu eego waxyaalaha la kala shinsanayo ee uu qof walbaaba ku tabanayo xaq ka maqan.

Tusaale ahaan marka aan taa ku sii bal ballaarino waxa aan soo qaadan karnaa mid ka mid ah cilladihii ay isku af garan waayeen balse ay marnaba isugu imaan waayeen kuwii iyaga oo hal qabiil ah goonida iskula baxay isku dayey in ay dawlad gooni ah noqdaan ee reer Soomaaliland.

Taasina waxay ahayd ka dib markii lagu dhawaaqay dawladnimo madax banaan ayaa waxaa dibadaha ka soo yaacay dhallin yaro u wada hanqal taagaysa xukun, ha u lahaadeen aqoon ama yeysan u lahaane. Hase ahaatee taasi waxa ay mari weyday raggii dhawrka sano kaymaha kju asqaysnaa ee quudan jiray dambaaburada rasaasta, ka dibna waxaa caan baxday halku dhegga ah: (Ina adeer tan anaa Kaadida u soo cabbay).

Waxayna kuwii in ay wax maamulaan doonayey u kala bexeen dhawr kooxood oo ku dhisan hab iyo goob dhaqameed ay ku kala jiraan labadii isku uurka seexatay, waxaana ka mid ahaa kooxahaas:

1- Maana Casiir, oo ah kuwii ka soo shaqaystay Khaliijka Carbeed ee doonayey in ay lacagtooda ku dalbaan talis.

2-Maana Faysto, oo ah odayaashii ku hawlanaa kala findhicilintii fidnooyinkii ka aloosnaa Koonfurta, iyo kufintii dawladdii Barre iyaga oo saynta ku sii wata MaanaFaystadoodii kale ee Xamar laga cayrshay.

3- Maana-Quusato, oo ah kuwii ka qab qablayn jiray dawladdii hore ee Barre, ka dibna ku soo daahay Xamar iyaga oo ka rajo qabay dawlad dambe oo la isugu yimaado, ayna hor boodaan mar kale.

4- Maana-Qaaxo, oo ah kuwii u soo dagaallamay ee jid iyo jaf kaste u soo galay iyaga oo naftooda u hurayey sidii ay dawlad Beeleed ku heli lahaayeen.

Tan ugu dambaysta ee ka mid ah khataraha la fialn karo waxa weeye mushkilada xuduud u samaynta dalka Soomaaliyeed. Waxa afarta baynajaho uga wareegsan dad ka mid ah isla qabiilada gudaha degan oo aan inaba haba yaraatee laga dhadhicin karin wax xuduud dawli ah la yiraahdo baa jirta. Si kaste oo ay Soomaali yeeshayna dadyowgaas iyoga ah iyo

dhulka ay degaanba ka soo dhacsan weyday dalalka deriska ah ee ay xukunkooda hoos yimaadaan. Hadaba waxa ay tani mar kale hurin kartaa dab ku dhasha si taxadar al'aan ah haddaan inta ay goori goor tahay laga sii fikirin oo aan qorshe la isla ogyahay laga degsan. Taasina ma hurayso in heshiisyo dhaxalgal lala kala saxiixdo dawladaha ay arintu khusayso sida Kenya iyo Ethiopia.

***ALLAHA NA WAAFAJIYO SIDII ROON.***

# TUSMADA BUUGGA

==================

Casharka Bogga:

Cutubka Koowaad.

HORTA YAA DUNIDA FASAHAADIYA?

1- Dadkaa Dunida Fasahaadiya.
2- Danaanada.
3-- Dabar goynta Danaanada.
4-- Qur'aan iyo Xadhith Qalad laga Fahmay.

Cutubka Labaad;

QABYAALADDA.

1-- Qabiil Qalad laga fahmay.
2-- Fasahaadka Qabyaaladda
3-- Qabyaaladda waa laga Digay.
4-- Siday ku dhamaatay Qabyaaladdii Carbeed.

- Cutubka Saddexaad.

MAXAA NALOO CADAABAYAA?

1- Waa maxay Cadaabku?
2- Fadaranimadeenii.
3- Cibaado qalloocinta.
4- Fool xumooyinkii Kharaaraa ee Waayadii Dagaalka.
5- Maxaan la dareemi weynay Cadaabka?

Cutubka Afraad:

AAYADAHA CIBRA QAADASHADA
EE LAGU SHEEGAY QUR'AANKA.

1- Suuradda Huud.
2- Qubane Suurado kale ah.
3- Suuradda Al-acraaf.
4- Geban gabo.

5- Miyaan is shababahnaa inaga iyo Yuhuudi?
6- Qoladee naga macangagsan.

Cutubka Shanaad.

KEENNEE GAR DARAN?

1- Waraysiyo dadban.
2- Ha naloo gar naqo.
3- Inta aan Qabiil ku doonayn.
4- Jawaabo runta lagu taabtay.
5- Yaa isku keen gubaya?
6- Kuwa inoo eedaysan.
7- Xaajada Ina Barre.
8- Dambiga guud ee Fidnoolayaasha.
9- Maxaa iska keen hor keenaya?
10 Sidee looga Gaashaantaa Fidno Dambe?

Cutubka Lixaad.

MUSLIM IYO MARREEXAAN MIYAA?

1- Waa maxay Dawladi?
2- Qaraabo xiriirinta iyo Qabyaalad abuuridda.
3- Qisadii Madexeey.
4- Qisadii Faarax.
5- Aragtida Culimada Diinta ee ku wejihan arrinta.
6- Siduu u dhacayey Xaalkii Xukuumaddu.
7- Yaa Hantida Dalka guran jiray?
8- Maxaa tusay Dadweynaha Marreexaan?
9- Sida Madaxweyne Loo noqdo. 208.

Cutubka Todobaad.

DAGAALKA:

1- Waa maxay Dagaalku sideese looga baxaa? 226.
2- Is Difaacidda.
3- Faa'iidada Dagaalka.
4- Horumar buu dagaalku Dhaliyaa.

TUSMO

Gogol dhig 5

Arar 7

Cutubka Koowaad:

WAA MAXAY SOOMAALI?

1- Soomaaliya 16

2. Meeshuu ka yimid Magaca Soomaaliyeed 21

2- Goormaa la maqlay Soomaali? 26

3- Xaqiiqada Magaca Soomaali. 31

4- Dabciga iyo Tirada Soomaaliyeed. 35

Cutubka labaad

MURAN KA TAAGAN

ABTIRSIGA SOOMAALIYEED.

1- Sidee isu kala xignaa? 42

2- Miyaannu Carab nahay? 46

3- Midduu Gumaystihii na baday. 52

4- Sida ay ku samaysmeen Qabiillada Soomaaliyeed. 58

5- Carraduu gaaray kala Faniinkii Soomaaliyeed ee hore. 66

6- Waa Maxay DAAROOD?. 72

Ogaadeen; 94

Marreexaan; 98

Harti; 106

Majeerteen 108

Leel kase 109

Warsangeli 109

Dhulbahante 110

Carabtii Maxamuud Saalax 111

Hab Iskuul 111

7- Waa Maxay IRIR? 113

B-Iidoor/Isxaaq; 121

T-Habar gidir; 128

J-Shiikhaal; 132

X-Hiraab; 136

Abgaal, 136

Murusade, 137

kh-Gugun dhabe iyo kuwa kale oo raaca;

Xawaadle 138

Jajeello 139

Xaskul Hawiye 140

Karinle Hawiye 140
Degoodi; 141
Murrale, 143
Garre; 146
8- Waa Maxay Digil iyo Mirifle? 149
B- Hadamo; 152
T- Liisaan; 154
J- Digil Deyeyaal 156
Kh- Kuwa kale; 162
Geda biirsay 163
9- Waa maxay Midgaan (boon)? 161

Cutubka Saddexaad

WAA MAXAY XALKEENNU?

0- Isku dayo Bidh bidhaamaya. 168
1- Ra'yiga Wadaadada.
2- Ra'yiga Cilmaaniyiinta.
3- Siday aniga Ila tahay.
4- Intuu ka kooban yahay.
5- Tixraacyada kuwa ugu muhiimsan;
6- Mahadnaq;
7- Filasho wacan;

## TIXRAACYADA KUWA UGU MUHIIMSAN.

1- qur'aanka Kariimka ah.

2- Siirada Ibnu Hishaam.

3- Qubane Axaadiis sugan ah.

4- Cruttenden, C. J. notes on the Mijjerthen Somalis.

5- Journal of the Asiatic Society of Bengal,.

6- Drake - Brockman R. E British somaliland, London, 1912 Majertein.

7- Haggemacher, G. A. Reise in Somaliland PME, 10(47).

8- Puccioni N. Anthropologia e etnografia delle genti della Somalia, vol; 3 Bologna, 1936 (Hawiya).

9- Swayne H. G. C. seventeen tribs through Somaliland. London, 1895 (Is-haak and Majeirtein).

10- C F, M. M. Moreno, il Somalo della Somalia, Roma, 1955, by; B. W. andrezejewski.

11- The northern Pastoral Somali of the Horn in peoples of africa, by; I. M. Lewis, New york, 1965.

12- Tiling, maria von. Die Sprache der Jabarti, Mit besonderer, Beruecksichtingung der ver wandtschaft von Jabarti and Somalia, parta 1,2. Zeitschrift fuer Eingeborenen, sprachen, 1921.

13- Cassanelli, lee v. Migrantions, Islam and Plitics in the Somali Benadir, 1500 - 1843.

14- ÞÕÉ ÇáÕæãÇá Ï . ÍãÏí ÇáØÇåÑí

15- ÇáÕæãÇá ÞÏíãÇ æÍÏíËÇ - ãÞÏíÔæÇ

16- Intern. Conflict Resolution using system of Engineering. (workshop)

17- Italian Colonialism in Somalia.

18-ÇáØÈÑí: ÊÇÑíÎ ÇáÂãã æÇáãáæß

**18-** The Somalis; their origins, migrations, and settlement.

19- The Somali Challenge from catastrophe to Renewal.

**20-T**he world book Encyclopedia. vol; 35.

21- Somalia Nation in search of a state. by; David and S.S. Samatar.

## MAHADNAQ.

Waxaan marka hore u mahadnaqayaa Alle awood weynihii kashaha ii siiyey in aan ku taag-taagsado buuggaan aan rajaynayo in uu wax ka baddelo xaaladda murugsan ee

dadkeyga iyo dalkeyga. mar labaadka waxaa mudan in aan mahad ballaaran u jeediyo Ustadh: Xirsi Maxamed Hilole (Laba garre) oo iga caawiyey xagga farsamada iyo isku dubbaridka iyo tifa tirka.

***WAXAAN U HIBEEYEY: JIILALKA SOOMAALIYEED EE MUSTAQBALKA EE KA NABAD GALA AAFADA QABYAALADDA, WAXAA KALE OO AAN KU XUSAYAA DADWEYNAHA SOOMAALIYEED EE CAAFIMAADKA QABA, KUNA DHIBAN HALAAGGA MAANTA.***

## *FILASHO WACAN.*

Bishaaro, dhammaanba akhristayaasha qiimaha iyo qaayaha leh ee la xiriira akhriska silsiladan nabad doonimo, wuxuu qoraagu; Qaasim Xirsi Duullaan-jecel u ballan qaadayaa in uu haddii Eebbe weyne, Allaha awoodda rasmiga ah iska leh uu ka raalli noqdo uu u soo bandhigi doono laba kitaab oo kale, kuwaas oo ku wada taxaluqa baadi goobka loogu jiro qaranimo iyo midnimo Soomaaliyeed oo dambe.

Labada kitaab midkood waxaa lagu cinwaaneeyey; Muqdishaa Marag ah, wuxuuna kaa haqab tirayaa warbixin tifa tiran oo ku saabsan fidnadii ka hurtay Muqdisho, maalintii Axadeed, 28/Dec/1990 kii, ama haddii si kale loo dhaho; Halaagii kala guurkii 1990 kii iyo 1990 iyo kala haadkii, oo badeshay sagaashan iyo kowdii. Wuxuuna buuggu taabanayaa dhacdooyinkii ka qulqulayey ardiga tan iyo intii ay dagaaladaasi ku socdeen xawligoodii ugu cuslaa ee 1996 kii, taas oo lagu soo aruuriyey hab muuqaal iyo markhaati ah ee aan maqal lahayn.

Kitaabka labaadse magiciisu waa; Mushkiladeenu waa Caqliga, wuxuuna qoraalkiisa oo dhami ku salaysan yahay, maxaa nagu dhacay? sidee noogu dheceen? maxaa noogu sabab ahaa? xagee nala ka haystaa? iyo maxaa inoo xal dambe ah?.

Haddaba sidaa iyo akhris wacan oo wanaagsan, kaas oo leh xiiso iyo kalgacal hamuuman oo hilowsan ayna isugu soo hiloobaan bahyaalkii isku wada Aabaha iyo Hooyada ahaa ee kala haaday.

**Waxaa allifay:** ***Qaasim Xirsi Faarax***

(Duullaan-jecel).

**Malaysia, 1995**

**E-mail: qasimhersi@yahoo.com**